Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

**XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA**

TEL. 21267

S.B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية

وزارة التربية والتعليم

مركز تطوير المناهج

تليفون ٢١٢٦٧

ص. ب ٧١٦٣


# SUUGAAN

## Fasalka Koowaad

## 1

# DUGSIGA SARE

# SUUGAAN
# Fasalka Koowaad
# 1

## DUGSIGA SARE

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
**XAFIISKA MANAAHIJTA**
MUQDISHO — 1983

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo
aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho

Waxa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
Xamar — 1983

# TUSMADA BUUGGA


Bogga

Gogoldhig Suugaan .................... 1

**Gabayo:**

Alleyl Dumay (Raage Ugaas) .................... 6
Allahayow Nin ii daran (Ugaas Nuur) .................... 8
Go'aha noo doorsha (Saahid Qamaan) .................... 10
Xiin Finiin (Maxamed Cabdulle Xasan) .................... 11
Ooggii horay nagu kaceen (Ismaaciil Mire) .................... 14
Baroor Diiq (Cali Jaamac Haabiil) .................... 17
Koofil (Maxamed Cabdulle Xasan) .................... 20
Arligaa la kala boobayaa (Faarax Nuur) .................... 22
Taleex (Ismaaciil Mire) .................... 24
Tirtirsi Culumo (Maxamed Cabdulle Xasan) .................... 27
Senge Dhabarkii (Xuseen Xasan) .................... 29
Dagaal (Qawdhan Ducaale) .................... 30
Qayaashmaash Libaax (Xuseen Dhiqle) .................... 33
Sidii Geel Harraadoo (Cilmi Boodhari) .................... 35

**Geeraar:**

Ka Sabaan Ka Sabaan (Faarax Nuur) .................... 38
Yarad Diid (Sheekh Cabdi Allamagan) .................... 39

**Sheekooyin:**

Qurac Madoobe iyo Guurkiisii (Ibraahim Cali Riyaale) .................... 40
Raqba waa ku rageed .................... 43
Deeqsi ma Deego (Axmed Maxamed Qaadi) .................... 45
Waa Xaq (Axmed Cabdiraxmaan) .................... 48

**Curis:**

Biyuhu Waa Halbowlaha Nolosha (Axmed Maxamed Qaadi) .................... 50
Saadaasha Roobka (Axmed Maxamed Qaadi) .................... 52
Murti iyo Maahmaah .................... 53
Riwaayad Dagaalkii Beder .................... 57
Dagaalkii Beder .................... 58

# HORDHAC

Maadaama saddexda fasal ee dambe (IV, V, VI) ee dugsiga Baraymariga ay ardaydu ku qataan maaddada Suugaanta isla markaasna ay maadadii kula kulmayaan Dugsiga Sare, waxa khasab noqotay in ay labada heer ku kala xeeldheeraadaan xagga afka ay mawaadiicdu ku qoran tahay iyo xagga fikraddaba; si barnaamijka iyo heerka kasmada ardayga oo yaallaa la socota da'diisa, ay isku waafaqaan.

Waxay qorayaashu ka cudur-daaranayaan iyada oo taasi dhibaatooyin door ah lagala kulmay oo ay inta badan u suurogeli weyday. Waxa markaa la isku dayey, si shuruudda loo dhammayn karo, in qaybaha Suugaantu, sida ay ugu kala cuntami karaan da'aha ardayda, loogu kala badiyo labada heer, (matalan; Dugsiga Baraymeriga waxaa loo badiyey: sheekooyinka, heesaha, gabayada fudud; Dugsiga Sare; gabayada, murtida iyo maahmaahda, riwaayadaha...)

Qorayaashu, waxa kale oo ay ka cudur-daaranayaan in aan buuggani marnaba dhammaystirnayn shuruudaha baridda suugaanta; sidaas awgeed, waxay codsi ahaan ugu jeedinaynaa barayaasha dhigi doona maaddada in ay ku dadaalaan haqabtirka, bojinta iyo dhaqan-gelinta midhaha qabyada ah. Waxa kale oo ay isla mar ahaantaa ogeysiinayaan barayaashaasi in ay geestooda mas'uuliyad culusi ka saaran tahay baadhista, ururinta iyo kobcinta suugaanta guud ahaan.

Xafiiska Manaahijta wuxuu u mahadnaqayaa Jaallayaashii ku hawshooday soo saaridda buuggan, gaar ahaan: Cabdullaahi Maydhane, Cabdullaahi Cali Axmed oo soo ururinta mawaadiicda intooda badan lahaa, Axmed Maxamed Qaadi iyo Maxamed Cabdiraxmaan oo qoraalka, ururinta, sharax iwm., shaqo fiican ka qabtay. Xasan Aw-Daahir Qaalib oo sixidda, dib-u-qorka iyo isku dubbaridka lahaa.

Waxa mar Labaad Saxay iskuna dubbariday Maxamed Geelle Diiriye.
Waxa iyana mahad gaar ah leh Wakaaladda Madbacadda Qaranka oo hawl wanaagsan ka qabtay daabacaadda buuggan.

*Maamulaha Xafiiska Manaahijta*
*Xasan Daahir Obsiiye*

# GOGOLDHIG

*Suugaantu waa maxay?*

Ereyga «Suugaan» Soomaalidu waxa ay u taqaannay asalkiisii hore dhowr macnayow oo kala duwan. Mar «Suugaan» waxaa loo yaqaannay: Madowga Dhirta; oo ninka sahan ka yimaaddaa marka uu meel doogle soo arko waxa uu odhan jiray: meel heblaayo suugaan bay leedahay. Mar kale dadka qaarkii waxa uu u yaqaanney hadalka gunuunuska ah ee aan ujeeddadiisa si fiican loo garanayn; oo waa tuu ninkii maahmaahay yidhi,«Hilib sooryo maaha; doqoni sokeeye maaha; suugaani hadal maaha» . Waxaase «Suugaani» ku caan ahayd, oo carrabka dadku u badnaa, in ay tahay hadalka dhaqan-galka ah ee dhuuxa iyo murtida leh.

Imminka waqtigan aan ku jirro sida eray waliba u kobcayo ee macnihiisu ama fikradaha uu u taagan yahay u badanayaan, ayaa erayga suugaanna macnihiisu u fiday.

Suugaan, marka aynu hadda si guud ahaan ah u eegno, waxa aynu ku tilmaami karnaa magac hadh ah oo dallaalimeeyo macnayaal iyo fikrado badan. Suugaanta kol waxaynu uga hadalnaa qayb ka mid ah waxqabadka bani'aadanka oo ka duwan matalan «ciyaaraha, Sayniska iwm.» Waxqabadkaasoo bulsho walba dad sugani u gaar yihiin; dad badanina isticmaalaan — dhagaystaa ama ka akhristaa jaraa'idka, buugaag iwm. Waxaa kale oo aynu «Suugaan» uga hadli karnaa, wax u gaar ah ummad, sida Suugaanta Carabta, Suugaanta Maraykanka, Suugaanta Afrika, iwm. ama wax casri taariikhda baniaadamka ka mid ah u gaar ah, — Suugaantii ka horreysay Islaamaka, Suugaantii qarniga Labaatanaad, Suugaantii waqtiga ay Afriki Xorowdey.

Si siyaabaha aan kor ku soo sheegnay ka yar duwan, ayeynu ugu hadli karnaa. Waxaa aynu odhan karnaa, mararka matalan aynu hadleynno maaddo gaar ah oo ka mid ah aqoonta bani'aadamka, wixii laga qoray ama lagu ururiyey, sida suugaanta kimikada, suugaanta juqraafiga, xataa suugaanta cilmiga afka.

Ugu dambayn waxa aynu odhan karnaa suugaan «maaddo» ka mid ah maaddoyinka waxbarashada ee lagu dhigto dugsiyada, Jaamicadaha iyo macaahidda Waxbarashada ee kale, sida — Taariikh, Kiimikada, Farshaxanka iwm.

Suugaantu, in kasta oo ay macnayaalka kala duwan qaadan karto guud ahaan, haddana gaar ahaan su'aashii ahayd: Suugaantu waa maxay? Kama aynaan jawaabin. Suugaanta waxa asalkeedu yahay Afka. Afka waxaa lagu macneeyaa: codadka sugan ee uu bani'aadamku ku dhawaaqo si ay ugu suuro gasho is afgarad u fududeeya wada noolaashadooda. Afku marka, wuxuu saameynayaa isdhexgalka bani'aadamka oo dhan: Isasalaan, wax is weydiin,wax isku sheegid, war isa siin, warbixin, dood iwm. Taasi waa heerkii asaaska ahaa ee faa'iidada afka. Suugaantuna oo afka asal ahaan salka ku haysa, waxa ay farac ahaan ku dhacaysaa heerkaa aan soo sheegnay ka ku xiga.

Waxaana weeyaan marka aynu si kooban u sheegno qayb ka mid ah afka oo xambaarsan ururinta iyo xulidda murtida, xikmadda iyo waayo'aragnimada bani'aadamka.

**Qaaybaha Suugaanta:** Guud ahaan suugaanta waxa aynu u qaybinnaa: Maanso, Sheeko, Curisyo, Murti iyo Maahmaah, Dood iyo Baniso (qaarkood).

**Taariihda Suugaanta Soomaaliyeed:** 21kii Oktoobar 1972kii ka hor, waxa ummaddeenna Soomaaliyeed haysatay nasiib-darro ka soo gaadhay afkeenna oo aan qornayn. Far la'aantaasi waxa ay ina badday in dhaqankii, iyo suugaantii dhaxalka inoo ahaan lahaa ee kaydin iyo kobcin da'iba da' ugu reebi lahayd — ilaa intii ummaddeennu jirtey, ay badidiisii luntay, oo maanta waxaa laga hayaa uu yar yahay. Jawharaddii xikmadda Soomaaliyeed — noloshii baadiyaha ee hodanka ahayd iyo ilbixii cariiqa ahaa ee bandarada xeebaha; ee ay ka mid ahaayeen Saylac, Buloxaar, Hobyo, Marka iwm. Midna waa wax aan maanta meel laga soo qabtaa aanay jirin.

Maanta oo nasiib wanaag aynnu ku jirno casri indho-baraqsi ah oo aynu halgan iyo xusul duub ugu jirno baahista iyo soo-noolaynta dhaqankeenna dhan kastaba; haddana marka aynu meelaynta taariikhda suugaanta iyo habaynteeda eegno waxa aynu aragnaa in qoraal la'aantii awgeed, waxa aynu ka sheegnaa uu u badnaanaayo «Waa la yidhi, baa la yidhi» aan sugnayn. Ruuxii markaa baadhista ka shaqaynayaana, wuxuu dhib ka mudanayaa xaqiijinta asalka shaygaa matalan gabayga waqtigii la tiriyey ama qofkii tiriyey; ama maahmaahdaa heblaayo yaa curiyey. Markaa way adag tahay sida loo yidhaahdo casrigaasaa ugu horreysay suugaan Soomaaliyeed, ama hebel iyo hebel ayaa ugu horreeyey hal abuurka.

Markaa, hadda waxa aynu isku dayeynaa in aynu bal meeleyno taariikhda suugaanta, ilaa inta wax sugan laga og yahay. Waxa badanaaba la isku raacay in ninka la odhan jirey Raage Ugaas oo noolaa Qarnigii sagaal iyo tobnaad bilowgiisii, uu ugu horreeyey nin gabayga Soomaaliga luqadan hadda lagu qaado ee «Hooyaalayey, Hooyaalayey» — da ah ku qaada. Waxaa raggii gabayaaga ahaa ee ay Raage isku waqtiga ahaayeen oo hadaayahaa noolaa iyana ka mid ahaa ninka la odhan jirey Ina-Jadeer iyo Sheekh Cabdiraxmaan Allamagan oo isagu xagga geeraarka ku caan ahaa. Markaa, innaga oo si ku meel gaar ahaan nimankaa bilowgii Suugaanta Soomaaliyeed uga dhiganayna waxa aynu isku dayeynaa in aynu taariikhda Suugaanteenna afar da'ood ama casri u qaybinno. Afartaa casri oo casriba buug — afarta buug ee kani ugu horreeyo kaga hadli doonno, waxay qaybintoodu u ekaan doontaa sidatan:

1. Casriga ugu horreeya oo qiyaastii ahaanaya laga soo bilaabo hadaayahaa Raage Ugaas noolaa ilaa qarnigii baraarugga ummadda iyo waddaniyaddu bilaabantay.
2. Casriga ku xiga waa, laga soo bilaabo waqtiyadii dagaalkii labaad ee dunida ilaa markii Ummadda Soomaaliyeed gobannimada heshay 1960kii.
3. Xornimadii ilaa iyo dhalashadii Kacaanka intii u dhexeysay waxaa Ummaddeennu soo martay taariikh gaar ah; sidaa ahaanna, inkasta oo muddadaasi gaabnayd oo sagaal sannadood oo keliya ahayd, waayo'aragnimada yaabka leh ee ummaddeennu soo martay awgeed, waxa ay muddadaasi mudatay in aynu ka dhiganno casri ka mid ah taariikhda Suugaanteenna.
4. Ugu dambeyntii waxa aynu kaga hadli doonnaa dhalashadii Kacaanka iyo waqtigan aan ku jirno.

**Casrigii u horreeyey:** Suugaanta iyo fanku (farshaxan, miyuusigga, ciyaar iwm.) waxa weeyaan muraayadda laga arko nolosha ummadda guud ahaan — heerka dhaqaalaha, fasallada bulshannimo, kasmada siyaasiga iwm. Sidaa awgeed, suugaanta lama dorsi karo, baadhisna laguma samayn karo, ilaa lagu meeleeyo taariikhda, oo loo eego, qaybta markaa suugaanta laga darsayo, nolosha guud ee dadka ay khusaysaa ku noolaayeen. Iyada oo markaa taasi ina xukumayso, waxa lagama maarmaan noqotay in barashada suugaanteenna iyo taariikhda ummaddenna aynu is-barbardhigno, si aynu si ifan ugu aragno xaaladda dadkeennu ku dhaqmayeen casriyadii soo maray.

Haddaba, casrigan suugaantiisa aynu buuggaan Koowaad kaga hadlaynaa, waa casri dheer oo saamaynaya wixii ka rogan baraaruggii iyo gobannima-doonkii, hase yeeshee, waa casri noloshii ummaddeenna aan wax badani ka qornayn: sidaas awgeedna aan wax badan laga aqoon. Taas macnaheedu ma aha in aynaan lahayn dhaqan sal adag leh oo muddo soo dhisnaa, waxaase sidaa yeelay innaga oo soo marnay mufaaj'aat taariikhi ah oo Innagu liddi ahaa. Haaddaynu si kooban ugu hadallo, waxa joharadda dhaqankeennu ku soo ambaqaaday laba meelood.

Waa mide, sidaynnu ogsoon nahay, Soomaalidu waxay ku noolayd miyi — xoolo dhaqato iyo beeralay midba. In kasta ooxoolo dhaqatinnimada iyo reerguuraaga aad mooddo in aynnu ku caan ahayn. Noloshaasi miyi waxay ahayd mid qolo qolo dagaal, xoolo-badani-ku-faan, dhiirranaan, deesinnimo, aftahamo iwm. ku dhisan. Waxay ahayd mid, walow aanay jirin fikradda dawladnimo ee aynnu hadda naqaanna, dhismaheeda siyaasiga ah, dagaalaha iyo dhaqankuba qoto dheerayeen, hodanna ahaayeen. Nolasha miyigu inkasta oo ay ahayd mid yaalla geeddi iyo guuraannimo lagu dhaqmo; oo dadku dhib iyo xusul duub dagaal ah kula jireen dabiicadda, waxa ay soo saartay dad bir finiin ka hadhay ah oo adag. Dad fikiraya oo inooga tegey qaniimad suugaan iyo xikmad ah.

**Ilbixii bandarka:** Waxay taariikhdu shheegaysaa in Ummadda Soomaaliyeed lahaan jirtey ilbax madani ah oo ay aad ugu magac dheereyd. Ilbaxaasi wuxuu u qaybsanaa mid hore oo taariikh hore jiri jirey yaallaan, lagu xasuusto ganacsigii dalkeenna iyo Masaaridii hore ka dhexeyn jirey. Kaa isaga macluumaadka innaga soo gaadhay aad bay u kooban yihiin. Waxaa ku xigtay in markii Diinta Islaamku dhulkeenna soo gaadhay ay Diinta sideen dad Carbeed, kuwaas oo isla mar ahaantaas keenay magaalooyin iyo dhaqan degganaasho ah. Waxa muddo yar kaddib ka biglay xeebaha dalkeenna magaalooyin cusub oo ay ka mid ahaayeen: Muqdisho, Marka, Buloxaar, Saylac iwm. Magaalooyinkaasi waxay ku fideen berriga gudihiisa. Waxaana dhismay magaalooyinka Ifaat, Dhogor, Harar iwm. Magaalooyinkaa, bad iyo birriba, waxay lahaayeen dhaqan ka yar duwan baadiyaha, hase yeeshee, sidiisa u hodan ah. Waxa ka mid ah ciyaaro nidaamsan, riwaayado, guryaha nimanka madaxda iyo ganacsatada waaweyn lagu dhigo oo miyuusig iyo gabdho ciyaarta ku fogaaday ka qayb geli jireen. Waxaba la yidhi, marka taariikhda riwaayadda Soomaaliga ah laga warramayo, riwaayadda Banaadiriga ahi waxay asalkeedii hore k atimid maadaysyadaas guryaha lagu sameyn jirey iyo tartan gabay ah. Gabaygu wuxuu u badnaa Af-Carabi, Qasiidooyin Nebi ammaan ah, iyo kuwo Tawasal Awliyada iyo Sheekhyada lagu ammaani jirey ahaa. Sidaas awgeed, waxaa maanta innaga soo gaadhey suugaantaa Bandarka waxay ku qoran tahay Carabi.

Sidaynu hore u soo sheegnay waxay suugaanteennu u qaybsan tahay: Maanso, Murti iyo Maahmaah, Riwaayad, Dood iyo Baaniso, Sheekooyin iyo Curisyo, buuggaanna waxa aynu isu xijisiinnay sidan:

1. **Maanso**: Maansadu waxa ay u qaybsan tahay: Gabay, Geeraar, Jiifto, Guurow, Saar iyo Hees. Nasiib-darro buuggan waxa aan ku soo darray keli ah gabay, geeraar iyo hees. Qaybaha kale way noo suuro geli weyday in aannu iyana wax kaga soo darro.

Gabayada iyo geeraarrada buuggaan ku jiraa, waxa weeyaan kuwo, sidaan horey u soo sheegnay ku saabsan casrigii ugu horreeyey. Waxa badi maqashoodu ku fadhiyaa noloshii iyo dhaqankii miyiga. Waxyaalaha gabayaaga Soomaalidu ka gabyijireen ee ku xusan tixahan soo socda, waxaa ka mid ah: Faallayn nolosha adduunka, siyaasad, xikmad, faan, baroordiiq, sifaale, quruxda geela, dabeecadda, haweenka iwm. Waxa kale oo intaa dheeraa oo aannaan iyaga buuggan isaga ah ku soo darin. Ku faanka qabyaaladda, guubaabada dagaalka qabyaaladda, isku dirka iwm.

Gabayga Soomaaliga ahi wuxuu ahaa marriinka la isugu tebiyo wararka, aqoonta iyo taariikhda hiddaha. Gabayguna wuxuu ahaa macallinka bulshada.

2. **Sheekooyin iyo Curisyo:** Sheekooyin iyo Curisyo qoran ama korka laga hayaa oo dhaqankeenna soo jirey ma jiraan ama waa wax yar. Run ahaantii halka sheekooyinka iyo curisyada casriga ah. Soomaalidu waxay lahaan jirtey wax la yiraahdo «Dood iyo Baaniso». Dood iyo Baaniso wax maanta ka qorani ama laga hayaa ma jiraan, sidaas awgeed, buuggan waxba kuma aannu soo darin. Doodda iyo Baanisadu waxay ahaayeen hadalka murtida ah ee xeer-beegtii geed iskugu timid oo gar laba qabiilo ama laba nin dhex taalla qaadaysa, ku hadli jirtey. Laba kooxood ee garramaysa, midba marka uu gartiisa soo bandhigayo wuxuu ku halqabsan jirey hadallo murti ah, maahmaaho, tixo gabay ah, taariikh iwm. Ninkii hadal cun ah waxaa baantiisa laga sheekayn jirey muddo, reerka nin garyaqaan ah oo ba'ani ku jiraan wax uu u ahaa qaniimad weyn.

Imminka mar haddaynaan wax qoran ama si fiican wax uga haya heleyn; bal inta qaybtaa qiimaha weyn leh ee suugaanteenna ka mid ah baadhis lagu samaynayo, waxaynu halkoodii u qaadanaynaa sheekooyin iyo curisyo casri ah, hase ahaatee, isku dayeya in ay dib u sawiraan noloshii hodanka ahayd ee Soomaalidii hore ku dhaqmi jirtey.

**Murti iyo Maahmaaho:** Ummaddeennu waa ummad kaftanka iyo xifaalaha ku caan ah. Dadka Soomaaliyeed dhibo kasta oo ay ku jiraan waa kuwii kaftama oo hadallo xikmad iyo murti leh is-dhaafsada. Murtida iyo maahmaahyadu kuma koobna kaftanka iyo xifaalaha oo keli ah; ee ka odhaanshaha hadal dhaqan-gal ah nolosha maalinba ka maalin guud ahaan. Sidaas awgeed, murti iyo maahmaahda oo door weyn kaga jirta dhaqanka iyo suugaanta ummaddeenna, ayaa lagama marmaan ka dhigtay in aynu u qaadanno qayb ka mid ah suugaanta.

**Riwaayadaha:** Riwaayadda Soomaalidu waxay ka soo aasaasantay laba meelood. Waa mide, sidaan horey u soo sheegnay ilbaxii magaalada ee Soomaalidu lahaan jirtey waxa uu gaadhay heer faakihaysiga laga gaadho in guryaha lagu sameysto xaflado ay ka qayb galaan rag miyuusikada tuma iyo hablo ciyaara. Waxaana jirta in riwaayadda Banaadiriga ah ee maanta, taas ka soo abuurantay.

Dalka intiisa kale, gaar ahaan geesta woqooyi, waxaa loo nisbeeyaa riwaayaddu in ay la dhalatay dugsiyada. Halkaasoo macallimiinta Soomaaliyeed ay dadweynaha ku baraarujin jireen wanaagga waxbarashada, iyagoo ka bilaabay riwaayadi Carabi ah, hase yeeshee, ku habboon dhiirrigelinta waxbarashada.

Muddo yar kaddib, waxay riwaayaddu, dalka meel kastaba u noqotay qalabka ummadda Soomaaliyeed kula dagaallamaysay gumeysiga. Ugu horreyntiina riwaayadahaasi waxay ahaayeen kuwo Carabi ah oo ka sheekeynaya siyaabihii Nebigu (s.c.w.) ula dagaallamayey gaalada (Dagaalkii Beder) iyo taariikhda Islaamka meelaha caddaaladda iyo xukunka ku saabsan. Iyaga oo gumeysiga u quusinaya caddaaladda xukuumaddiisa, waxa ay dhigeen riwaayad la odhan jirey «Xajaaj Bin Yuusuf», ilaa markii la gaadhay in riwaayadaha Af-Soomaali lagu dhigo, heerkoodiina ijtimaaci noqdo.

Taariikhda riwaayadda Soomaaliga ah oo ka soo kortay Af-Carabiga ah awgeed, ayaannu buuggan ugu soo darray riwaayad ka hadlaysa sidii Nebigu ugu dagaallamay faafinta Diinta.

## Alleyl Dumay (Raage Ugaas)

Raage Ugaas baa gabadh la odhan jirey Cabban Cilmi Hagoog jeclaaday, in uu guursadana wuu rabay. Sida la sheegay gabadhii waxa ka guursaday nin la odhan jirey Axmed Ugaas (Wiilwaal). Raage arrintii wuu ka gabyey waxa uuna yidhi:

1. *Alleyl dumay, albaabbadoo xidhan uunku wada seexday*
2. *Onkod yeedhay uugaamo roob alif banaadiiq ah*
3. *lihdaydabixi baa libaax iman la moodaayey*
4. *Raggase adhaxda iyo ooftu waa udub-dhexaadkiiye*
5. *Labadii wax laga eegi jirey waan ka awdnahaye*
6. *Halkaan aa ka leeyahay Ilaah keliya uun baa og.*
7. *Aboodigu ma lalo garab hadduu iin ku leeyahaye*
8. *Orod uma hollado ooglihii adhaxda beelaaye*
9. *Ma aarsado il iyo oof ninkii iimi kaga taalle*
10. *Aroos uma galbado nimuu wadnaha arami jiifaaye*
11. *Geeluba kolkuu oomo waa olol badnaadaaye*
12. *Sidii inan yar oo hooyadeed aakhiro u hoyatey*
13. *Oo aabbaheed aqal mid kale meel illin ah seexshey*
14. *Hadba waxaan la urugoonayaa uur-ku-taallada eh*
15. *Ninkii ooridiisii rag kale loo igdhaan ahaye*
16. *Ninka ilo biyo leh soo arkoo ooman baan ahaye*
17. *Nin Ugaas walaalkiis yahoo eeday baan ahaye*
18. *Af-dhabaandhow aayar ninkaa aamusaan ahaye.*

*I.* **Weydiimo:**

1. b) Gabayga ayaa Curiyey ................................................ ?
   t) Sababta uu u tiriyey maxay ahayd .................................. ?
2. Lixda tuduc ee gabayga ugu horreysa si tifaftiran uga faallood ........... ?
3. b) Urugada iyo uurku-taallada haysa maxa uu ku tilmaamay ............ ?
   t) Tuducyada sidaa muujinayaa waa kuwee ............................ ?
   j) Waa maxay Af-maldaha uu adeegsaday markuu sidaa muujinayey .... ?
4. Soo qaado tuducda uu ku muujinaayo ...................................
   b) In gabadh laga guursaday.
   t) Dhaliisha uu ka tirsanayey qoyska ladan ee uu ka dhashay.

**II Sharrax**

1. Dumay: madoobaaday uunku naflayda. (Markii habeenku madoobaaday nafleyduna seexatay).
2. Uugaamo roob: ufada, uurada: dabaysha, alif: kun, banaadiiq: qoryo. (roobka oo da'ya oo onkodaya, lana moodo rasaas la ridayo)-
3. lihdayda: taahayga: bixi yeeraya. (taaha iga baxaya waxaa la moodaa libaax soo socda).
4. Adhaxda: dhabarka iyo miskaha isgalkooda, udub dhaxaad: tiirka. cadka tiirka hayaa waa laf dhabarta).
5. Labadii wax lagu eegi jiray: labada indhood.

   (gabyaagu waxa uu leeyahay: indhaha wax kama arko dhibaatada haysta darteed).

6. Aa: eray cabasho, (Ilaahay uun baa og meesha aan ka cabanayo).

7. Aboodigu: haad lala, iin: nabar. (shimbirka aboodigu ma duuli karo haddii uu garabka dhaawac ka qabo).

8. Uma hollado: iskuma dayo, ooglihii: faraskii. (farasku haddii uu dhabar beelo ma ordi karo).

9-10 Uma galbado: ma galo, arami: nabar raagay (nin xanuun joogto ah oofta, indhaha iyo wadnaha ku lihi ma aarsado aroosna ma galo.

11. Olol: codka Geela (geelu markuu harrado waxa uu dhibaatada haysa ku sheegtaa olol badan).

12-14 Hoyatay: tagtay, Illin: kadin, urugo: warwar; uur-ku-taallo: murugo. (sidii gabadh yar oo dhimatay hooyadeed, oon cidi daryeelayn, ayaan murugo joogta ah ku seexdaa).

15. Ooridiisii: naagtiisii, igdhay: guuriyey (waxaan ahay nin ooridiisii laga qaaday oo nin kale la siiyey).

16. ilo: laago. (waxaan ahay nin haweenay u qalanta doonay).

17. Ugaas: boqor. (nin walaakii oo baqor ahi ka eexday baan ahay).

18. Af-dhaan-dhow: sababo, (nin la dhacay oo haddana la sasabayo baan ahay).

## UGAAS NUUR UGAAS ROOBLE.

Ugaas Nuur waxa uu ahaa boqor taariikh weyn ku lahaa dhulkan Soomaaliyeed siiba degmooyinka lagu tilmaamo Booraama iyo Saylac ka hor intii gumeystuhu aanu qaybsanin waddankeenna iyo Afrika inteeda kaleba.

Waxa uu dhashay qarnigii sagaal iyo tobnaad afrtanaadkiisii, waxa la boqray isaga oon qaangaadhin, waxa uuna dhintay qanigan labaatanaad bilowgiisii. Dunida waxa uu ku dhaafay xikmado iyo murti xasuus iyo rayn rayn nolosha dhinac walbaba saameeya.

Tix gaaban oo gabayadiisii ka mid ah haddii aynnu eegno waxa aad ka arki kartaa hufnaanta Siyaasadda iyo diblomaasiyadda uu ku maamuli jiray dadkiisa.

1. Allahayow nin ii daran maxaan daafka hore seexshay
2. Nin ii daaqsanayaa maxaan daafida u kariyey
3. Jidhku nin uuna doonayn maxaan hadalka deeqsiiyey
4. ma degdegee xaajada maxaan ugu duqaad yeeshay
5. Weji dabacsan, dayma aan dareen gelin dubaaqiisa
6. Debna furan dabuub una ka didin deexashiyo muuso
7. Qosol dibadda yaallon ka iman dhuunta dacalkeeda
8. Kanaan degey kanaan doorka biday kani dan baan mooday
9. Waxaan, dood kaftan ah Sheekada ugu daleeyaaba
10. Dabin kaan u dhigay maalintuu degelka soo saaro
11. Intiyoon dawaarka u rogoon xeeladda u daadsho
12. Isagoon Digniin qabin maxaan kaga dayaan siiyey

**1. LAYLI:**

B. Ninkan u daran iyo kan u daaqsanaya gabyaaga maxa ay ahaayeen ..........?
T. Maxa uu uga jeedaa «Nin ii daaqsanaya7 ..........?
J. Maxaa uu ka yeeli jiray ...........?
X. Sidee baad ula dhaqmi lahayd adigu .........?
Sababta sheeg ......................?
kh. Adoo Fiirinaya tuducda saddexaad tuducyada daba yaalla ka fallood sida gabyaagu uu hadal u deeqsiin jirey nin aan rabin: uguna dulqaad yeelan jirey.

D. Adoo tixraacaya tuducda siddeedaad: Goobta gabayga uu ka tiriyey maxay ahayd?

R. Haddii aad eegto saddexda tuduc ee u danbeeya gabayga, waxaa aragtaa in ay ka geddisan yihiin fikradda gabayga intiisa hore ku dhisan tahay.
Sababtu waa maxay ...............?

S. B. Ula jeeddada guud ee gabaygu waa maxay ......?
T. Gabayga guud ahaan fikradda aad kala baxday si kooban uga hadal.

**II Sharrax:**

1. Ii daran: colkay ah, daafta hore: dubada, ii daaqsanaya: ii xoogeysanaya, daafi: firi la quuto, (maxaan nin ii col urursanaya soo dhoweeyey oo wanaajiyey).

2. (nin aan necbahay, maxaan hadalka u macaaneeyey).

3. (arrimi marka ay ila soo gudboonaato, kuma degdego e, maxaan u hubsaday una dulqaad yeeshay).

4-5. Debecsan: furfuran dubaaq: Niyadda (dabeecad furfuran oo aan laga shakinin oo uu wehliyo qosol aan dhab ahayn maxaan u muujiyey cadawgeyga).

6. Maxa aan ku maaweeliyey cadawgayga erayada u gaarka ah ciyaarta shaxda).

dabuub: hadal, deexasho: xeelad; muuso: qosol-

7. Daleeyaba: qurxiyaba (waxa aan cadawgayga sheekada ugu qurxiyaa ereyo kaftan ah).

8-10. Degelka: qaarka hore, dawaarka u rogo: suryada u jiido, xeeladda u daasho: dabinka u dhigo, deyaan: codka qalabka wax lagu dhuftaa sameeyo, (cadawgeyga xeeladahaygii dartood marka uu dabinkii aan u dhigay soo galo ayaan si sugan uga aargutaa, ugana guulaystaa).

19 - Waalaahadhiisiin

Ugaasnuur ugaas rooble

waxuu dhashay sagaal iyo tobaad afartanaad

1/10

SCRN

## GABAY:

*Go'aha noo doorsha : Saahid Qamaan .*

Saahid Qamaan waxa uu ahaa nin gabyaa ah, oo aad ugu xeel dheeraa gabayada xikmadda, waanada iyo duur xulka .

Saahid waxa uu noolaa qarnigii 19aad badhtamihiisii. Gabaygan waxa uu u tiriyey nin ay wada shaxayeen, xididna ahaayeen oo Faytin la odhan jirey. Faytin ruuxiisu waxa uu ahaa nin gabyaa ah, oo aad u magac dheeraa. Qamaan waxa uu qabey gabadh Faytin adeer u ahaa oo aan da'deedu aad u weynayn.

Gabadha mid kale ayaa ka yarayd, kana firfircoonayd. Qamaan waxa uu uurka ka jacleystay inay gabadhaa kale ku fiicnaan lahayd. Maalintii dambe ayuu Faytin la shaxay, gabayna u dusiyey oo yidhi : —

1. Gammaankiinna badan Feytinow gobolba waa cayne
2. Qaar baan ka-goor iyo ka-goor godolka deynene
3. Qaar baan garmaamada la barin gaabisna u dhalane
4. Gabax lagu shakaaliyo seengihii gaabi orodkiiye
5. Gacalnimo haddad naga rabtaan go'aha noo doorshe

## I. MACNAHA EREYADA.

1. Gamman : fardo. Gobol: qaar. Cayn: jaad. Ujeeddo: Labada gabdhood ee walaal-aha ahi waa kala fiican yihiin. midiba waa jaad gooni ah.
2. Garmaamo: orod, durduro amase dheerayn. Ujeeddo:— inanta yari waa qof fiican oo hase ahaatee, weli waan la guursan ama dumarnimada uun baan la barin. ee waa qof aad isu raacsan.
3. Godolka: caanaha. Ujeeddo:— Gabadha saahid qabay, oo sidii aan horeba u sheegnay carruur ahayd ayaa markii ay curatay, canihii naaska ka da'een oo iska basarin garan weyday, saahidna nin nadaafad jecel buu ahaa .
4. gabax: dibad dhaxan leh. shakaalyow: lagu xidhyow ujeeddo:— fardaha had iyo jeer waa la daryeeli jiray. Sidaas darteed, waxa lagu habaari jirey — gabax lagugu shakaal, oo ah, laguma daryeelo, sanguhu: faraskii.
5. Gacalnimo: xididnimo. noo doorsha: noo beddela. Ujeeddo:- Haddii aad xidid-nimo naga rabtaan, gabadha noo beddela oo tan ka yar na siiya.

**Jawaabtii Feetin:-**

1. Hadal gar ah ayey Saahidow gobi la yeedhaaye.
2. Nin gammaan yaqaan maqasha wuu gaasabixiyaaye.
3. Waa laba gu' iyo dayr jir aan fuulinkeed geline.
4. Waa taas gankeedii suryaha loogu caws guriye.
5. Maxaad nagu geleysaa haddaad fuuli garan weyday?

**Erayada Cusub: Sharrax.**

1. Gaasabixin: dhaqaalayn ama fallaalis. Waxaa la yidhaahdaa nirgaha kala gaas-abixiyo si aanay u bukoon, siiba marka geel horweynka laga keeno ee guryaha la keeno. Ujeeddo: Haddii aad nin dumar yaqaan oo waaya-arag tahay, gabadha waad tababaran lahayd.
2. Gankeedii: filkeedii, asaaggeedii. Ujeeddo:- Gabadhu weli way yar tahay oo filweedii waa carruur la koriyo.
3. Maxaa aad nagu galeysaa: Maxaa aad noo sheeganeysaa.

Gabayga noocaas ah waxaa la yiraahdaa, ama lagu magacaabaa duurxul. Duur-xulku waa adiga oo qof u gabyaya oo haddana faras ama awr u gabya.

1. Bal eeg sida labada nin isu af garteen ee isugu jawaabeen.
2. Iyamaa labadooda kula daran? Waayo?

## GABAY(1) XIIN FINIIN

Faadumo Islaan Aadan oo la dhalatay Islaan Aadan Islaan, oo ka mid ahaa madaxdii Mudug, ayaa Sayid Maxamed doonay si garabka iyo gaashaanka uu ugu baahanaa dagaalakii dheeraa ee uu gaalada kula jirey, uu u helo. Isagoo markaa xidid-tinimo wanaagsan muujinaya ayuu Sayidku xoolo badan oo geel iyo fardaba leh Fadumo ka bixiyey, hase yeeshee, «dhugi geel dhaantaye», hadallo ayaa Sayid Maxamed iyo Islaan loo kala geeyey. Dabadded Islaan Aadan baa Sayidka weydiistay faraskiisii Xiin Finiin la oran jiray, arrintaas waraaq ku saabsanna Sayidka ugu soo dhiibay nin la oran jirey Faarax-dhaban-Sange. Daraawiish farduhu aad bay qaali ugu ahaayeen gaar ahaan Sayid Maxamed aad buu Xiin Finiin u jeclaa. Hase ahaatee sidii loo yiri, dhegtaa kaa wardheer, «ishaaduna waa kula fil», Sayidku waraaqaddii markuu helay waxa ku guddoonsaday inuu Xiin Finiin bixiyo si aan loo xaman xilna uu isaga reebo. Dabadeed Gabaygan intuu qaybsiiyey Faarax dhaban-sange ayuu faraskii oo uu qalabkiisii u dhammeeyey gacanta ka saaray .

**Xayow (2) Faaraxow hadal rag waa loo xutubiyaaye**
**Nin xishoonayaan ahay, haddan lay xistiyihayne**
**Xabiib baan ahaa jeer kufriga laygu xaasidaye**
**Adna xaashi baad ila timid, xaakin soo diraye**
**Xaddigii adduunyada haddaad xooli iga dooni**
**Marna anigu kaama xistiyeen xaalaad leedahaye**
**Inaan kuu xafgooyaan jeclaa, geel xawaad badane**
**Kumanyaal xareedaan lahaa, xawd u sii mariye**
**Markaad se Xiin Finiin damacday baan kaa xanuunsadaye**
**Maandhow xirgiga qaarkii waa lagu xujoobaaye**
**Waxaan kuugu xutubiyaaba waa xuuraddaan nahaye**
**Nin kalaan xafiilaba adaan xaydhka kaa rogoye**
**Xigto iyo qaraabiyo hadduu xidid i weydiisto**
**Xayuun iyo qayuumay haddii la igu xoodaansho**
**Xubbigayga kuma heyn inaan xiisow bixiyaaye**
**Xamar weeye oo midab fardood, kala xariir roone**
**Xawaariyo, kabtiyo, raaxo iyo xawl iyo jeelag**
**Xag loo dayaba waa gammaan xulashadiisiiye**
**Xubna-toosanow neefku waa xaalad gooniya eh**
**Goortaan xusuus ula noqdaan, xiise ii qabane**
**Waxaan xarafka diimeed ahayn igaga xeel dheere**
**Xarbadiyo jihaadkaan lahaa, xoogsi ugu fuule**
**Usagaan xatooyada lahaa, xuurta ugu looge**
**Xiniinyaha ku goo baan lahaa, gaalka xayika lehe**
**Xayskaa da'yaan lahaa xalin ka dooyeeye**
**Meeshaa iyo xeebtaan lahaa, xiito ku eryoode**
**Intii aniga lay xaman lahaa, xil iga soo meerye**
**Aduu galabta kuu xoolo yahay, xamarkii dheeraaye**
**Waa xiin finiin neefka aad xidhigga haysaaye**
**Xayawaanka oo idil naftuu kala xaroodaaye**
**Mar hadduu (1) suldaan igu xil lihi igaga xaydaantay**
**Xadhiggisa qabo aadmi kale kuma xurmeeyeene**

*(1) Xiin finiin: Waa faraskii Sayid Maxamed ee uu weydiistay islaan Aadan Islaan. faraskaa hooyadiina waxaa la oran jirey Finiin.*

*(2) Faarax: Faarax-dhaban-sange, waa ninkii xiin finiin Sayidku ugu sii dhiibey Islaan Aadan Islaan.*

## I. LAYLIS

1. b) Si kooban faallo uga bixi munaasabadda gabaygani ku soo baxay.

   t) Sayidku hadduu Islaan Aadan xoolo geel iyo fardaba leh siiyey, maxa uu faraskiisii uu jeclaa haddana u bixiyey .. .......?

2. «Xabiib baan ahaa jeer kufriga laygu xaasidaye»

   Faallo kooban ka bixi tuducani waxa ay innooga muujinayaan Sayidku intii aanu bilaabin dagaalladii gaalada uu ku qaaday ... . . . . . . ?

3. Tuducyada 4aad ilaa ka 9aad :
   b) Muxuu tusaalay nayaa. . . . . . . . . . . ?
   t) Sayidku yuu la hadlayaa . . . . . . . . . ?

4. Tuducda tobnaad:
   Waxaa Sayidku leeyahay waa lagu xujoobaa, sida loogu xujoobo, iyo xujadu waxa ay tahay ka hadal ....... ?

5. b) Qor tuducyada muujinaya xiin finiin aad qaali ugu ahaa kuna dheeraa Sayidka .

   t) Qor waxa qudha ee xiin finiin Sayidka kala qaalisanaa .. . . . . . . ?

6. Kala sheeg waxa ay kala yihiin:
   Xawaariyo, kabtiyo, raaxo iyo xawli iyo Jeejaq.

7. Qodob qodob u qor waxyaalaha Sayidku ku tala jirey inuu ku qabto Xiin Finiin.

8. Islaan Aadan ma ku hagaagsanaa inuu Sayidka faraskiisa qudha ee uu lahaa ku xisho oo weyddisto isagoo geel iyo fardaba yarad uga qaatay, muxuuse uga danlahaa ..... ? Waayo . . . . . .?

9. «Waa Xiin Finiin neefka aad xadhigga haysaaye». Sharrax .......... .. . ..?

## II. Sharrax

1. Xayow: Noolaadow, Xutubiyaa: Caddeeyaa, (Faaraxow rag hadalka diirka looga qaadaa).

2. Haddaan la i xaasideyn waxa aan ahay nin xishoonaya).

3. (Daacad baan ahaa intaan dagaalka gaalada laygaga bixin ee aan la ila collobin).

4. Waxa aad wadataa warqad nin boqor ahi soo diray.

5. (Haddii aad taagii adduunyo iga dooneyso).

6. (Kolla anigu kuuma diideen waxa aad rabto).

7. Kuu xafgooye: kuu huro; xawaad baan: tira badan waxa aan jeclaa inaan ku siiyo geel farabadan). Xareed halkan waxa looga jeedaa shilays. Xowd: ul dhuuban.

   (Waxaan is lahaa kumanyaal halaad oo naaxday sii oo u sii kaxee).

8. Xirgiga: damac, xujoobaa: dambaabaa.

   (Walaalow damaca qaarkii waa dembi).

9. Xutubiyaa: xidhiidhshaa; xuuraddaan nahay: gacalnimada.

10. Xafiilaba: la ficiltamaba; xaydhka: isha.

11. Xayuum iyo qayuum: laba magac oo Ilaahay; xoodaansho: sababo (haddii Magacyada Ilaahay la igu sasabona).

12. Xubbigayga:niyaddeyda; xiis: magac. (niyaddayda kuma hayn inaan bixiyo faraska dhogorta xiiska ah leh).

13. Xamar: fardaha midkooda cas .

    (Midabbada farduhu waa kala wanaagsanyihiin kani waa midabka u wanaagsan ee cas).

14. Xawaare: afarqaad, kabti: orodka; xawli: orod dheer, jeefad: eryasho.

15. Xulasho madax.

16. Xatooyada: Tuugada, xuurta: haad maydka cuna, ugu garwac.

17. Xaylka: dhiigga haweenka ee caadiga ah.

18. Xiito: geela (waxan is lahaa ku qaad geela jooga xeebta ila iyo inta ka sokeeysaba).

19. Naftuu kala xaroodaaye: naftuu ka xigaa.

20. Igu xillihi: aannu xidid nahay, xaydhaantay: lagaga dhegey.

## GABAY

*Ooggii Horay Nagu kaceen (Ismaaciil Mire)*

Noloshiisa inteeda badan, Ismaaciil Mire, waxa uu ahaan jirey Darwiish. Intaas uu darwiishka ahaa, magaalada sida loogu dhaqmo dhegtuu kala socdo mooyaane, wuu ka indha la'aa. Mar baa se jirtay taariikhda gashay oo uu Ismaaciil u safarsaday adhi magaalada Burco. Gabaygan soo socdaana taas ayuu ku saabsan yahay.

Salaad hore intaanu reerkiisii ka ambabixin, maalintaa uu Burco adhiga u kaxaynayey, ayaa dad deriskiisa ka mid ihi adhi u sii dhiibteen, kulana ballameen waxa uu gooyo in uu ugu soo gado waxyaabo ay ballanta ugu dareen. Ismaaciil markuu Burco galay ee habeenkii baryey, ayuu salaaddii adhigii uu wadey kula kallahay sayladda xoolaha. Muddo yar dabadeedna dillaaliin baallaha kaga soo qamaamay ayuu adhigii kula heshiiyey inay gadaan. Dabadeedna dillalintaasu waxay ku samriyeen, Ismaaciil lacag yar oo aan u dhigmin qiimiihii uu filayey inuu adhigu baxo.

Ciddiisii markii uu ku soo laabmay, ayaa dadkii xoolaha kale u sii dhiibtay, weydiiyeen waxa ay xoolahoodii baxeen iyo alaabtay kula ballameen waxa uu uga sidayba. Markaa, Ismaaciil, isagoo ka warramaya waxa laga filayo iyo waxa uu sidaa siday u kala fogyihiin, iyo sida xoolaha laga waraysanayo lacagtoodii dillaliintii ugu-baxday, ayuu gabaygan yaabka iyo qosokaba leh curiyey. Qof waliba ama magaalo ha joogo ama miyibe eh, waxa aanu waaya-aragnimo hore u lahayn marka uu shanata la galo, sida badan, wuu ku asqoobaa. Sidaa awgeed, ayaan loola yaabi karin ninkan odeyga ah waxa meesha ka qabsaday waxa uuna yidhi:

**1. Nimanyahow awow iyo awow iyo abkaan sheegto**
**2. Iyo anigu abidkay ma arag iibsi lacagaeede**
**3. Adduunbuu lahaan jirey raaggaan ka isirraa waaye**
**4. Ololahaan wax kaga qaybsan jirey ululuf duullaane**
**5. Mar uun baan amaamuday waxaan aabahay faline**
**6. Afar waxaan u dhaxay tuuladii awrta loo raraye**
**7. Albaabkii Burcaan tegey anoo aaladii sida eh**
**8. Amminkiiba lay yimid sidii eegta lay yahaye**
**9. Ooggii horey nagu kaceen adhi dillalkiiye**
**10. Dar iimaanka laga qaaday baa noo aloogsadaye**
**11. Amankaagay goortay wankii adhaxda tuujeene**
**12. Inta weeye iyo maahadii la is ilaaqeeyey**
**13. Asaraartankii baa qalbiga aad wax ii dhimaye**
**14. Afka reer magaaluhu yaqaan waan ka oodnahaye**
**15. Il-maroojihii bay khatalay kii aan aaminaye**
**16. Afar bawlad laga gooyey bay igu aluubeene**
**17. Anigoo arkaayaa gacmaha laygu iibsadaye**
**18. Kuwo boqonta ood laga sudhay ila ahaayeene**
**19. Usha, jeedal iyo suufaf bay igu illaaweene**
**20. Ashcaartaba rag baa iga badshee idinku weydiiya.**

**I. Weydiimo.**

1. Qof waliba waxa aanu waaya-aragnimo u lahayn marka ugu horreysa ee uu faraha la galo, sida Ismaaciil ku dhacday oo kale ayaa uu ku asqoobaa.

   b) Maxaa la gudboonaa Ismaaciil inuu kaga hortago dagista la dagay inaanay dhicin?

   t) Magaalooyinka, sayladaha xoolaha lagu kala iibsado, dadka xoolaha keena ee aan waaya-ragnimada u lahayn miyaa lagu dagaa? Si kooban uga hadal.

2. b) Asraartanka gabayga lagu sheegay sidee buu qalbiga Ismaaciil aad wax ugu dhimi karaa? ............. Muxuu ka kacay? ..................

t) «Intaa weeye iyo ma ahadii la is ilaaqeeye»

i. Maxaa lagu baayactamayey? . . ... . . . . . . .
Baayactankaas ilaaqadu ma midbaa? . . . . . . . . . . . . .. .

Ilaaqadu waa maxay? . . .. . . . . . . . ... . .... . ..

3. b) goorma ayey Ismaaciil iyo dilaaliintu kulmeen?

i. Il marrojiyihu maxa uu ahaa? Maxaa uu Ismaaciil, isaga sida gaarka ah ugu aaminay? . . . . .. . . . .. ..

ii. Immisaa Ismaaciil laga siiyey adhiguu watay? Lacagta aynnu isticmaallo ku sheeg? . . . . . . .. .

iii. «Aloogsaday»maxaa loola jeedaa?

iv. «Aluubeen»maxaa loola jeedaa?

4. b) «Faashle»,«Adbiile», «Macalhaye».«Dillal»maxay kala yihiin?

t) Adhiga dalaka dibedda aynnu u dhoofinno, lacagta innaga soo gashaa maxaa ay ummaddeenna u tartaa?

5. «Anigoo arkayaa gacmaha laygu iibsadaye».
Si kooban oo habboon u sharrax tuducdan.

6. b) Ujeeddada guud ee gabaygan soo koob?

i. Waxa ma kaga duwan yahay gabayadii hore aad u soo baratay?

ii. Gabyaagu maxa uu aad ugu fiicnaan jirey?

## II. Sharax

1. Abkaan sheegto: cidda aan ahay; abidkay: weligay. (Cidda aan ka dhashay iyo anigu kumannaan dhaqmin ganacsi).

2. Isiraan: ka dhashay (aabbayaasha waxa ay lahaayeen xoolo).

3. Olole: Ululuf: guuto bixin. (Waxa aan ku qayb qaadan jirey ololaha dullaanka).

4. Amuumaday: bilaabay, (waxa aan la imid waxaan aabahay samayn).

5. Aaladii: alaabtii, (waxa aan burco gaaray anoo wada wixii aan iibka u waday).

6. Aminkiiba: markiiba, eegi: ilaaliye (isla markiiba waa la ii yimid sidii oo la i sugayey). ilaaleeyey

7. Ooggii: subaxdii, (Salaaddi hore ayuu noo yimid dillalkii).

8. Dar: qaar, aloogsaday: is-tubay, (Qaar aan iimaan lahayn ayaa na hareereeyey).

9. Amankaagnay: yaabnay (waxaannu yaabnay markii ay wankii dhabarka tuujiyeen).

10.11 Ilaaqayey: kaftamayey, asaraartan: muran (hadalladii dillaalka ee ahaa waa intaa iyo maaha ayaa wax ii dhimay).

12. Oodnahay: ma aqaanno (anigu ma aqaan dhaqanka magaalada).

13. Khatalay: dagay (waxa i dagay ninkii aan aaminay).

14. Bawlad: afartan santi, aluubeen: igu taageen. (waxay ii sii fidiyeen afar rubadood oo la' afartan santi).



aluubeen = igutaageen

15. Uun kale: dad kale (adhiga aad lacagtiisa doonaysaan waxaa lacagtiisii qaatay dillalkii).

16. (Dillalkaasi waxa uu ahaa mid belo loo bixiyey).

17. (Waxa ay igaga tageen alaabtii aan sitay oo keliya oo ay ka mid ahaayeen : ul, jeedal, iyo maro xun).

18. Ashcaarta: ganacsiga, (dadka iga yaqaanna ganacsiga, ka warsada adhigii).

## GABAY

### *BAROOR DIIQ (CALI JAAMAAC HAABIIL)*

Cali Jaamac Haabiil oo ku dhashay Degmada Burco, waxa uu ahaa gabyaa weyn oo caan ah, Sayid MaxamedCabdulle Xasanna ay gabay isweydaarsadeen. Cali gabaygan waxa uu curiyey mar isagoo Berbera deggan loo soo sheegay geerida uu geeriyooday nin xaggiisa aad ugu weynaa aadna uu u jeclaa oo la odhan jirey Xirsi Cilmi Goonle. Geeridaa Xirsi, Cali aad buu uga naxay, ugana tiiraanyooday. Muddo dhowr beri ah, ayaan waxba ka degin. Laba indhoodna aanu isku qaban, cidna afka u kala qaadin. Taasina aad bay uga wareerisay dadkii cali yiqiinney ee la degganaa magaalada Berbera.

Markii su'aal laga deyn waayey ayuu Cali aakhirkii gabaygan calaacalka ah tiriyey, isagoo si aad u habsan ugu muujinaya waxyaabaha uu ku jeclaa Xirsi, waxyaabahaas oo uu midkasta caddeyey arrimaha ay taabbagalka ku ahaayeen. Markaa wuxuu yidhi:—

**Faaraxow galgaladkaan dhigiyo gama' la'aanteyda**
**Gogoshaan ku jiifsaday hurdada goodkii igu yaacay**
**Gasiinkii la ii dhigay waxaan gowska ugu daayey**
**Geeridii Xirsey sheegayeen gacal ha waayeene**
**Goblamooyin waxay ii wadeen guuldarriyo hooge**
**Gabbal baa u dumey reerihii geliga booc yiile**
**Abidkii rag waa go'i jiree tani se waa gow e**
**Lix hal oo u wada gaar ahaa gocanayaa mooyi:**
**Mid weeye haddii lays galoo geel la kala qaado**
**Gurmad noqonnayaa iyo annagu guuto bixinnaaba**
**Waxay gole fardoodaba haddii la isku soo gaadho**
**Giiryaalihii fule markuu gelelef rooraayo**
**Rogaalkuu giraangirin ogaa gocanayaa mooyi**
**Gar adkaatay, xaajada gurracan, guuti kala maagtay**
**Haddii geedka laysugu yimaad golaha waayeelka**
**Nin waliba hadduu gees damcoo giijo madaxiisa**
**Wax la wada gorfeeyaba halkii la isu geyn waayo**
**Gaagaabsayaa iyo isagu geeshi hadal yaaba**
**Guddoonkii la wada raaci jirey gocanayaa mooyi**
**Geb hadday martidu soo tidhaa goor uu nala jooga**
**Godka lagu janneeyow hadduu goosan la carrabo**
**Garab saar rag weeye hadduu gogasha soo qaado**
**Gasiinkii la soo dhigay haddaada gal iyo daad mooddo**
**Bakhayk baa gammima e intuu gaadhka ka qoslaayo**
**Godolkuu ku haasaawin jirey gocanayaa maayi**
**Gugoo da'a aroosyada haddii gowda laga saaro**
**Shir girmidha haddii loo kiciyo gob iyo reer aada**
**Gammaan naaxay heensada haddi guudka laga saaro**
**Waa gelin is daawada halkii garangor loo joogay**
**Gole igu bannaanaa walle garab la'aanaade**
**Gunnaduu ka soo toocin jirey gocanayaa mooyi**
**Gardarrada Sokeeyaha ragbaa gees biciid u lehe**
**Gudcurkiyo caadadu waa walaal kala guul roone**

**Gadiid la dhaanshuu ahaa gibil ma diidiiye**
**Guraduu na wada saari jirey gocanayaa maayi**
**Alla wuxuu golxaalow ahaa gedefka reeraaye**
**Magaciisu waa gudubsanaa gaaliyo islaane**
**Galbeed iyo baraa laga yiqiin gololkii dheeraaye**
**Gaashaan biruu noo ahaa goconayaa mooyi**
**Adduunyadatan laga guurayo ee gegebaa joogta**
**Ee laga galbaday meesha iyo geeridii Maxamed**
**Anuun baa gubtahanyoonaya oo geesigii tebeye**
**Gartaa u noqday Eebbow ma jirto garangar waartaaye**
**Allahayow wax badan baan gefeye Adigu ha goynin**
**Oo geesta Nabigii i mari maanta lays gurayo.**

**I. Weydiimo.**

1. Siddeedda tuduc ee gabayga u horreysa si kooban faallo uga bixi.
2. Lixda waxyaalood ee astaamaha u ahaa raganimada Xirsi qodobbo ku sheeg.
3. Ninka raganimada aan lagaga daba dhufan maxaa wakhtiga maanta astaamo u ah?

   Si kooban uga hadal, una qiyaas astaamihii ninka raganimada leh lagu sheegi jirey berigii Xirsi noolaa.
4. Cali ma si xad dhaafa ayuu Xirsi geeridiisa uga calaacalay?
   - i. Muxuu nimankii warka xun soo gaadhsiiyey u habaaray?
   - ii. Cali calaacalkiisu ma isbeddeley gabayga dhammaadkiisa maxaase aad ku magacaabi lahayd siduu gabayga u hadlayo? Waayo?
   - iii. Gabayga dhammaadkiisa Maxammed ka lagu soo qaaday waa kuma, geeridiisii se miyey geeri ka horreyn?
5. Gocoshadu waa maxay?
6. (i) «**Geb** haddi martidu ...»Ereyga hoosta ka xarriiqan sharrax.

   (ii) «**Geesinkii** la soo dhigay haddad **gal** iyo **daad** mooddo Bakhayl baa **gammiimmee** intuu **gaadhka** ka qoslaayo» Sharrax ereyada hoosta ka xarriiqan.

   (iii) Si kooban uga hadal ujeeddada tuducyadaas iyo xiriirkoodaba .
7. «Gardarrada sokeeyaha ragbaa geesbiciid u lahe
   Gudcurkiyo caddadu waa walaal kala se guul roone
   Gadiid la dhaanshuu ahaa gibil ma diidiiye» .
   Saddexdaa tuduc mid walba tusaale u dhigma ka bixi
8. Si kooban uga hadal ujeeddada guud ee gabayga .
9. Calaacalku waa maxay? Ma ku habboon yahay ninka ragga ah? waayo?
10. Gabaygani gabayadaad soo baratay wax ma kaga duwan yahay, maxa aad ka faa'iidaysatay?

**Sharrax.**

1-4 Gasiinkii: Cuntadii.

Gawska uga daayey: u cuni waayey .

dar: kuwo, guryii: reerihii;
(Faaraxow xalay hurdadii aan seexan waayey iyo galgalashadii, cuntadii aan cuni waayey iyo waxaas oo dhibaato ah waxa iigu wacanaa dad reerihii ka yimid baa ii sheegay war xun oo aan ka naxay, kaasoo ah dhimashadii Xirsi).

5.8 Gablamooyin: carruur waayooyin; gabbal baa u dumay: balaayaa ku dhacday; geligabooc: meel magaceed; abidkii: weligii.

(Isagoo habaartamaya wxa uu yidhi: carrurtooda ha waayeen! waxa ay noo sheegeen war xun iyo hoog iyo baaba' ku dhacay reerahaygii degganaa meesha la yiraahdo geliga Booc. Dhimashadu waa jiri jirtay weligeed tanise waa na baabi'isay.

9. Gocanayaa: tebayaa, (malaha waxan la gami waayey waxa aan tebayaa lixda shay ee wanwanaagsan ee ninkii dhintay u gaarka ahaa).

10-11 Guuto: col, golafarddodaba: la sii eryaba; la isku soo gaadho: labada col isu yimaadaan) Giiryaalihii: gariirihii; gelefroor: kolba dhan u roor.

Rogaal: weerar. (Haddii lagu dagaallamo geela, ama aannu annagu duullo ama ha nalagu soo duulee waxaanan ka samrayn sidii wanaagsanayd ee uu u dagaallami jirey, marka fuleygu uu gariiro ee uu cararo.

15-20 Gurracan: qallocan; guurti: guddi; kala maagtay: isdiidday; la wada gorfeeyey: laysla baadhbaadhay, laysu geyn waayo: la hashiin waayo.

Gartu markay adkaato ee laysku mari waayo lagana yaabo in lagu kala tago, waxa aannu ka samrayn siidii uu go'aankeeda u sheegi jirey taladana loogu raaci jirey, isagu xeelad kasta wax ha ku hagaajiyee).

21-26 Geb hadday martidu soo tidhaa: hadday timaaddo, goosan: koox, garbasaar: maamuus, gasiin: cunto, gamiin: weji-xumo; gaadhka: dhoosho; godolkuu: sheekaduu; haasawin jirey : maaweelin; (Kolkay martidu timaaddo sidii fiicnayd ee uu wax u siin jirey, gogoshii uu udhigi jirey, deesiimadiisii iyo sidii farxadda lahayd ee uu ugu sheekayn jirey ayaan tebayaa oo anaan ka samrayn).

27-32 Gawda laga saaro: la badiyo; girmidha: xarrago ah; reer aada: reer fiican; gammaan: faras, heensaha: qalabka faraska lagu fuulo; garangar loo joogay: daawasho loogu soo goleeyey; gole igu bannaanaa: meeli igu bannaanaatay; gunnuhu ka soo toocin jirey: duddaduu ka soo eryi jirey faraska. (Marka gugu da'o dhallinyaraduna guurka badiso ee shirarka laysugu tago, fardahana lagu dabbaaldegayo sidii wanaagsanayd ee faraska uu u soo eryi jirey baan tebayaa, meeshii uu dhallinta kaga jirayna way igu bannaan tahay).

33-36 Sokeeye: xigto ama tol ; geesbiciid: hub; Gibil: gurada awrka qorraxda lagaga qariyaa; guraduu na saari jirey: dulqaadkiisii (Gabyaagu waxa uu tilmaamayaa ninka dulqaadkiisii, wuxuuna yidhi waxa uu ahaa nin duqaad badan oo aan gardarreysan sokeeyaha. Sida dadka xumi ay yeelaan, taasina waxa aan tabayo ayey ka mid tahay).

37-40 Golxaalow: godanow, gedefka: dyrka; gudubsanaa: dhaafsanaa; gololkii: tawlkii; Wuxuu ahaa dayr bir ah oo ku wareegsan reerahayaga iskana gudba wixii dhibaato ah ee ku soo socota; taasina waxyaabaha aan ugu samri waayey bay ka mid tahay.

Gabagebaa: dhammaadka; laga galbaday: laga tegay; Maxamed : Nabi Maxamed, Gubtaanyoonayoo: murugoonayoo; Garangar waartaa: cid daa'imtaa. Gabyaagu runtii buu u soo noqday waxa uuna sheegayaa in Adduunka laga dhammaanayo, dembigiisiina wuu qirtay, Ilaahay wuxuu weydiisanayaa saamaxaad.

## KOOFIL

Gabaygan waxaa tiriyey Sayid Maxamed Cabdulle Xasan sannadku markii uu ahaa 1913. Markaas oo ay Ciidammo daraawiish ihi ku duuleen Ingiriiska iyo kuwii taageersanaa, isla markaana weerar weyn bay ku ballaariyeen degmo tiil Burco iyo agagaarkeeda, xoolo dadkaasi waxa ay lahaayeen darawiishtu wey dhacday. Nimankii xoolaha laga dhacay iyo ciidammadii Ingiriiska ayaa Daraawiishtii dagaal ku qaaday. Daraawiishtu goobtaa wey ku guuleysteen, waxayna ku dileen gaal la oran jirey «Richard Corfield» oo madax ka ahaa ciidammada rakuubleyda Ingiriiska «Camel Corps». Madaxii «Koofil» iyo gacantiisii midig ayaa Daraawiishtu keentay Taleex, Xaruntii Daraawiishta, si loo rumeysto dilkaas. Sayidkuna gabaygan buu ka tiriyey dilkaas Koofil.

**Adaa Koofilow jiitey aan dunida joogeyne**
**Adigaa jidkii lagugu wacay jimic la'aaneede**
**Jahannama la geeyow haddad aakhirow jahato**
**Nimankii jannow kacay war bay jerin inshaaleeye**
**Jameecooyinkii iyo haddaad jawhartii argto**
**Sidii Eabbahay kuu jirrabay mari jawaabteeda**
**Daraawiish jikaar nagama deyn taniyo jeerkii dheh**
**Ingiriis jabyow waxaa ku dhacay jac iyo baaruud dheh**
**Anigana jigrey ila heleen shalay jahaadkii dheh**
**Jigta weerar bay goor barqa ah nagu jiteeyeen dheh**
**Jeeniga hortiisay rasaas igaga jiideen dheh**
**Jidhaayaday ila dhaceen jilic afoodii dheh**
**Siday kuugu jeexaan magliga jararacdii sheego**
**Billaawuhu siduu kuu jarjaray jeedhadhka u muuji**
**Naf jeclaysigii baan ku idhi jaalow iga daa dheh**
**Jajalleecadii baa wadnaha jeex i soo ruqay dheh**
**Jeedaaladii bay indhuhu kor u jilladeen dheh**
**Jimic kagama helin tuugmadaan jeriyey ruuxii dheh**
**Markaan juuq idhaahdaba afkay iga jifeeyeen dheh**
**Dhaaxaan jalaadiye dheg baan jalaq la ii siin dheh**
**Sida Janannadii hore tashigu igugu jaguugnaa dheh**
**Taladii jinnigu ii horkacay jaasadeed helay dheh**
**Jiidaha xanuunka leh markii la igu jeeraashay**
**Jibaadka iga soo baxay dadkii jiifka qaban waa dheh**
**Markay rubaddu jaw tidhi or bay iga ag jiibsheen dheh**
**Jidhkaygii bahal baa cunoo jiitay hilibkii dheh**
**Jurmigiyo baruurtii dhurwaa jugux ka siiyaa dheh**
**Haddaan lays jikaarayn tolkay laga jil roonaa dheh**
**Abidkoodba waa lagu jaraa jilib duullaan dheh**
**Daraawiish waa jibindhow iyo jowga soo bixi dheh**

I. LAYLIS

1. b) Gabaygan muxuu ka tiriyey Sayidku?

   Goormuu tiriyey?

   j) Koofil ayuu ahaa?

   x Sida Eebbe u jarrabay sidee bay ahayd?

2. Tuducyadan si tifaftiran uga faalood, adoo fiirinaya siday gabayga ugu jiraan.

   b) Ingiriis jabyow waxa ku dhacay jac iyo baaruud dheh (8)

   t) Jiidhaayaday ila dhaceen jilic afkoodii dheh (12)

j) Jimic kagama helin tuugmadaan jeriyey ruuxii dheh (18)
x) Taladii jinnigu ii horkacay jaasadeed helay dheh (22)
kh) Haddaan lays jikaarayn tolkay laga jil roonaa dheh (28)

3. b) Tuduca 13d waa maxay magligu?
t) Tuduca 17d waa maxay labadan eray micnahooda : —

i. Jeedaaladii?
ii. Jillaadhaan?

j) Tuduca 24d waa maxay jibaadku?
x) Tuduca u dambeeya : jibindhowgu waa maxay?

**Sharax:**

(1) Jiitay: tegey .
(2) Jimic la'aaneed: cidhiidhiga ahaa.
(3) Jahato: jeedsato.
(4) Jeran: sugayaan.
(5) Jameecooyinkii: Culumadii.
johartii: Nimankii wanaagsanaa.
(6) kuu jirrabay: kuu cadaabay.
(7) Jikaar: cadaadis, jeerkii: waagii, ama berigii.
(8) Jac iyo baaruud: hub iyo rasaas.
(9) Jigre: waa qori hubkii faransiiska ka mid ah
(10) Jigta weerar: danta weerar, jigteeyeen: bilaabeen.
(11) Igaga jiiteen: igaga dhufteen.
(12) Jidhaayaday ila dhaceen: warmahay ila dhaceen.
(13) Magliga: waranka yar, jararacdii: codkii waranka
(14) Billaawuhu: waa toorrey weyn.
(15) Jeedhaadhka: dildillaaca.
(16) Jaljallecadii: daymadii badnayd (waxa la yidhi kolba ninka ka daaya yidhaa buu xaggiisa isu tuuraa).
(17) Jeedaaladii: eegistii, jillaadmeen: kor u carareen.
(18) Jimic: naxariis; tuugmadii: baryadii; jeriyey: sugayey; ruuxii: naftii.
(19) Juuq idhaahdaba: hadlaba; jufeeyeen: garaaceen;
(20) Dhaxaaan: in badan baan; Jaalow: qayliyey; dheg baan jalaq la ii siin: layma dhegeysan.
(21) Tashigu igu jaguugnaa: talo igu caddaatay. (macnaha Sayidku waxa weeye, sidii janannadii hore ee saaxiibaday ahaa ay waxba u kala garan waayeen baan anna talo iga baxsatay.
(22) Jaasadeed helay: abaalkeed helay.
(23) Jiidaha: hoggaan; jeersaday: xidhay.
(24) JIbaadka: taaha; jiifka qabanwaa: hurdada ka toos.
(25) Rubaddu: naftu, or: hees; jiibsheen: heeseen; jaw tidhi: baxday.
(26) Jurmigiyo: hilikiyo; jugux ka siiya liqaa.
(27) Lays jikaarayn: la murmeyn; laga jilroonaa: adkaa.
(28) Abikood: waligood; lagu jaraa: laayaa; jilib-dhig duulaan: dagaal lays kala horyimid.
(29) Jindhow: onkod; Jawga: gariirka.

## G A B A Y

### ARLIGA LA KALA BOOBAYAA: (Faarax Nuur)

Sannadku markii uu ahaa 1862kii, ayuu Faarax Nuur ku dhashay magaalada Burco miyigeeda, sida na soo gaadhayna, wuxuu geeriyooday 1932kii. Maheraddiisu waxay ahayd samaynta galalka billaawayaasha iyo saabinta weysooyinka argeegta ah.

Faarax Alle how naxariistee, wuxuu ahaan jirey gabyaa caan ah oo isku darsaday feejignaan, fiiro badnaan ogaal iyo garasho dheere. Gumeysiga aad buu u nebcaa lamana soo marin jirin. Nabadgelyada iyo madax Bannaantana aad buu u jeclaa; uguna xusul duubi jirey.

Gabaygan soo socda waxa uu curiyey markii dalka Soomaaliyeed ay soo galeen dad gumaystayaal ah oo diir cad Ingiriiska, Faransiiska, iyo Talyaaniga, horena aanu u arki jirin. Kuwaasoo markiiba uu Faarax ka xumaaday waxyaalihii darxumada lahaa ee ay dadka Soomaaliyeed u horkaceen iyo sidii odayaasha Soomaaliyeed, si ay danaha uga sii jeediyaan, waxaan sakaaro ka biirsan ay uga sumeynayeen. Gaar ahaan wuxuu Faarax aad uga dhiidhiyey kala qoqobkii Itoobiya iyo gumeystayaasha caddanka ahi ay dalka iyo dadka Soomaaliyeed kala qoqobeen. Isagoo arrimahaas taladiisa ka dhiibanaya, cidhib xumadoodana dadka Soomaaliyeed uga digaya ayuu yidhi : —

**1. Ingiriis Axmaariyo Talyaani, wey akeekamiye,**
**2. Arligaa la kala boobayaa nin u itaal roone,**

**3. Anse ila ah aakhiro Sabaan iligyadiisiiye**
**4. Orgigaa riyaha taadaxoo oodda faaliga e,**
**5. Waa duni hablihii loo ogaa aqalka diideene,**
**6. Anse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye**
**7. Waa duni la kala iibsaday oon nala ogeysiine**
**8. Waa duni ninkaad aamintaa kuu abeeys yahaye**
**9. Anse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye**
**10. Waa duni xaqii la arkayaa la arjumayaaye,**
**11. Waa duni akhyaartii lahayd iib ku doon tahaye,**
**12. Anse ila ah aakhiro sabaan iligyadiisiiye,**
**13. Afka iyo adduunkaa hadloo oodna sadarkiiye,**
**14. Ninka gacanta midig oodna tahay laga ilroonaaye**
**15. Anse ila ah aakhiro, sabaan iligyadiisiiye,**
**16. Nimanyahow bal daya xaajada lala aguugaayo**
**17. Odayaashan loo yeedhay ee la anfac siinaayo,**
**18. Asxaabihii bayna yidhi gaal ha aaminine**
**19. Haddaa niman Islaamiyo tihiin aadan ubadkisa,**
**20. Oydaan Ilaahay ka go'in hayna oodine.**

**I. Weydiimo**

1. Faarax gabaygan maxaa uu u curiyey, yuu ugu digayaa muxuuse ka digayaa?
2. Ujeeddada guud ee gabaygan si kooban uga hadal.
3. Tuducyada ku qoran sharrax : —

   b) «Waa duni ninkaad aamintaa kuu abees yahaye».
   t) «Afka iyo adduunkaa hadloo oodan sadarkiiye»
   j) Faarax fikradihiisaa ma ku raacansan tahay? Waayo?

4. Ereyadan siday gabayga ugu jiraan u sharrax: —

    b) Akeekmeen.
    t) Aakhiro sabaan iligyadiisiiye,
    j) Taadax;
    x) Faalig;
    kh) Arjumayaye.

6. Afmaldahayaasha ku jira gabayga ka soo saar sharaxoodana, raaci.

## II. Sharax

1. Akeekami: murmi (seddexdaa dawladood way iska hor iman doonaan).
2. Itaal: xoog (Waddanka ayaa la kala boobayaa nin xoog roonaadaba).
3. Anse: anigase; iligyadiisiiye: calaamadihiisii waxa ay ila tahay in murankaasu yahay calaamadii aakhirusamaanka).
4. Taadaxoo: eryada, faaliga: fiqa, (orgiga ayaa oodda jiidha oo riyaha eryada).
8. (waa duni ninka aad aamintaa ku dago sida abriska).
10. Arjimayaaye: la oodayaa (waa duni iyada oo xaqii la arkayo la iska agmaro).
13. Sadarkii: diintii, (waa duni xooluhu hadlaan oo la dhinac maray diintii).
14. Il-roonaaye: laga adkaaye, (waa duni qofka aan wax bixin laga adkaado).
16. xaajada: arrinta; aguugaayo: ordaayo.(dadyohow arka arrintaan aan loo miyirinayn).
17. Anfac: cunto (odayaasha loo yeedhay ee cuntada la siinayo).

18-19-20. (Asxaabtii oo ina yidhi gaal ha aaminina darteed, haddii aad tihiin muslin oo aydan jarin xiriirkii Eebbe, diida arrinta gaalada).

# GABAY

## TALEEX

Taariikhdu markii ay ahayd 1913 ayaa Daraawiishtii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan ku duushay Ingiriiska iyo kuwii la jirey. Weerar weyn bay ku qaadeen degmo tiil Burco iyo agagaarkeeda, xoolo waxa ay dadkaasu lahaayeen gacantey ku dhigeen.

Gaal Ingiriisa oo la odhan jirey «Richard Corfild» ama «koofil» siday Soomaalidu u taqaan, ciidammo rukuubley ah oo uu madax ka ahaa iyo dadkii xoolaha laga dhacay ayaa xoolihii ka daba tegey. Xoolihii iyo Daraawiishtii oo galabtii Beer maraaya bay sii dhaafeen waxayna u sii fadhiisteen buurta Dulmadoobe salkeeda. Subaxdii ayey labadii col dagaal isu qaadeen muddo yar dabadeena koofil waa la dilay colkiisiina waa la jebshay.

Jahaadkii markii laga soo noqday Sayidku waxa uu ka gabyey dilkaa Koofil. Ismaaciil Mire oo ahaa abbaanduulihii ciidammada Daraawiishta waxaa uu yidhi: «Xarunta uga warran jahaadkii, ambabixiinnii, weerarkii, dagaalkii, gebagabadiisii iyo xoolihii saamigaad ka heshay». Dabadeedna Ismaaciil Mire waxa uu mariyey gabaygan :—

1. **Annagoo taleex naal jahaad taladi soo qaadnay**
2. **Taddobaatan baqol oo Darwiish togatay neef doorka**
3. **Sayidkeennu tii uu na yidhi tarog ku heensaynnay**
4. **Ilaahay ha tabantaabiyee ducada noo tuumi**
5. **Wareegada rag baa waxay tewili yaan wax kaa tegine**
6. **Annana tawlka qaalmaha nin iyo tulud u soo saaray**
7. **Sibraar caana geel loo tabcaday Taleex ku sii maallay**
8. **Tiirkii rasuulkiyo sharciga toog ku wada fuullay**
9. **Galabtaa taxaab iyo kadlaba toobiyaha raacnay**
10. **Habeenkii Fardaha waw tudhnee taag ku sii miranay**
11. **Tun biciida lagu qoofalyow xamaska loo taabey**
12. **Talaaduhu markii ay dheceen talalay oo reemay**
13. **Tixda gabay goortaan akhriyey toose niman jiifey**
14. **Tiraabkeygu meeshuu ka baxay la isku soo tuumi**
15. **Salaaddii markii aan tukaday yaarka kaga taagnay**
16. **Toogga ulasameed doyadii horey u tuuryeynay**
17. **Intay timacad noo soo arkeen marada noo taage**
18. **Annaguna jahaad kama tagnee tiimbad ugu roorray**
19. **Galabtaa Carraabada ku timid turugga buudhoodle**
20. **gebagebe u tu'inno kufriga maarre kaga teednay**
21. **Tafwareeman maynee intaan tubay ku inshaadnay**
22. **Tiiraanya ololkii dhulkii taani naga qaadday**
23. **Tallaal'ayada qaylada Berbera tahan la weydaari**
24. **Tambuuglayaashiyo kuway tebeyse soo gaadhe**
25. **Teysaha gugii oo hanqaray tininigtii yeedhay**
26. **Talaxumada awrtuu u xidhay baqe taraarsiinnay**
27. **Girligaanka meeshuu turuqaday lagu tunsii geela**
28. **Turjubaannaadii daba socdiyo Koofil lagu toogtay**
29. **Gaaladu waxay tacab lahayd taabanay galabtaasba**
30. **Maadhiin turaabkaa ka badan tuurta kaga qaadnay**
31. **Tukihii intaan niman u wadhay tobanle soo qaatay**
32. **Habeenkaa ninkii tabar lahaa tarantaree gaadhka**
33. **habeen kale taxaashay Nugaal godan u tuureynay**

34. habeen kalena tuuraha cadduur toolin kaga maallay
35. Habeen kale Dariiqada tubnoo toosan lagu qaybsay
36. Toban gool tabaadiga dhigiyo toban unuun gooye
37. Iyo toban irmaanoo aniga la igu taageeray
38. Iyo taan eryoon jirey markey tubanteed joogto
39. Intaa xarunta waatubay xaq waa lagu tanaadaaye
40. Warka Tuure waa laga hayaa tan iyo limeye
41. Waa xamar tarrara oo misana taab ku sii daraye
42. Taltallabsigiisiyo kabtiga tabo kolow dheere
43. Anigana tis bay i galay intaan col ugu taagnaaye
44. Tuludna ugama godlaan reeruhu tawl ka saanyadaye
45. Tafan toofka gaalkuu u diley waa tigeliyaaye
46. Suldaan Ruuna loo tebi in uu tuuladii gubaye
47. Tima soohanlow Eebbahay kuma tabaaleeyo

LAYLIS :—

1. b) Gabaygan ayaa curiyey?
   t) Munaasabaddu u ka tiriyey maxay ahayd
   j) Ismaaciil Mire muxuu ahaa? Tixraac gabayadii hore aad uga soo qaadatay iyo taariikhdiisii.

2. b) Meeshay ka duuleen Daraawiishtu?
   t) Markaa maxay ahaan jirtay?
   j) Imminka maxay tahay?
   x) Waa gobolkee?
   kh) Daraawiishta duushey tiradooda inteebaad ku qiyaasi lahayd?

3. Weydiimahan ka jawaab adoo la kaashanaya tuducyada gabayga.

   b) Sayidku muxuu ku darsaday ambabaxii darawiishta?
   t) Maxaa ay sahay u sii qaateen? Sideyna u heleen?
   j) Habeenkii hore intey ku ekaadeen?
   x) hadmay tooseen?
   kh) Maxay ku tooseen?
   d) Halkay isugu yimaadeen?
   r) Hadmayna ambabaxeen?

4. Tuduc 18aad

   b) Timacadu maxa ay ahaayeen?
   t) waxa ay soo arkeen maxaa uu ahaa?
   j) waxa ay taageen maxa uu ahaa?
   x) Ayaaney u tageen?

5. b) Adoo fiirinaya gabayga, dagaalaka dhexmaray Daraawiishta iyo dadkd soo hojeeday sidee buu u dhacay?
   t) Daraawiishtu ma ka libeysatay nimankaa?
   j) Maxay ka dhacsadeen?
   x) Si tafaftiran uga faallod siday Daraawiishtu u soo noqdeen iyo waxay xaruntoodii kula soo noqdeen.

**Sharax:—**

1. Taleex: Xarunta Daraawiishta. Jahaad: Dagaal.
2. Togatay: xulatay. Doora: farasfiican.

3. Siyidkeennu: Sayid Maxamed, tii uu na yidhi: sidii uu nagula taliyey; torog: magac faras; heenseyney: kooraha saaranay.
4. Tabantaabiyee: ha gargaaree; tuumi: badi.
5. Wareegada: xoolaha abbaanduulaha loo saaro ee aan qaybta ku jirin; tewili: doonayaan; yaan wax kaa tegine: yaan lagu khiyaanine
6. Tawelka qaalmaha: qaalmha dhaadheer; tulud: neef geela.
7. Tabacday: samaysatay; talax: hal magaceed; tiirkii: cuskashadii; toog: faras magaciis.
8. Taxaab: gadhqaad; kadlo: orodka faraska nooca u gaaban; toobiye: dariiq toosan.
9. Tuduce: naxariisane; taag: degganaan.
10. Tunbiciid: qori; qoofal: xidh; xamaska: doogga.
11. Talaaduhu: xiddigo habeenka lagu qiyaasi jirey; talalay: qayliyey; reemay: guuxay.
13. Tiraabku: dhawaaqaygu; tuumi: laysugu soo ururo.
14. Yaarka kaga taagay: alaabta rartay.
15. Ula sameed: togga magaciis; dooyadii: ilaaladii; hore u sii tuuray: sii diray .
16. Timacad: galadii cadcaddayd ama geeli cadcaddaa.
17. Tiimbad: degdeg; sengayaal: fardo tabaadiya; xoog waaweyn; u loognay: ku bilownay.
18. Tiiraanya ololkii: murugadii iyo qayladii; taani: hal magaceed.
19. Tallaayda: muusannaawga; tahani: inaada.
20. Tabaysay: sugaysay.
21. Taysaha: roobka, tininigtii: codka onkodka.
22. Laraarsiinnay: erinay (waa awrtii gaalada u rarnayd ee ay geedaha ku xidhxidheen).
23. Girligaanka: qoriga boobaha ah; tuqaday: dhigay; tuunsi: ururi.
24. Urmiyo: madhiyo
26. Tacab lahayd: xoolo lahayd; taabnay: qaadnay.
27. Maadhiin: qori Ingiriis ah; tuurta: tunka; turaabka: ciidda.
28. U wadhay: u laayey; tobanle: qori toban xabbadood qaada.
29. gebegebe tu'inno: bannaan fariisinno; maarre: qori faransiis ah; teednay: daynay.
30. tafwareeman maayee: in yar la baxsan maayee; ku inshaadnay: ku heesay.
31. Turugga: taagga;
32. Tabar: xoog; tarantaree: wareeg.
33. Taxaash: hal magaceed.
34. Tuuraha: taagagga; cadduur: meel magaceed; toolin: caano; toosan: hal magaceed.
35. Gool labaadiga dhigay: toban gool oo naaxday.
36. Toban unuun gooyo: toban halaad ilmihii laga gawracay markay dhaleen.
37. lagu taageeray: laygu gargaaray.
38. Taan eryoon jirey: hashii goonida la iigu saari jirey intaan geela la qaybin.
39. lagu tanaadaa: lagu faa'iidaa.
40. Tuurre: faraskiisa magaciisa; iimay: meel magaceed.
41. Xamar: faraska; taraaro: dheereeyo; misane: haddana; taal ku sii dare: inaada ku sii dara.
42. Kabtiga: orodka dheer; tabo: xeelado;
43. Tulud: hal; godlaan: maalaan; tawi: hal magaceed; sanyaday: qaaday.
44. Tafatoofka: silica.
45. Loo tebi: loo geeh.
46. Timasoohanow: timafiicanow; kuma tabaaleeyo: dhibaateeyo.

## Gabay: TIRTIRIS CULIMMO.

## SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN

Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo Ciidammadiisii Daraawisheed halganka dheer ee ay u soo galeen gobannimada Ummadda Soomaaliyeed ma aha mid la soo Koobi karo. Waase mid dadka Soomaaliyeed ay weligood xusuusnaan doonaan.

Sayidku waxa uu ahaa abwaan aad ugu weyn murtida Soomaaliyeed, gabayadiisa tirada badanina waxa ay ahaayeen kuwo dadka Somaaliyeed uu inta badan ugu baaqi jirey sidii ay Isticmaarka dalka Somaaliyeed uga xoreyn lahaayeen, Diinta Islaamka si habbon ugu dhaqmi lahaayeen, waxyaabahay ina faraysana u tixgelin lahaayeen. Gabaygiisana oo aan halkan ku dhammayna waxa uu ku guubaabinayey wadaaddada Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwoodii Isticmaarka wax la qabsanayey. Waxaanu ku dhiirri gelinayaa inay isticmaarka jahaad ku qaadaan oo ay dalka ka xoreeyaan isla markaana iyagu dalka u taliyaan; waxa uu yidhi:—

1. **Dood waxaan u leeyahay culumada dafaarka ah**
2. **Waar an idin ma doocine idinkaygu diimaye**
3. **Dalkaa iibsateen baa dacarta igu kiciyee**
4. **Shan hal oo idiin daran ayaan idin dareesiin!**
5. **Mar waa inaa dayowdeen diirad haddaydin qaadden**
6. **Ninka idiin darraadaana duunyiyo ducuu heli**
7. **Dadka aydin raacdeen isna waydin diga gubi**
8. **Dillaalakii la siinayana duxna kama heleysaan**
9. **Dibna deeqda Eebbahay denaha saari maysaan**
10. **Diin nimaan aqoonini dameer caynsan weeyee**
11. **Waar maxaa dufaayow cadaawe ugu daranteen?**
12. **Wanka doosha weyniyo ma dagaa u xilateen?**
13. **Dawersigu ma fiicnee qandiga mayska duubtaan?**
14. **Awyaalaw ma duushaan jahaad ma u dareertaan?**
15. **Warma danana iyo seef degta maa ku qaaddaan?**
16. **Wiyi ka diirka-qaadka ah bidixda mawgu dadabtaan?**
17. **Darmaan haad la qooqdiyo dawlaab maa u fuushaan?**
18. **Doobbiga xammaalka ah dekarka maa ka goysaan?**
19. **Deyqaadka eyga ah duburta mawgu legeddaan?**
20. **Daacuflayda ramadka ah degdeg maw xabbaadhaan?**
21. **Dayrdhalkeeda madiga ah dambarka maa ka maashaan?**
22. **Idinkaa dalkaba lehe dawlad maa u noqotaan?**
23. **Illayn doqoni calaf ma leh dubaax maxaa ka baylahay?**

**WEYDIIMO.**

1. b) Gabayga qaybtan aanu ka soo qaadnay, Sayidku maxa uu wadaaddada ku guubaabinayaa?

   t) Wadaaddadu, markaa, kaalintee bay kaga jireen halganka gobannimadoonka ee lagu jirey?

2. Shanta hal ee Sayidku wadaaddada u sheegay inay waxyaabo u daran ahaayeen, maxaa ay kala yihiin?

3. «Dawersiga ma fiicnee qandiga mayska duubtaan», tuducani maxaa kaaga muujinaynaa siyaabaha wadaaddadu ay diinta ugu dhaqmayeen iyo fikradda siyaabaha Sayidku ka qabay?

4. «Illayn doqoni calaf maleh dubaax maxaa ka baylahay?»

   b) Si kooban tuducaa ujeeddadiisa uga hadal.
   t) Ereyada hoosta ka xarriiqan micnee.

**Sharax :**

Dafaarka ah: xumaatay waxa uu la hadlayaa culimadaa diinta khilaatay.

An: Aniga; doocine: faquuqine; diimaye: diidaye; (anigu culimmadii idinkama saarine idinka iska saaray).

Dayowdeen: habowdeen; diirad: alaab wax lagu eego; (haddii aad qaadateen alaab gaal; jidkii waad ka lunteen). (Ninka idin xumeeyaa waa liibaanayaa).

(Gaalka aad raacdeen waa uu idin cidhib goynayaa).

(Ninka waddanka xoolo yar dhaafasadaana, waxba uma taraan xoolahaasi).

Haddii aad iibsateen waddankii waxba kuma kuma lihidin naxariista Eebbe).

Cayn: xadhig rarid; (qofka aan diinta aqoon waxa uu la yahay dameer raran).

Duuflaal: (maxaa culimadiinaa aan hagaagsanayn u raacdeen).

Doosha: baruurta; dago: sako: xilateen: raacdeen; (diintii waxa aad ka doorateen xoolaha dadku idin siiyo).

Dawarsigu: baryadu; qandi: kiish; (baryada dadku ma fiicnee tuura weelka baryada).

Awyaalow: culimoy; (culimooy ma ku duushaan gaalada!!!).

Danan: afaysan.

Wiyilka diirka-qaadka ah: gaashaanka; dabataan: qabsataan; (maa bidixda gashaanka ugu qabsataan jihaadka!).

Darman: dhasha fardaha; qooqda: ciyaarta; dawlaab: magac faras; (ma jahaadka u fuushaan fardo dhalad ah oo dheereeya!).

Doobbiga: gaal-la-joogta; dakarka: buuryada; adeegayaasha gaalada maad laysaan!) (Daba-dhilifka gaalka maa laysaan oo dhabarka u tuurtaan!).

Daacuflayda: hasha shaashka leh; ramad: dhalmo cusayb; xabbaadhaan: qaaddaan; (dabadhilifka gaalka maad ka qaaddaan geela!).

Dayr-dhalaka: hasha caanaha badan; madiga: ilmaha lahayn; ramadka: caanaha dhalma cusaybta; (maad ka maashaan geela adeegaha gaalka!).

Dubaax: hilibcusub; (qofka doqonka ah maxaa wax uu heli lahaa baylahay).

## GABAY: SENGE DHABARKII *(XUSEEN XASAN)*

Xuseen Xasan waxa uu ahaa nin gabyaa ah; geesi ah, fardafuul ah; waxa uu ahaa nin aad loo tixgeliyo loogana dambeeyo. Haddaba; beri beryaha ka mid ah ayaa sidii reer miyiga u caado ahaan jirtey, shaqaaqo dhacday, oo rag la iska laayey. Markaasay odayaashii dooneen in shaqaaqadaa la qaboojiyo oo wixii dhintayna magtoodii la kala qaato.

Markaas Xuseen Xasan waxaa looga yaabay inuu nabadgelyada khatar geliyo oo uu waanwaantii la waday baabi'iyo sidaa darteed, duqaydii waxa ay ku tashadeen in la xidho ninkaa, inta la dhammaynayo dhibaatadii markii taagnayd.

Xuseen Xasan waxaa loo sameeyey shirqool kaasoo ahaa in gaaladii dhulka xukumi jirtey lagu yidhi ninkani doonyihii Berbera soo geli jirey buu nimankii abbaanka u ahaa ka qaaday sida darteed, waxaa loo baahan yahay in la xidho, si fidmo ayan meesha uga dhalan; halkaasa Xuseen Xasan lagu xidhay.

Xuseen Markaas weligii doonni ma arag, kolkii la yidhi doonni baa lagugu xidhayna waxa uu codsaday in la tuso doonnida waxa ay tahay. Xuseen doonnidii markii uu arkay, wuxuu ka yaabay foolxumadeedii iyo wixii saalo adhi gudaheeda ka buuxday, iyo suudhii qadhmuunayd ee ka soo kankameysey waxa uuna yidhi:—

**Ninba sadada meel baa Ilaah uga sameeyaaye**
**Anse taydu waxay saaran tahay sudiyo geelwaabe**
**Senge dhabarkii saymiyo colbaan saami ku lahaaye**
**Weligeyba saar iima qaban suudhan doonyaha eh**
**Geelaan silsiladda u ahaa sudihi yaa daajin**
**Cadawgii an seetayn ogaa yaa u xidhig soohi**
**Sir-caad samaan iyo xumaan waxan sameeyaaba**
**Amba waan ka soo saari jirey saymo kii gala eh**
**Sahlanaa ammurtaydu sow lalama sooyaamo.**

### SHARRAXA EREYADA:

Sado: waa baddii ay boqorradu qaadan jireen halkanse waxaa looga jeedaa nolosha.

Sud iyo geelwaab: waa laba meelood magacyadooda .

Senge: faras; sayme: meel halis ah .

Saami: qayb; suudha: gadhmuunka.

Lalama sooyaamo: lalama wareero.

## GABAY KU SAABSAN DAGAAL.

Nimanka Soomaaliyeed ee gabya, waxa ka tirsan koox Qowdhan Ducaale ka mid yahay oo lagu magacaabo naftood hafarro. Nin kasta oo kooxdaa ka mid ihina waxa uu leeyahay gabay uu isku faaniyo, kuna sheeganayo waxa aanu samayn uu aad u buunbuuniyey. Gabaygan Qowdhanna waxa uu ka hadlayaa dagaal aan waxba ka jirin oo uu Qowdhan ku sheeganayo in col uu ku jirey ay soo dhaceen geel markii ciddii lahayd ay jebiyeen. Qowdhan, caan wuxuu ku ahaa dagaalyahannimo iyo gabyaannimo. Gabyaagii caanka ahaa ee Cabdi Gahayrna wax badan bay gabayo isu tiriyeen. waxa uu ku dhashay miyiga Hargeysa. Wuxuu yidhi:—

**Hiirtii intaan rag u lallabay, guluf u heensaynnay;**
**Caanaha sibraar loo hubsaday, heetis kaga maallay;**
**Hadhka lama galee maalintaa,socod ku haasawnay;**
**Habeenkii halkii lagaga degey hugun la gaagaabi;**
**Kolkay dhaxanta wada hiifayeen, hadal u diirdiirshay;**
**Hiyigan ka soo bixitinnee, hore u kooraynnay;**
**Kolkii waagu noo halalac yidhi, halabsannoo fuullay;**
**Hardhafkaan ku liibaani jirey haawiska u qabannay;**
**Abbaanduulihii lagu hodmiyo, hibada wiil saaray;**
**Haawayda dooyada markaa, laba horreysiinnay;**
**Qorraxdoo dhan heelkeedu maray, halab la qooraansey;**
**Higta weerar sida hoorrimaad, hiririgtii yeedhay;**
**Hanfafkeeda lama raajiyee, heego soo dadabnay;**
**Hirrigtey garbaha kaga dhufteen, hadaw ka buubaashay;**
**Darmaankaan jaraha ku habbanayn, hadimadii leexay;**
**Sengihii la haantoobin jirey, hudahudee geela;**
**Kii naga hor joogsaday markaa naga hareer weecay;**
**Anoy faraska niman ii hayaan, ku hantay gaashaanka;**
**Labo waran habeed iyo sar iyo hayle kala boodey;**
**Maro dhiiggu hoobaan cas yahay, haydhafyada siiyey;**
**Heemashigii quudan jirey, hilib ka googoosay;**
**Hayaay iyo hayaay loogu gee, nimankii hoynaayey;**
**Fardahay ku hawshoon jireen, heballo soo fuule;**
**Kolkay heel bannaan naga arkeen, nalagu soo huuri;**
**raggi heegi jirey baan nahee, hootada u rogannay;**
**Walhadoo habeenno qatanaa, nadi ku haareeyey;**
**Hankakaabsiguu ila dhexgalay,waa hulkaan baraye;**
**Darmaankaan halkaa kagala hadhay, daba hashlee kayga;**
**Nin halgaaban baa lagu murmaa, halakadaw jiiday;**
**Waa hibo Allee raacdadii, hal iyo baar geynney;**
**Waddaday dabayluhu rufeen, ka hawo geeraaray;**
**Sidii niman hayaansaday markaa, daba hubaalayney;**
**Maraqii horaaddada ka dhacay, hadaw ku laafyootay;**
**Dhallinyaradu hawdkaa ka badan haatan soo kacaye;**
**Haseyeeshee anay igu hirtaan heyda dirireede;**
**Sida aarka heebaan ah baan, ugu horreeyaaye;**
**Xuseen baan halkii layska helo, abid hongoobeyne;**
**Leefleef siduu haad u cunay, ka hakay baabkiiye;**
**Labadeenna waa laga hayaa, hilada limey eh,**
**Haad kacay la moodyow beryahan, hedi ha ka raagto.**

## LAYLIS.

1. Gabaygani maxaa uu ku saabsan yahay? Ujeeddadiisu waa maxay?

2. Ka hadal Qowdhan iyo colkiisu siday u diyaargaroobeen, socodkii intay jidka ku jireen, waxay sahay u sii qaateen, goortay dagaalka galeen, siday dagaalka u galeen, waxa ay dagaalka ku galeen (hub) iyo waxa ay hantiyeen siday yidhaahdeen?

3. Adoo hadalkaaga soo koobaya, habka dagaalka maanta loo galo, iyo habkii Qowdhan wakhtigiisii loo geli jirey isu qiyaas. Ha ku koobin dhinaca hubka, tabaabulshaha, soo ilaalaynta, waxa lagu socdo, cuntada, is-qaybinta iwm.

4. Berigaas Qowdhan noolaa yaa dagaalku dhexmari jirey (inta badan). Maanta taasi ma jirtaa? Waayo? (dalkeenna isku koob).

5. b) Dagaalka iyo nabadda midkee jeceshahay? Waayo?.

   t) Muddo badan haddaad waxaad leedahay oo lagaa dhacay nabad ku doonto laguguna siin waayo, maxaa kula gudboon inaad sameyso? Waayo?.

   j) Dagaalka maxaa uu ka kacaa (maxaa dhaliya).

   x) Maxaa laysku tixgeliyaa?.

6. b) Ka hadal tuducyadan xidhiidhkooda iyo ujeeddadoodaba:—

   i) Eray habka siyaasadda aynnu ku dhaqanno ku habboonayn ayaannu ku beddelley.
   (Darmaakaan jaraha ku habbanayn hadimadii leehay)
   (Sengihii la haantoobin jirey hudahudee geela).

   ii) Macnaha maldahan ee labada tuduc ka hadal (5,6).

7. Sharrax naftii hafar (gabyaa)?.

8. haad kacay la moodka Qowdhan u ducaynayaa waa kuma?.

## SHARRAX.

**(1) Hiirtii: Salaaddii hore, lallabay: isugu yeedhay Guluf: col fardooley ah; heesannay: xiriirinnay.**

**(2) Heetis: hal magaceed.**

**(4) Hugu: guuxiyo isxansi.**

**(5) Hiifayeen: canaananayeen; durdurshay: kululeeyey.**

**(6) Hiyiga: Niyadda; kicitinnee: ambabaxnee; Kooraynay: faraska kooraha saarnay.**

**(7) Halalacyidhi: iftiimay; halabsannay: fuullay.**

**(8) Hardaf: nooc arodka faradaha ka mid ah; Hawis: si sahalan faraska u sii eriney.**

**(9) Abaanduule: madaxda colka; hibada: xilka .**

**(10) Haaweyda: bahalaha; dooyada: ilaalada; (Niman adadag baannu ilaalo u dirnay buu u jeedaa gabaygu markuu leeyahay** «haaway»).

**(11) Heelkeedu maray: u janjeedhsatay; qooraansay: la gaad.**

**(12).Weerarkeennu ku soo qaadnay iyo rasaastaannu ridaynay qarurkeedii waxaad moodaysay roob onkoday.**

(13) **Hanfafkeeda: dagaalkeeda; heegan: kooxda gurmadka laysa marka geela la qaado kolka qaar geela kexeeyaan qaarna waxay isu diyaarinayaan kahortagga gurmadka ku soo maqan waxaana la yidhaa heegan, gabyaaguna nidaamkii sidaa ahaa buu baydkan ku tilmaamayaa.**

(14) **Hirrigtay: ushay; hadaw: hal magaceed; buubaashay: carartay; (markii usha lala dhacay baa geelii yaacay).**

(15) **Darmaan: faraska yar; jaraha: layliga ama hoggaanka faraska; ku habbanayn: ku fiican; hadimadii: dhibtii; leexay: daal (faraska yaraa ee in meeshaas oo kale uu maro aan ku habbonayn markii uu dhibaatooday wuu daalay).**

(16) **Sengihii: faraskii xoogga lahaa; haatoobin jirey: la toocin jirey ama la eryi jirey; hudahude: kolba gees ka soo gal** «macnaha guud waxa weeye, faraskii xoogga lahaa geelii dhan walba kaga yimi oo isu soo ururiyey».

(17) «kii na horjoogsaday ee doonayey inuu geela naga dhiciyo, markuu xooggayagii ka baqday ayuu jidka noo banneeyey».

(18) Ku hantay gaashaanka: ku haleelay gaashaanka.

(19) Waran-habeed: waran weyn, sar: gaashaan; Hayle: maro duug ah oo xun.

(20) Xaydhafyada: nacaysyada (ninmankii waan laayey oo maryo dhiigle ayaan u xidhay).

(21) Heemaashigii quudan jirey: haadkii cuni jirey; (markaan laayey baa hilikoodii haadku cunay).

(22) Hayaay: waa eray qaylo ah; hoynaayey: lahaa; (qayladii baa u tagtay nimankii geela lahaa).

(23) Hebello: magacyadoodii buu u jeedaa.

(24) Heel bannaan: meel bannaan; ama afmeer nalagu soo kululee.

(25) Heegijirey: ku rogi jirey; hooto: eebo.

(26) Walhad: magacii faraskiisa; nadi: jeedal; haareeyey: dildillaaciyey.

(27) Hankakaabsi orodka xoogga leh; waa hulkaan wadaye: waa sidaan doonaayee.

(28) Hashle: orod.

(29) Nin halgaaban baa lagu murmaa: nin xun baa lala murmaa; halakadaw jiiday: isku dubbariday.

(30) Hibo Alee: siin Allee; haliyo baar gaynay: erinay.

(31) Dabayluhu hufteen: dabayluhu xaadheen; Hayaansaday: geeddi ah; humbaallaynayee: aayar daba saconnay geelii.

(32) Hadaw: hal magaceed; laafyootay: xarragooday.

(35) Layska helo: lagu diriro; hongoobay: qaday.

(34) Hayda dirireed: qaylada dirireed; hirtaan: daydaan; Heebaan: nin magacii; aarna wuxuu uga jeedaa waa geesi.

(36) Leefleef: nin magacii.

(37) Laga hayaa: laga yaqaan; limay: meel magaceed.

(38) Hedi ha kaa raago: dhimashadu ha kaa raagto.

## GABAY: XUSEEN DHIQLE

Xuseen Maxamed, oo Xuseen Dhiqle ku magac dheeraa, waxa uu ahaa ninkii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan gabayada ka qaban jirey. Xuseen Dhiqle waxa uu ahaa dadka haddii ay wax maqlaan sida rikoodhka (Record) u qabta ee aan weligood halmaamin ama illawin. Sidaas darteed, ayuu gabayada Sayidka intuu mar qudh ah dhegeysto dabadeedna sidooda u sii deyn jirey.

Waxa dhacay in markii uu Sayidku dhintay, daraawishtiina baaba'day, uu isaga iyo dad badan oo kale ay dalka Caruusha galeen, oo Boqor Cali Daahir iyo walaalladii u galeen. Dadkii Xuseen raacay, waxaa ka mid ahaa Gabadh uu Sayidku ka dhintay iyo Caasha Jamaad Cabdulle Xasan oo Sayidka walaashii ahayd. Suldaan Cali Daahir markiiba waxa uu guursadey gabadhii seyidku ka dhintay, walaalakii Nuux Daahirna waxa uu la doonay Caasha Jamaad, hase yeeshee Caashi waa ay diiddey inay Nuur Guursato. Suldaan Cali baa Xuseen u yeedhay oo ku yidhi waa in aad gabadha la hadashaa oo aad walaalakay u dhistaa, adiguna qudhaaduna waxa aad arrinta ka qabto noo sheegtaa, adiga oo maskaxdaada ku haya in aanu idinka oo daaduun ahaa idin soo dhoweyney oo Amxaara iyo caddaanba idinka magan gelinnay. «Xuseen iyada oo ay u ahayd laba kala daran lagu doorran sii, ayuu gabaygan tiriyey. Isaga oo isku meselaya dawacadii libaaxu inta uu waraabihii badh ka siiyey dhirbaaxay, iyadii u yeedhay ee yidhi naa hilibka qaybi» wuxuu yidhi:—

1. **Qayaashmaash libaax baa dhurwaa qaybi yidhi soore**
2. **Wuxuu yidhi hilbaha jeex bal qabo qoon dhan baan nahaye**
3. **Markaasuu qambaabiilihii qoonsadoo deyeye**
4. **Dharbaaxuu il kaga qaaday oo hoor ka soo qubaye**
5. **Af-qashuushle goortuu dhintuu sii qataabsadaye**
6. **Dawacuu markaas soo qabsaday sida qisaaseede**
7. **Wuxuu yidhi, qanjaafula xumey tali qadaarkaaga**
8. **Adeer gacalle qaar iyo dalool qawdho iyo feedho**
9. **Qummudiyo baruur iyo leg iyo qawlihii kuruska**
10. **Waxay tidhi islow qabiye neefka wada qaado**
11. **Markaasuu dugaaggii qabsaday qoobaba kadafleeye**
12. **Isaguba qareen ma leh dayow qayliyaha aare**
13. **Innagoo quruun dhana maxaa qado inoo diidey?**
14. **Waxay tidhi: qacdii hore hadduu Cali ku sii qaaday**
15. **Kii inoo qabweynaaba waa qooq wax loo dilaye**
16. **Anigoo qadaarkana miyaa qamash ka soo waaqsan?**
17. **Anna qaabaddii baan ahayoo lay qulquladeeye**
18. **Labadii qof ee igaga hadhay qaafadii dumare**
19. **Middii qurux u roonayd hadday Cali la qooqeyso**
20. **Iska qaata Naadoba rag bay qaac u shidataaye**

**Sharrax Erayada.**

1. Qayaash maashe: af xabashi; Boqor-Islaaw: Madax.
2. Jeex: Badh; Qoon dhan; Ummad badan.
3. Qambaabile: Xoogweyne; qoraweyne; Qoonsaday: cadhooday; Deyey: eegay.
4. Hoor: Ilmo.
5. Af-qashuushle: Af-xume; Qataabsadey: Tukubay; luuday;
6. Qisaas: ciqaab.
7. Qanjaafulo: ciddiyo; cago: qoobab; Qaaddaarkaaga: taagtaada, caqligaaga.

8. Qaar: badh; Jeex; Dalool; 1/3 (saddex meelood meel). Qawdho-hilibka lugaha iyo jeenyaha ku yaal, hilibka aan lafaha lahayn sida dhuumaalooyinka iyo sararaha.
9. Qumud: seedaha ama jiidhka aan wax baruur ah lahayn.
10. Islaw: Boqor; Suldaanow.
11. Dayow: dacwo; aar: libaax lab.
12. Cali: dhirwaagaa Cali lagu naanaysaa.
15. Qabwaynaa: ba'naa xoogroonaa. Qooq: kibir.
16. Qamash: dhirbaaxo xoog weyn. Waaqsan: kici; ka bogsoon.
17. Qaabaddii: tabta, sidii; qulqulad: maagis; rabshad; cidhiidhi.
18. Qaafadii: tiradii badnayd.
19. Qaac: uunsi, udug.

**Sharrax guud:**

Gabayga waxaa laga dhigay sheeko aad loo yaqaan, oo ah inuu habar dugaag oo dhami intuu isu tegey hal qashay. Dabadeedna libaaxii intuu dhurwaa u yeedhay buu hilibka inoo qaybi ki yidhi. waraabihiina hilibkii kala badhay oo libaax badh siiyey, badhkii kalena, habar dugaag intiisii kale dhex dhigay. Hase ahaatee, libaaxii qaybtaas waa ka cadhooday oo waraabe intuu dhirbaaxo il kaga tuuray, dawaco u yeedhay:—
Adna bal hashaa wax ku qaybi. Dawaco iyada oo lafaheeda u cabsatay ayey libaax wixiiba gacanta u gelisey. Markii dugaaggii xanaaqay ee yidhi: «Naa ninku waa keligiye, maxaad inoo qadisay», ayey tidhi:— «Isha Cali cawr ka lulata ayaan wax ku qaybshay».

## CILMI BOODHARI

Cilmi Ismaaciil Liibaan oo Cilmi Boodhari ku magac dheeraa, wuxuu noolaa muddadii u dhexeysey 1900 — 1937, waxa uuna ku dhashay miyiga magaalada Hargeysa. Cilmi gabayga hidduu u lahaa; waxa uuna ka dhaxlay abtigiis oo abwaan gabayga ku caan baxay ahaa.

Cilmi iyo Hodan waxay isku barteen magaalada Berbera oo uu Boodhari dukaan rootiga duba ku lahaa, Hodanna aqal dukaanka ka soo horjeeday ku jirtey. Hodan iyo Cilmi sheedda uun bay iska arki jireen, marmar ay dukaanka rooti u soo doonto oo intay dibedda istaagto dib isula rogto mooyaane.

Jacaylka Cilmi malgay waxa uu ahaa mid daymada ka dhashay dabadeedna bogga iyo laabta ku barbaaray. Dhug fogaanta jacaylka iyo qoto dheeraantiisa waxa si dhab ah looga dhadhansanayaa, gabayada faraha badan ee xiskii Cilmi Boodhari ka soo burqaday si dhibaatadii jacaylka iyo dhega adeeggii Hodan dhagartooda looga fogeeyo, ayaa Cilmi Jabuuti loogu dhoofiyey Sannadkii 1933. Hase ahaatee, marnaba ma uusan qancin ama ma quusan. Gabayo badan buu ku sheegay inaanu Hodan illaawi doonin ilaa iyo inta xusuusintiisu xabaal ka sarreyso. Sidii bayna noqotay — Cilmi jacaylkii Hodan buu dhaawaciisii u dhintay, Hodanna maanta way inaga hoosaysaa.

Gabaygan soo socda waxa uu inoo muujinayaa in Cilmi, isagoo hurda uu ku riyooday gabadhii uu jeclaa. Goortii uu soo habaabirey, ogaadayna inaan gabadhii uu jeclaa meeshaa la joogin, gabay kalgacal ah ayuu halkii ku tiriyey isagoo dhibaata ka calaacalaya, dhowr tusaalena ka bixinaaya inta dhibta haysataa ay qaro la'eg tahay; waxa uuna yidhi:—

**1. Sidii geel harraadoo wax badan Hawdka miranaayey**
**2. Oo haro la soo joojiyoo kureygu heegaayo**
**3. Oo hoobey loo qaaday iyo hadal walwaaleedka**
**4. Kolkaad Hodan tiraahdaanba waan soo hinqanayaaye**
**5. Hadday hawl yaraan idin la tahay aniga way hooge**
**6. Aydaan xabaal lagu ham siin waanan ka hadhayne**
**7. Hammada been baan idhi malaha waaba la hurudaaye**
**8. Hareertayda oo madhan is idhi haabo gacanteeda**
**9. Goortaan hubsaday meel cidla ah inaan ku hooshooday**
**10. Hogaansigeedii dambaan soo habaabiraye**
**11. U haylhaylay gogoshii sidii halablihii Aare**
**12. Siday iga halleyeen maryihii hiifay oo tumaye**
**13. Haab-haabtay labadii go'oo shaadhkii maan heline**
**14. U hamiyey sidii wiil la dhacay kadin ay haysteene**
**15. U handaday sidii geel biyaha haabay loo yidhiye**
**16. U hagoogtay sidii geesi ay niman ka hiisheene**
**17. U hiqleeyey sida naag la yidhi huray dalaaqdaaye**
**18. wax aanad haynin ood ku hammidaa hadimo weeyaane**
**19. Ho-heey iyo ho-heey maxaa hadimo la ii geystey**

Haddii aad u fiirsato afarta tuduc ee u horreeya gabayga: Cilmi waxa uu inoo sheegay in marka la soo qaado magaca Hodanba uu hinqado sidii geel muddo badan harraaddanaa oo biyo la kor keenay. waxa uu markaa u ekeysiiyey hinqadka uu hinqado kan geela muddada badan haarraaddanaa ee biyaha la ko keenay.

Waxa uu markaa gabyaagu isticmaalay wax aynnu oran karno «Afmalda-hayaal »kuwaas oo ah marka aad wax ulasi aan ahayn sida aad u tiraahdid.

Waxa aan ka qornay gabayo uu ururiyey Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.

«Afmaldahayaashaa» waxa ka mid ah «Ekeeye» ood ku argtida afartaa tuduc ee hore. Ekaeeyaha waxa aad ku garan kartaa ama gadh-haye u ah ereyga sida ama sidii.

**Tusaale:** Cali waxa uu u cunaa sidii qof buka. waxa aad aragtaa in cunta xumada Cali an u ekeysiinnay sidaa u qof buki wax u cuno. Sidaas awgeed ayeynu ula baxnay «Af maldahan ekeeye» .

**LAYLIS.**

1. b) Gabayga ka raadi ekeeyaal kale, laga bilaabo tuduca 11aad.

   t) Baadh waxay wadaagaan ama isaga egyihiin waxyaabaha u isku ekeesiiyey gabaygaan tuducyadan dambe.

2. Tuduca lixaad:—

   «Ayadoon cagaar lagu ham siin waanan ka hadhayne».
   Tuducan si maldahan buu u yidhi gabyaagu isagoo isticmaalaya .
   «Af maldahane» la yidhaaho «Shareere» Muxuu uga jeedaa?

3. Si tifaftiran uga faallood tuducyada 7aad ilaa iyo 11aad.
   Haddii uu Eebbahay kugu anfici waayey kitaab idile
   Haddii aadan aqlin xaajadaa lagu ogeysiiyey
   Nin kaloo ilaah kuu baxshaaba kala awaareynay.

**Weydiimo:**

1. Adigoo gabaygan aan dib u akhriyin, qor qodobbada ay ka kooban tahay Saahid uu afadiisa u soo jeediyey.
2. «Afeef» iyo «waano» maxay kala yihiin?
3. Waxyaalaha Saahid afadiisa ku adkeeyey inay ku dhaqanto ee gabaygani ka hadlaayo maxay kaaga muujinayaan Soomaalidii hore siday u dhaqmi jirtey?
4. Waxayaalaha afada lagu adkeeyey inay ilaaliso oo dhani adiga ma kula habboon yihiin? Haddii qaarkood kula qallafsan yihiin, ka hadal waxay kuula qallafsan yihiin.
5. Tuducyadan sharrax:
   b) Hana igu itaaline ka yeel meel ergada deeqda».
   t) «Uurkaygu suu damacsan yahay aniga aan sheegin/caqligaa waxa laga fiiriyaa garo ixtaadkayga».

   j)«**Haddi aadan aqbalin xaajada lagu ogeysiiyey/Nin kaloo ilaah kuu baxshaaba kala awaareynnay**».

**Sharax:**

1. Haro: balli.
2. kuray: wiilyar; heegaayo: horjoogo; (sidii geel ooman oo baalli dushii wiil yari hor joogo).
3. Hoobay: hees; hadal; walaaleed ; heesta geel ooman oo loo qaadayo heestii geela).
4. Hinqanayaa: soo ruqaansayaa, (marka aad sheegtaan magacā Hodanba waa soo hinqanayaa).

5. (Haddii ay idin la fududahay aniga ilama fududa).

6. Lagu ham siin: La aasin, (ilaa Hodan qabriga la dhigaayo kama hadhaayo).

8. Hadoodilay: i moodsiiyey; habar wadaagaan: isu eg yihiin; jin baa iyadii iiga dhigay mid ay isu egyihiin).

9. (Iyada oo iga maqan ayaan is idhi gacanta qabo).

10. (Markaan ogaaday inaan meel madhan ku hawshooday).

11. Hoogaansigeedii: soo noqoshadaydii, hambaabiray: soo toosay; (isla markaan gacantii soo celiyey ayaan soo toosay).

12. Hayl-haylay: filqay; halable: shaashle; (gogoshii waxaan u filqay sida libaaxa).

13. Hiifay: canaantay (maryahaygii waxaan u canaantay sidii ay iga halleeyeen Hodan).

14. Hammiyey: murugooday; (waxaan u murugooday sidii wiil laga qaaday geeloodii boqolka ahaa).

16. handaday: gacamay (waxaan u soo hinqaday sidii geel biyaha loogu heesay).

17. Hisheen: eexdeen; (waxaan u hagoogtay sidii nin gartii lagaga eexday).

18. Hiqleeyey: ooyey; huray dalaaqdii: ku furay; (waxaan u ooyey sida ay u ooydo naag la furay).

19. Hammidaa: doontaa; hamido: waxyeello, (waxaanad haynin oo aad jeclaataa waa dhibaato).

20. Ho-hey iyo ho-hey: ba'ayga e maxaa dhibaato la ii geysteey!!).

## GEERAAR: KA-SABAAN KA-SABAAN

Geeraarkan waxa tiriyey nin gabyaa weyn ahaa oo loo yiqiin Faarax Nuur. Faarax waxa uu ahaa nin aad u fiiro iyo feejignaan badan, meel shishena wax ka arki jirey, wuxuna dhintay 1932.

Geeraarkan waxa uu kaga hadlayaa heerka uu ku sinnaan karo dulqaadka dadku ama qof haddii xumaan loo geysto, in aanu markaaba xumaan ka horgeynay ee uu wanaag iyo dulqaad xumaantiisa aad kala hortagtaa, marka aad wanaag kala quusatidna aad ka dhiidhidaa.

Geeraarka:

**Rag sabaan ka sabaan baan samaanta u badiyaa**
**Hadduu saakimi waayo**
**Salligaan u dhigaa iska seexo idhaa**
**Hadduu saakimi waayo**
**Caanihii hasha suub baan, saddex goor u lisaa ku sarrigo idhaa**
**Hadduu saakimi waayo**
**Sumalkii rugta joojiyo sogobkaan u qalaa**
**Hadduu saakimi waayo**
**Sarriiggii cadameed baan subaga ugu badshaa**
**Hadduu saakimi waayo**
**Gabdhu suurad wanaagsan baan, surradda ugu dhisaa**
**Hadduu sakimi waayo**
**Xoolo gooni u siifiyo sadadaan ku ladhaa**
**Hadduu saakimi waayo**
**Seeddow mood iyo nool iyo salaantan u badshaa**
**Hadduu sakimi waayo**
**Salaaddaan lallabaayoo, salinkaan qabsadayoo, maydal suulal**
**Madow iyo sulub eebo ku joogtaan sararta ku dhuftaa sambabka ka baxshaa**
**Markaasuu salimaa igu saakin noqdaa.**

LAYLIS:

1. Si tifaftiran uga faallood gabyaagu sida uu ula dhaqmi jirey dadka, waxa uu ku dayi jirey haddii uu sidaa waayo iyo waxa uu yeeli jirey haadey kafursan weydo.

Sharax:

**1. Sabaan ka sabaan: waqti badan; saakimi waayo: hakan waayo.**
**2. Salliga: dermada**
**3. Suub: magac haleed.**
**4. Sumalkii: wankii; rugta: reeka .**
**5. Sarriigii: bariiskii**
**6. Surrad: heeryada aqalka.**
**7. Soofa: taaga.**
**8. Sado: xoolaha boqorrada la siiyo.**
**9. Mood waa eray loogu yeedhi jirey boqorrada iyo awliyadu markay dhimato xabaalahooda.**
**10. Lallaba: colkaan isugu yeedhaa.**
**11. Salinka: salliga Nabiga.**
**12. Maydal: faras madow.**
**13. Sulub eebi ku joogto: waran.**
**14. Sararta: oofta.**
**16. Sallimaa: is-dhiibaa, saakin noqduu: i oggolaadaa.**

## YARAD DIID-GEERAAR: SHEEKH CABDI ALLAMAGAN (1880-1942)

Geeraakan waxa curiyey Sheekh Cabdiraxmaan Allamagan oo Sheekh Cabdi Shaacir ku Magac dheeraa. Sheekhu gabayga waxa uu tiriyey mar uu gabadh ka yarad geeyey, hase yeeshee, uu aabbaheed hal suudaan la odhan jirey uu ku xidhay in uu yaradka ku soo daro. Sheekhu kollaba ma damcin in uu suudaan bixiyo, waxa uuna isaga oo soddogtii u quusgoynayey ku yidhi:—

1. **Meel sifaakiyo, hiiskoyi sagan daaqa biciidkiyo, sagaarooyin galaaniyo**
   **Sool dhexaanu degnaayoo-soor magaayo ma taalo, waxna lays kama siiyo,**
   **Nin sidaas u yaqaanina seko aakhiro mooyee suudaaney kuma dhiibo.**
2. **Adigoo subax guuray oo baadiddoon u socdaalay, oo suduuday oo gubanaaya, dhayday saaka ka soofatay oo, suluxlaa ku qaboojinoo-Nin sidaa u yaqaanina seko aakhiro mooyee, suudaaney kuma dhiibo.**
3. **Marka qaanku soocmee — afdhuubyaallaha saydhee sanqaruurku ka dhoofo,**
   **Sibrihii qafilla iyo, suufka wayne xambaadhkuna, waa siyaakhad aduunoo, -**
   **Nin sidaas u yaqaanina, seko aakhiro mooyee suudaaney kuma dhiibo.**

Sharax:

1. **Sifaar: geedgaab xooluhu daaqaan. Hiil geedgaab xooluhu daaqaan.**
2. **Sagandaaq: cidla daaq.**
4. **Saw dhexe: qol dhexe**
9. **Suudaan: hal magaceed.**
12. **Su-duuday: oomay oo gaajooday.**
13. **Dhay caanuhu inta aanay dhanaanaan.**
14. **Kafooftey: ka tegtay.**
20. **Afdhuubyaalaha: orod aaranku ku Xarragoodo.**
21. **Sanqaroorka ku dhoofoo: gafuurka uu hore u saaro.**
22. **Sibrihii: isqabka shanshada iyo dhudhunka.**
23. **ramaambka: shaashka ama dhogorta geela.**
24. **sayaayaakhad adduunoo: qurux adduun.**

### FAALLO GUUD:

Gabyaagu qaybta hore waxa uu kaga hadlay degaankiisa oo ay ka mid yihiin dhirta xooluhu daaqaan sida: sifaar, hiil, iyo ugaadha, sida biciidka, sagaarada iyo samayska dhulka sida: sool. Waxaa kale oo uu ku sheegay in degaankiisa magaalo ka fogayd, sida soor magaalo ma taallo.

Qaybta labaad ee geeraarka waxa uu kaga hadlay: isla degaanka sida: baadi doonka kalahaadda, kulaylka iyo harraadka.

Waxaa kale oo uu ku sheegay in ay hashu saldhigga noloshiisa tahay. Markuu sheegay: caanaheeda macaan ee qabow in uu dhibaato oo dhan ku reebo. Isla qaybta labaad waxa aad garaneysaa in gabyaagu nin diinta ku adag uu ahaa, markuu sheegay inuu sako u bixin karo «Suudaan» oo uu adduunka ugu jeclaa.

Qaybta Saddexaad: gabyaagu waxa uu sheegay quruxda reer baadiyaha, waxa uuna sheegay marka uu durdurinayo geelu meelaha ay quruxdiisu ka muuqato, sida sanqaroorka ibraha, dhogorta, iwm.

Ugu dambayntii halkan waxa aynnu ka fahmaynaa in reer baadiyuhu tiirka noloshiisa u haystay geela, diintuna ay meel adag kaga taallay.

# SHEEKOOYIN

## Gurrac Madoobe iyo Guurkiisii:—

Gurrac Madoobe muddo aan yarayn buu guur-u-meer ahaa. Gabadh kasta feedhatana sheedsheedinayey. Aabihii waxa uu maalintuu hoyanaayey ka tegey dardaaran ahaa, «Gurrac waa nin qafal-xun, naag dulqaad badan ha lala ogaado».

Gurrac iyo gabdhaha beesha badankoodu way is-hororeen, hase yeeshee hes-hiin waayeen. Qaarkood aftahamadiisay dhaliileen, kuwa kalena dad la socodkiisa — «Sakaaradu way cabtaa iyo ma cabto ayey ki kala bixiwaayeen» . «Naa qofku meededba ma laha», «Naa qofku mala ma dhamma oo wax baa ka maqan». Erayadaas buu xanta dhallinyarada qayb ugu lahaa markay habluhu facooda faallaynayaan. Aabbihii waxa uu gooni ugu la sii dardaarmay, «Aabbee, dhaban yeelkiye, naag lexjecli leh, ha u labalugoodin».

Gurrac waxa uu geefwareegaba, inuu Geelo Rooble hadliyaa buu talo ku goos-tay. Geelo waxa ay ahayd gabadh aan dhabankeedu ku eryeyn, dhaqashana naago kaga dhaqaaday. Ina Rooble waxaa ay ahayd gaari filkeed ka ceceertay, fiicnaanna xaraar butaysatay.

Gurrac markii uu go'aankaas gaadhay ayuu is yidhi, bal sahankaagii Geelo ku saanyatay; Aw Cismaan uga kitaab fur. Kitaab Alle, qudhiisu Gurrac buu taageero tiisii ku siiyey. «Waa raas weyn oo aad ku nasan doonto ee degdeg ugu dhqaaq». Ayuu Cismaan Gurra ku dhiirrigeliyey intuu faalabiyaad seddex jeer marba baal farta u saaray.

Aroortii dambe ayuu arrintii weysada u biyeystey si uu adhiga dhexdiisa Geelo afti ugaga qaado. Intuu dhexda sii socday oo dhan, waxa xiskiisa walwaaqiyey wejigii uu xaajada ibafurkeeda iska taagi lahaa, iyo waxa ay odhan doonto tolow ma aan ku guusado ayaa idhaa... «mise waan ku rabaa ayaa ka habboon», wuxuu ku sii faallo-daba, waxa uu ku soo baxay Geelo oo intay xadhig geeddi ahaa oo ay soohatay, garabka duubinkiisii ku martay, adhigii dad iyo dugaagba ka qayla-dhaaminaysa; «Tuugow mareegaale, adiga oo lax gaadaaya ... «Waa lagu salaamay» Gurrac baa bariidadii bilaabay. «Waa lagaa qaaaday», ayey ugu jawaabtay.

«haye! bal nafta ka warran?» ayuu u raaciyey. «Umulo meesha ma joogaan ayey ugu celisay. «Dhegaa!!! oo ma salaantaa la isku cunsurinayaa? «yuu yidhi inta yar diday. «Salaani waa tii Alle iyo Nabi» ayey war ugu soo koobtay. Intaasi markii la is weydaarsay, ayuu Gurrac majirihii hadalka inuu beddelo isku deyey, oo yidhi, «Oo adhiga miyaa ciidan kaa nasiya la waayey. Adiga uun baa habeen iyo maalin u heegane»? «Taasi waa arrin kaa foge, aashaa hadal», bay ugu jawaabtay. Cabbaar haddii ilaaq iyo jikaar la iserayo dhaafsaday, ayuu Gurrac aashii hadlay. «Aniga ma aha ee mid kale Alle ha kugu guuleeyo», ayey Geelo Gurrac arrintii ugu soo gaabisay. Hadalkii markii uu dhigi waayey ayey iyada oo nagta u xarfinaysa, «Sida aabahay iiga xarriman yahay baad iiga xaaraansan tahay» bay ugu quusgoysey. Intuu illa waa Gurrac sanka cadho ka dhididay buu dhaar ka xagafsiiyey oo yidhi: «Hadduu nimaan aniga ahayni garayska iyo dhixirka kaa furo, maradaan ku jiraa way madhan tahay» «Wax kuugu filan» ayey Geelo gawdii ugu dhiibtay, oo geeddi soohidii halkii sii wadatay.

gurrac isaga oo labada qawlal abur ka tuuraya buu caweysin dhexaad u yimid adeerkii oo halo habeensaday markaas soo hoyiyey oo usha la dhigay. Odaygii oo aan jilibka laabin buu arrintii hareerta kaga billaabay, oo yidhi: «Adeer, adigaa halkii aabbahay ii jooga arrinina kobtaas bay maraysaa. Dee gadhba gadhbaa la tusaaye, waxa aan kaa doonayaa inaad ina Rooble caawa ila doonto». Odaygii baa isaga oo yaabban ku yidhi, «Waar bal shaydaanka iska naar oo horta geela caano ka maal. Wixii waa inoola baryana aan eegno». Isla cagideeba shan wiil oo ay ilma-adeer ahayeen baa ariintii la dooday oo yidhi,«Eeg waxba yaanu u baryine, waa inaad ininka raacdaa; haddii kale annagaa tegeyna oo indhaheeda oo shan ah keenayna. Siday u tidhaadaa: «Aabbahay baad iga tahay». Odaygii wuxuu ku adkaystay in aan arrintaa la fududaysan ee loo waabariiyo, hase ahatee waa lagu gacan-saydhay, waxa ayna markiiba u ambabaxeen gurigii Rooble.

Dhexda intii lagu sii jirey oo dhan waxa ay ahayd guubaabintii Gurrac «Ninba ma tihid haddii aanad naagtii maanta hadalkaas ku tidhi ka soo dhalaalin». «Naaguhu jileec iyo naxariis midna wax kuma laha». «Nimaan madaxooda mijo u rogin, nin ma moodaan» «Nimay legdaan kama kacaan». nimay .... Nimay ....» Imminkana naagta waynnu la tegeynaa, cidla'na waynu geyneynaa ee waa adiga iyo raganimadada». Ninkii ragga u talo xumaa waxaa uu soo jeediyey in inanta caawaba la naageeyo. Gurrac oo horeba macangag u ahaa, maantana cadhooday, caawana la cabbeeyey, camalkiis muxuu noqon doonaa?.

Reerka duleedkiisa markii ay yimaadeen ayey hogolfiid qabsadeen. Gurrac isagu hagoog buu jiq isku siiyey. Markiiba sacabkii baa iskudubbadhacay; heestana nimba ninkuu ka hobolsanaa buu hororsaday.

**«Naa giniyee, galaas dahabey**
**Raggan soo ciyaar gudayee**
**Waa wada gayaankaa».**
**«Aaminaay ilwaad quruxee**
**Afka qalin laguu mariyey**
**Mar uun oodda sso jebi».**

Sidii hees haloosi loogu halbaayey, iyada oo heesaheedii u dhan yahay, oo hannaan u shamaaxinaysa ayey halkii ciyaarta iskeentay. Loomaba labalugoodine, qacdiiba laba wiil baa dhufsatay saddex kalena haloosi beenaalihii bay halkiisii ka sii wadday. Laba kobood markii la weydaariyey baa Geelo la dhigay, oo inta laba sargadood lagu jawsiiyey la yidhi, «Haddii aanad iskaa nagu raacin kaayagaad nagu raaci doontaa». Gurrac baa intuu hagoogtii iska rogay, damac inuu inanta u maahmaaho, waxa uuna yidhi «Ilaahay eray gef waa keenaa kaagamase tago». Geela intii ay hadalkii qaadatay, tidhi, «Gurracow ha noqon doqantii la yidh: meel lagu kaftamay bay in lagu kala tegey mooddaa. Mantana waan kaftamayey ee ma aynu kala tegin, anigu gabadh baan ahay: adiguna gayaankay baad tahay... Gacantaadana caawa ku jiraa. Go'aakana Ilaah baa iska leh. Hadal waayeelna waa guud mar».

Intii aanu Gurrac jawaabin ayuu wiil kale afka u soo dhuubay oo yidhi: «Waa naagtu kuma aqoosana; miyaadan maqleyn in ay «doqon kuugu maahmaahday». Isna yaa geela la joogayba ma odhane, markiiba laba dhangadood oo dab ka kulul buu u dedejiyey. Oohin bay afka labadii yeedhay, hase yeeshee; markiiba intay iscanaanatay bay adkaysi miciinsatay.

Habeen labaadkii baa wadaad qalin durre ahaa lagula itaalsaday, oo meher jujuub ah lagu malaqsiiyey. Muddo markii ay ilmiriqlaynaysey ee in ay loxosgoysey la mooday, Gurracna inuu meel madhan yahay ay ogaatay, ayey habeenkii dambe markii dhagidii la galay muska soo jebisey. Nasiib darrose waxaa markiiba micida la helay aar muudaa ahaa oo aan maalmo badan hunka iska rogin.

**Sharraxa Ereyada:**

1. Sheedasheede: Ilaalin-sahmis
2. Dhaban: qurux
3. hadliya: xodxoto
4. Carceertay: dhaaftay, ka sidata.
5. Saanyatay: dooratay, kuu noqotay
6. Geeddi: xadhigsooh cawska lagu sameeyo
7. Hogolfiid: ciyaarta qaybteeda hore
8. Muudaa: libaax meel fog ka yimid.

**II. Weydiimo:**

1. Muxuu Gurrac aabihii gabadh dulqaad badan ugala dardaamay?
2. Maxay ahayd fikraddii ay habluhu Gurrac ka haysteen?
3. Muxuu Gurrac Aw Cismaan ugu tegey?
4. Aw ma run buu sheegayey, mise wuu malo hadlayey? Waayo?
5. Maxay Geelo Gurrac u diidday?
6. Maxaad ka fahmaysaa qaabkii ay Geelo adhiga ula joogtay?
7. Muxuu Gurrac adeerkii ugu talo diiday, markii uu yidhi waagu ha inoo baryo?
8. Maxay Gurrac Ilma adeerradii kula taliyeen?
9. Muxuu Gurrac geela u uleeyey markii ay tidhi waan ku oggolahay ee ha dilin?
10. Maxay yeeli lahayd haddii uu Gurrac dhaqaaleeyo oo aanu dilin?

**III. Kasmo:**

Sheekada akhri dabadeedna ereyo ama weedho hadalada soo socdo ah la micna ah ka soo saar:—

1. Hadal kali ah ku heshiinmaysaan
2. Ragnimay meel isku taagtay
3. hadeen.
4. Nin ma ihi
5. Garmaqaate
6. Ninba ninkiisaa lagu beegay
7. Qaday ama gaajooday.

## 2. RAQBA WAA KU RAGGEED.

Beeshu waxa ay degganayd kob barwaaqo ahayd oo ay dhirtu qawshay: xamashku hawray; geedgaabkuna balhiidhay. Xareeddu waxa ay wadhnayd dhulka godanka ah oo dhan: Xooluhuna waxa ay ahaayeen dharaarin-ka-dhereg, xif la barqa fadhiista.

Carruurtuna mar ay xoolaha dabaasho mooyaane, waxa ay ku rundudi jirtey, layla goobalay, shantarad, qili iyo hadba wixii kale ee la xiiso. Xulashada ciyaaraha iyo firfircoonaantoodaba waxa loo daba joogsan jirey Hiirad yare.

Ducaale, odayga Hiirad dhalay, waxa uu ahaa jaanji xoola cun ah dhakadiisuna aan tin ku hadhin aadna loo tixgelin jirey. Ducaale, sidaa darteedna waa lagu soo hiran jirey. Xeerbeegtinimada ka sokow, waxa Ducaale lagu yiqiin: xirrib fagaan, dulqaad deeq iyo wadnahiisa oo aan golow aqoon. Yaraantiisii wuxuu caan ku ahaa dhogsami, farda fuul iyo iyada oo aan weligii dhinaciisa dhulka la dhigin. Ducaale waligii marti u soo hoysatay kama seexan; nin muquuno soo moodeyna gurigiisa fara madhnaan kama noqon.

Ducaale waxa uu dhalay shan wiil oo hiirad ugu yaraa, iyo laba gabdhood oo mid weliba iyada oo raad qaadin dunta lagu xiray.
Hiirad laga bilaabo maalintii uu dab ka baydhay iyo maanta uu toban jirsaday, waxa laga dareemayey ku bannaanaanta aabihii; waxana la odhan jirey «Ducaale kan duhur cad buu dhalay».

Maalin maalmaha ka mid ahayd, ayaa Ducaale, niman cawsha dhex miranayey gartood loogu yeedhay. Qorraxda heelkeedii markuu dhan u foororsaday, ayuu Hiirad yare gurigoo u soo hadhimo, doontay. Hooyadii waqtigaas awrtii bay ku maqnayd; guriguna waaqla buu ahaa. Islaantii ma aanay soo degdegin, markay awrtii hubisay, ayey geed galool ahaa oo laama fiican bixiyey is-hortaagtay oo tidhi: oo maad laba dhuub oo maydhax ah geedkan ka sii diiratid.

Hiirad waxa uu yimid gurigii oo cidla ah. Isla markiibana haantii qabweyn buu gadhuubka ka tuuray oo caano ka shubtay. Afka haddii uu caanihii saaray, ayuu xabbad jawgeed maqlay. Isla qacdiiba waxa uu arkay in nin duleedka soo jiitamayey, gadaalna hadba isaga oo dhiillaysan, dhaymoonaayey. Ninku wuxuu shanshada haystay qori madhan, siduu u soo dhacdhacayey baanu isku tuuray aqalka hortiisii, waxa uu isaga oo neef kudinayey halbowlaha bawdadana dhiig hawda hayey, Hiirad ku yidhi, «Waar ma ina Ducaalaad tahay? «Haa» buu Hiirad isaga oo firkanaxsanaa ninkii u celiyey. «waar cadow baa raadkayga ku jooga ee, oo ilaa raqba waa ku rageede i magan geli...» Ninkii baa Hiirad yare ku yidhi «Oo maxaan yeelaa?» ayuu yidhi isaga oo ay arrin ku ballaadhatay «Qobtolkaa iyo rarada Awrtaa, soo qaad oo igu ded nimankana na dhaafa ku dheh, haddaad sidaas yeeshana qorigan baan ku siin doonaa». Ninkii baa Hiirad yare ku yidhi waxa uuna u raaciyey «Waa adiga iyo aabbahaa ceeb ku taal».

Hiirad yare sidii buu yeelay, oo ninkii heeryadii buu ku dedey. Walibana lax nayl yar ransaneysey buu qobtolkii dusha ka saaray. Wax yar dabadeed bay raggii ninka raad gurayey yimaadeen, oo markiibana guriga gelef ku qaadeen. Goortii ay baadhis kaga quusteen ayey Hiirad wareysi ku billaabeen, «Waar ninkii dhutinayey ee halkan soo maray mee?» Erayadii ay yidhaahdeen buu Hiirad ka daba yidhi, «Ninkii dhutinayey .. ninkii dhiiggan ka dhiigu ka da'ayey...? Ninkii qoriga sitay?.. Ninkii .. Ninkii.., «Halkaas uun buu uga waday oo ku celceliyey sidii wax waalan ilaa ay ka qatoobeen, qaarkoodna cadho iyo xanaaq isla madax mareen.

Nimankii midkood baa inta uu aad u cadhooday yidhi, «Maqal yarowe, annaga hadal bakayle ha na barin ee ninkii mee? Hiirad intuu qobtolkii dacal kaga fadhiistay ayuu nayshii koru qaaday oo yidhi: «Anigu hadal bakayle ma aqaan ee heesta naylahan aqaan». Markii caga jugleys iyo indha caddays lagala quustay ayey sabaale ku dayeen. Ninkii ragga u weynaa baa eebo samay cas oo la xardhay leh, xaasaw qurux badanina lagu xiddeeyey Hiirad u soo fidiyey oo yidhi: «Adeer haddaad ninkii noo sheegto, eebadaas quruxda badan leh baan ku siinayaa» Mid kale ayaa sii tirtirsiiyey, kuye, «Waa fariid faruurya cad, oo wuu inoo sheegayaa, hase ahaatee wax bog iyo baabaco leh ninkii waan arkay soo mariya baa la waayey. Nimankii intay aad cadhoodeen, ayey inay yarka dilaan ku goosteen, hase ahaatee, intay taladagorfenayeen ayuu Ducaale oo ay saanaddiisii u dhammayd soo galay. Ducaale markii uu warkii qaatay ayuu nimankii fadhiisiyey, oo ku yidhi «Waar bal horta fadhiista aan diifta idinka reebee». Kolkii oo gogol iyo cunto geed guriga kambalkiisa ku yiil ugu geeyey, ayuu ninkii dhawaca ahaa meeshii ka soo saaray oo dhaymo iyo dhuuni ula dhaqaay.

Marti-soorkii ka dib ayuu Ducaale nimankii usha diirka uga qaaday oo ku yidhi, «weligeyba gurigeyga marti u soo hoyatayna laguma qadin, magan soo gashayna laguma dilin, maantana laga billaabi maayo, ee orda oo dantiin qabsada.

1. Erayo la sharraxay:
1. Hawda: aad u baxay
2. Ballidhay: aad u naqoobay
3. Xif: dhereg dhaaf
4. Jaanjiyeen: hilib yar
5. Dharaarinta: duleedka.
6. Ribbatey: adkaatay, murugtay
7. Xeerbeegti: garyaqaan
8. Xirribfogaan: ildheeraan, tali-aqoon
9. Muquuno: xoolaha ninka wax soo doonta la siiyo
10. Waaqle: cidla
11. Gelef: baadhis
12. Diifta: gaajada iyo daalka
13. Sablaale: sababo
14. gorfayn: jeexjeexid

**Kasmo:**

1. Waxa aad sheekada ka soo akhriday in Ducaale ahaa nin ay iskugu yimaadeen sifooyinka wanaagsan ee ninka Soomaaliga ah lagu yaqaannay. Waa maxay sifooyinkaasi?
2. Magangelyada iyo deeqdu waa laba sifo oo Soomaalidu ku faani jirtey. Ka faallood sida Ducaale labadaa arrimood uga soo baxay?
3. Waa maxay waxyaalaha aad sheekada ka akhriday ee ku tusaya in Ducaale nin xoolo leh ahaa.
4. Ka sheekee xilka iyo waajibka saarraa haweeneyda Soomaaliyeed ee reer guuraaga ah. Haweeneyda sheekada ku jirta, ma ahayd mid ahayd mid ka soo baxda xilkaa iyo waajibaadka? Sideed ku ogtahay?

## DEEQSI MA DEEGO

Xariir waxa uu ahaa nin sabool ah oo aanay xerediisa wax beerkooda la calaliyaa u soo hoyan jirin, qaalin lo'aha oo rimanayd mooyaane. Isaga, afadiisa iyo iyo seddexda carruur ah ee ay dhaleenba waxa ay ku noleeyeen saca caanihiisa. Marka uu gudhan yahayna waxa ay quudan jireen qadhaab iyo hadba wixii kale ee calafkood camankooda ku guro. Hase ahaatee, intiisaas buu iminka ku qabey; reerkana hanti u ahayd.

Waagii dambe, ayuu boqorkii dalka xukumi jirey iyo kaaliyihiisii socdaal ku soo mareen miyiga si ay dadka baadiyaha deggan u soo indhadheeyaan. Iyaba waa yaabe! ammintu waxa ay ahayd fiid dambeed markii ay Boqorkii iyo kaaliyihii jeeskii Xariir duddadiisa isa soo taageen ee «Maxaa lagu soo hoyday»? Muska ka soo laliyeen! «Nabad e idinku maxaad ogeydeen?» Xariir baa ugu celiyey, isaga oo martida u soo hoyatey ee aanu wax sooryo ah u tebin karayn aad uga uurxumaa. Xiskiisa waxa taabanayey dareen aad u qoto fogaa oo laba af lahaa!! Mid gacantiisa madhan u doodayey, iyo mid deeqsinimada u dhalashada ahayd u doonyo-qaad ahaa.

Xariir waxa uu aad iyo aad u tixgelinayey dubaaqiisana raad weyn ku lahayd, diifta, iyo baahida hayn karta marti ammintan oo kale socota! Inkasta oo aanu hanti buuran oo uu wax ka bixiyo weligiiba yeelan haddana xariir lagu yiqiin nin dadka dhibaataysan u naxa inuu u gargaarana naftiisa u hura.

Degdeg buu markiiba ood rogadii dhinac uga leexiyey oo labadii uga hortegey, isla cagadiiba waxa uu inta dab shiday ardaaga ku kala bixiyey gogol, dermo darfooley ah, harag weylaalis iyo labo barkimo, ka koobnayd.

Soo dhaweyntii martida markii uu dhammeeyey ayuu afadiisii u yeedhay oo ku yidhi, «Xalan; arrintu caawa waxa ay joogtaa, labada daran lagu doorransii», waa ceeb iyo caydh, ee mid inoo door. Xil weyn baa ina kor saaran oo marti baa joogta, xoolana inoo sacaa aynu carruurta u dhiijinno. Bal taliyoo maxaynnu martida ku sooreynaa.» Run ahaantii xariir martida lama sheekeysan mana uu wareysan ee qabanqaabadii sooryada ayuun buu markiiba ku dhaqaaqay. «Xarii» bay ugu jawaabtay Xalan, «Ilaahay xog ma mooga, martiduna way aragtaa inaan xerada xoola kala inoogu jirin, ee sara kac oo gawrac, ilaa martida inoo hoyatey kama seexan karnee».

Hilibkii markii wax laga cunay ayaa boqorkii Xariir Su'aal u soo jeediyey oo yidhi, «xerada waa ragnaaye, wax xoolo ah oo kale ma leedahay»?

«Tii Ilaahay way buuxdaa, xeradayse wax xoola sheegtaa oo kale uma soo hoydaan, meelna uguma maqna» ayuu Xariir ku jawaabay.

«Haddaba maxaad hanti kale ah oo aad leedahay? kaaliyihii boqorkaa Xariir weydiiyey, «Waxan leeyahay, muruqayga maankayga iyo kalsooni aan eebbahay ka qabo.» Ayuu ku jawaabay Xariir. Labadii yaab iyo fajac baa Ilaahay u keenay. Boqorkiibaana su'aal kale Xariir u jeediyey, oo yidhi, «Oo annaga miyaad na garaneysey, maxaad sacaaga keli ah isaga qashay..? »Xariir baa intuu labadii nin hadba mid jallecay isaga oo ilka caddaynayey yidhi, «Oo maxaad iigu soo hoyateen haddii inaan sacayga iska qalo aydaan doonayn.

Anigu waxa aan keli ah oo idin garanayaa inaad marti ii soohayatay tihiin, waxaana ila foolxumo noqotay inaad aniga oo dheregsan gaaji ila agjiiftaan».

«Oo caawa haddad sacii qudh ahaa noo qashay maxaad berri carrurta u lisi doontaa»? Kaaliyihii baa weydiiyey Xariir oo aftahamo Ilaahay ku mannaystay baa degdeg u jawaabay oo yidhi «Soomaalidu hore ugu maahmaahday:—

**«Waad dad yartahay dagaal looguma daayo**
**Waad duunyo yartahay deeq looma daayo**
**Waad baahan tahayna bakhtiga looma cuno**

Haddaba, anigu wax kale oo aan idin ku sooro ma aan hayn; xaaskayguna kollaba gaajo u dhimanmaayo kol aan u qadhaabana». Labadii nin baa dhafoorrada qabsaday. Habeenkii markii la baryey ayuu suldaankii Xariir u yeedhay oo ku yidhi, «Ninyohow aad baad u wanaagsan tahay, waanannu kuu mahad-naqaynaa, annagana waxa nala gudboon, inaannu kuu abaal gudno. Sidaas darteedna waxa aan kaa codsanaynaa in aad Jimacaha dhow salaadda Jimcaha dabadeed masaajidka agtiisa iigu timaaddo». «Walaal inaan abaalgud ka helo kuuma marti soorin» buu Xariir boqorkii ugu jawaabay, «Haddaad adigu iskaa wax iila damacday waan isaga baahanahay; waxaanse jeclahay inaan ku ogeysiiyo in aan kollaba anigu wax kuu soo doonayn».

Boqorkii baa mar labaad hadlkii qaatay oo yidhi: «Arrintu sidaa mooddey ma aha. Sicii magdhebi meynno, ee waan kaa hayn roon nahay: in aannu wax ku tarno ayaan doonaynaa, sidaad adba dadka wax u tarto. MIyaanad maqlin «kuugu dhiijiyaa loogu dhiijiyaa, kuu cantuujaana waa la cantuujaa». Sidaa awgeed, waa inaad JImacaha soo socda masaajidka timaaddaa« goortuu arkay in Boqorkii yeedha ku adkaysanayo ayuu Xariir ogolaaday.

Muddadii JImacaha iyo subaxdaas oo isniin ahayd u dhexaysey, waxa uu Xariir carruurtiisii ka afhayey maydhax, rogob iyo midho u caynta uu ka soo guri jirey.

Aroortii Jimacaha markii waagu dillaacay ayey Xalan odaygeedii toosisey oo ku tidhi «Ee bal kac oo nimankii kuu yeedhay carrurta wax uga doon.» «Xalan, hoo baniaadan habeen xiraadkii kama badato. Sidaas waxa aan go'aan ku gaadhay in aan hawl ku dhaqaaqo halkii aan gacan hoorsi uga dhaqaaqi lahaa», Xariir baa sidaa ugu jawaabay Xalan.

Kolkiiba Xariir magaaladii buu u ambabaxay isaga oo xidhmo xaabo ah degta ku sitey. Galabtiina waxa uu la soo dheelmaday kiish dhowr guntood oo miis kala duwan ahaa u qaybsanaa. Salaaddii subax markii uu foodda ka qaaday, nin iyo geedna la kala gartay, ayuu yaambo la booday oo meel guriga duleedkiisa ahayd oo carrasan Eebbe u doortay, qodis ugu dhaqaaqay. Markii uu carrageddiskii iyo geedqaadkiiba dhammeeyey ayuu cantoobo masaggo ahayd oo safarkii yaraa uga hadhay soo qaaday oo shini waareeyey.

Calaf duug ma yeeshee, dhowr casho ka dib baa Eebbe cirka iyo dhulka isku salaaxay oo ay xareeddu meel kastaba mulacyeysey. Sannado kooban gudahood buu ninkii xariir gurigiisii ciidan iyo calafba cimidh noqday; isaguna hawshii uu qabtay halaabadeedii ku raaxaystay.

Beri Dambe ayuu maalin maalmaha ka mid ah boqorkii socdaal u soo baxay oo beeshii Xariir ku dhex noolaa soo maray. Guriga Xariir markii uu ku beegnaa ayuu fiiro gaar ahayd siiyey si uu u ogaado waxa ninkii saciisii qur ahaa u qalay qayb to-dhaban yahay.

Markii boqorkii barwaaqadii iyo bashbashtii reer Xariir ku jirey arkay ayuu waxa uu laabta ku hayey halmaamay oo yidhi, «Waar Xariir, xaggee baad waxan oo xoola ah dabaday ka heshay; maxaadse iigu iman weydey haddaan kuu yeedhay?» «Suldaan miyaanad maqal maahmaahda: «Nimaan hawl gelin, haakah ma yidhaahdo». Yaa Xariir boqorkii ugu celiyey «Alley lehe waan maqlay maantana waa arkay. Adigana, maanta marka laga bilaabo waxa aan kuu xilsaaray in aad noqoto la taliyahayga xagga beeraha.»

**B. Sharrax Erayadan:**

**1. Dudda guriga: duleedka**
**2. Tahli karyn: awoodeen**
**3. Doonyaqaad: damiin, qareen.**
**4. Dubaaqiisa: xiskiisa.**
**5. Oodrogo: Buuxsinka kadinka, jiitinta.**
**6. cagidiiba:qacdiiba, markiiba**
**7. Dhiijiyo: liso.**
**8. Mannaystay: siiyey.**
**9. Afhayn: quudin.**
**10. Caynta: kaynata**
**11. Dheelmaday: carraabay**
**12. Cimidh: buux.**

**T. Weydiimo:**

1. Muxuu Xariir xoolo lahaa?
2. Maxay ahaayeen nimanka u soo hoydey maxaasay u socdeen?
3. Maxaad ka garatay aqoonta Xalan?
4. Maxaa looga jeedaa ceeb iyo caydh!
5. Muxuu Xariir u diiday in uu boqorka abaalgud u doonto? Ka faallood sida uu Xariir arrintaa ka yeelay.

**J. Kasmo iyo eray kordhis.**

Sheekada akhri; dabadeed ka soo saar erayo ama weedho kuwa soo socda la macno ah:

1. Caydh ama xoolo yari.
2. Wixii loo qoray ama Ilaahay siiyey.
3. Bariidada ama salaanta habeenkii.
4. Xoolo badan.
5. Hadal yaqaan.
6. Gashi-bixin ama deyn-bixin.
7. Waan kaa xoolo badnahay.
8. Casho ama cunno habeen.
9. Baryo ama tuugsi.
10. Tukaday.
11. Roob hortii abuurka la rido.

**X. Maxaa looga jeedaa erayada iyo maahmaaha soo socda?**

1. Halaabad
2. Cirka iyo dhulka isku salaaxay.
3. Beerkooda la caliyo.
4. Labada daran lagu doorransii.
5. Dhafoorraday qabsadeen.
6. Calaf duug ma yeesho.
7. Waad baahan tahay baqti looma qasho.

## WAA XAQ

Waxa uu ku barbaaray miyiya, weligiina magaalo subax kama soo toosin. Xoolaha dhaqaalahooda ayuu aad u yiqiin. Nolosha miyigana meel fog buu ka gaadhey. Magaalada haddii wax looga baahdo, aabihii baa reerka u safri jirey.

Illayn ninkii aan dhimman waay dhibaato waa u hurti la'aane, maalintii dambe ayuu aabihii allaystay, isagana irrido hawleed oo hor lihi ku furmeen. Markii Jiilaal dhaartay, caanona jeesteen ayuu reerki u soo safray isaga oo neefaf ari ah waday. Jidkii haddii ay soo mareen ayaa baabuurkii ay fuushanaayeen mar qudha ah uu jirjircadka iska rogey. Intii hadhuubkood buuxsamay way geeriyootey. Faaraxse dhaawax uu la miyir doorsamay oo aan nabar muuqda lahayn ayaa gaadhay. Markiiba waxa goobtii guul darradu ka dhacday u soo gurmaday dadkii beeraha ka dhawaa iyo baabuurrada waddada marayey. Faarax iyo dhaawicii kaleba waxa degdeg loogu daadgureeyey isbitaalkii ugu dhowaa.

Laba maalmood kaddib ayuu miyirsaday oo wax kala gartay. Markiiba waxa ay ishiisu ku dhacday waxyaalo aanu weligii il saarin. Sariiro, dhar cad lagu dedey, dhalooyin sariiraha qaarkood ka soo kor-deldelaa, iyo dad sariirahaas ku dul jiifey. Isaga oo aad u yaabban, ayuu ninkii sariirta ku jiifay oo ma'naxe la odhan jirey waraystay oo yidhi, "Waar bal meesha iiga warran?" "Meeshani waa aakhiro!" ayuu ugu jawaabay Ma'naxe "waa xaq!" Faarax baa isdhiibey, isaga oo aad u naxsan. Cabbaar markii uu aamusnaa ayaa nin dhakhtar ah oo cad iyo gabadh kaaliso ahayd, oo iyaduna dhar cad xirnayd, qolkii Faarax jiifay soo galeen, oo dadkii safkii Faarax ka soo horjeeday yiillay, tooyasho iyo wax-u-qabad ku bilaabeen. Waxa kale oo uu arkay gabadh iyaduna dhar cad qabta oo dadka cunto u qaybinaysay.

Illayn la yaab ma lehee intuu is haysan kari waayey buu Ma'naxe la hadlay oo uu yidhi "Waar kuwanina maxay ahaayeen." "Waa mallaai'igtii qof walba wuxuu kasbaday siineysey, Ma'naxaa miskiinkii ka sii dhalaaliyey. "Waa xaq!" ayuu Faarax mar labaad yidhi. Waxa aanad aqoon u lahayniba waa belaayo,adduunse waxa uu haddana arkay dad qolka qalliinka la geynayo oo rarab ama dhooliyaal lagu walwaalayey. Markaas inta uu jiifkii sidii wax boodaya ka hinqaday, ayuu Ma'naxe ku yidhi, "Xaggee baa loo wadaa?". "Waa qoladii la xisaabay oo cadaabta iyo jannada ayaa loo kala dirayaa." "Waa xaq!" buu misoole sidiisii ku celiyey.

Naxdin iyo argagax inta uu Ilaahay isugu keenay Faarax ayuu daaqad wejigiisa ku beegnay eegay, waxa uu arkay Awr afar ahayd oo isbitaalka xaabo u sidday. Ma'naxe oo markaas in uu kaco oo uu soo fooldhaqdo u kaankaansanayey ayuu su'aal kale ku celiyey oo yidhi; "Waar awrtan aakhiro joogtana maxay ahayd?" "Waxa ay sidaan xaabadii cadaabta lagi shidi lahaa", ayuu ugu jawaabay ma'naxe. Isna geddiisii "Waa xaq!"

Muddo yar ka dib ayey dhakhtarkii iyo kaalisadii sariirtii Faarax soo gaadheen oo intay kaadhkiisii qaateen, daawooyin ugu qoreen iyaga oo aan afka u kala qaadin!. Markii ay ka tagen ayuu Ma'naxe weydiiyey oo yidhi "Waar maxay aniga ii qoreen?" "Cadaabtii!!" Ma'naxaa degdeg ugu jawaabey.

Hal cabaar ah markii uu fikeray ayuu Faarax, intuu xanuunkii hayey iska ilaaway, degdeg u kacay, oo irridda ka booday. Deetana orod buu isqaaday isaga oo doonayey inuu cadaabta cago kaga baxsado. Shaqaalihii isbitaalku markay addin ku gaari waayeen ayaa baabuur Boolisku lahaa lagu eryey oo sariirtii lagu soo celiyey isaga oo lahaa "Haddii aan ifkii camal fasho, malaa'igta cadaabtuna cago iguma gaadheen." Faarax dadku waxay u qabeen in ay jugtii gaadhey wax u dhintay, cidina ma aanay waraysan.

I. Erayo Cusub:

1. Barbaaray; koray
2. Allaystay: koray
3. Dhabartay: caddaatay, ballaadhay
4. Miiraabay: wax kala gartay.
5. Tooyasho: waraysi

2. Ka dhig inay Ma'naxe miyi talo ku qabsatay Faaraxna la joogo. Ka sheekee waxyaalaha Ma'naxe looga maadsan lahaa.

## BIYUHU WAA HALBOWLAHA NOLOSHA

*CURIS:*

Waxay ahayd maalin jimce, markii ay Kooxda Cayaartoyda ee Gobolka Togdheer, inay Magaala madaxda u ambabaxaan isu diyaariyeen. Cayaartoydu waxa ay ka koobnaayeen dad dhinaca da'da, dala'qoon iyo waaya-aragnimada akaakaw ahaa. Arday aan weligood miyi arag iyo kuwo laba-gardaaq ahaa oo miyi iyo magaal-oba yiqiin.

Wax wadaha baabuurka iyo Guddiga Maamulka canaan, hiif iyo hadallo dhiif kulul oo inna dhaqaajiya ku saabsanaa loogu ridoba, baabuurkii baa guuxay, dabadeedna or, sacab iyo heeso isku dhex daadsanaa baa lagu dhaqaaqay. Ciyaartoyda waxa mid kastaba calooshiisa miranayey dareenno kala jaad jaad ah — cayaarta yaa badin doona, maxaad adigu guul soo hayin doontaa? Goormaa Xamar la gaadhi doonaa? — Dad badan waxaa xiise weyn u ahaa aragga magaalada Xamar oo aanay hore u tegin.

Xilligu waxa uu ahaa kaliil dhahartay oo dhulku oomas abaar la engegey. Qorraxdu barqo gaabba fallaaro dhamac dab ka kulul bay dhulka oogadiisa ku ganeysey. Ciddii dhabarka u dhigta sidii bureed camal bay markii u dhalaalinaysey. Dhirtu caleen way ka xuubsiibatey, geed cawsna wuu gadmay, xamashna isaga hadalkiiba daah! bannaanka buurta, carriska, iyo dooxada midkoodna calaamad kuwa kale lagaga sooco, dhinaca geedqabatinka iyo iwaadka toona kama lahayn waxa keli ah ee lagu kala garayna waxa uu ahaa abuurka ama dhismaha juqraafiga. Waddada hareeraheeda waxa uu baabuurku karaar ku dhaafay dhaan habeenno soo dhaxay, oo dad dhafoorradooda baahiyi goddeyna luudinayeen. Waxa kale oo iyaguna waddada hayey geelal dhalandhool ahaa, aanad gurinka, galoofka iyo ormaadka kala garan karayn, sababta oo ahayd iyada oo taag darro awgeed daaw ku sii wada dheeraaday. Markii kadin geel ah la weedaartaba, waxay isku dhacaysey korayo beerqaansoobey oo waddada hareeraheeda hirbactamayey. Waa camal geel jire, ee ilmo carruur ah oo toban jir wax buuran kor u dhaafin amase gaadhinba ayey gudinta, hadhuubka iyo maqaarka, inta degta loo saaro saddex ilaa afar caanamaal socod u yeelladaan, Kuwaas oo ay harraad iyo macluul u sii dheerayd baa waddada badhtamaheeda intay marka qaarkood is taagaan, baabuurka gacanta u hoorsanayey oo «Biyooy» «waraabiyaay» ku booyayey. Hadaqlaha adhiga hadalkii dhaaf! lo'ina waa horeba way roqatay!.

Alla dhulku foolxumaa oo indhaha u daranaa, bal bagcadda Ilaahay carro edeg qayb inooga siiyey eega. Fu'aad oo markiisii hore cadan ku dhashay kaddibna aan habeen magaalo ka bixin baa yidhi: «indhagubaa la yiraahdaa ee indhaha qarso oo dhulka ha eegin». Wiil saaxiibkii ahaa baa isaga oo badawsanayey Fu'aad ku yidhi: «Oo maan muraayadahayga ka gashado» Fu'aad baa dooddii ku xidhay.

Saddex toddobaad kaddib bay kooxdii xamar ka soo noqotay iyaga oo jidkii dib u soo qaadayey. Waxa isla dadkii, duunyadii iyo dhulkii a shalay sii mareen, hase ahaatee, wax kastaaba weji cusub bay markan yeesheen: Xareed baa gal iyo gelgelinba galac leh, dhirtuna caleen iyo midho weli curdan ahaa bay huwatay. Adhigii shalay waddada dhinacyadeeda wadhnaa oo durduro iyo garmaamuu geedihii kaga jeestay. Geelii Dorraad dhalandhoolka ahaa, xared baa dhinac walba ka xigta, haddana ma dhuganayn! Koreyadii kaftan iyo legdin bay ku heellan yihiin. Dhaankii heeryadii baa laga rogey, haamihii biyaha lagu dhaamin jireyna durba ciir baa laga calleeyey. «Waar Fu'aad muraayaddii ma gashan tahay? saaxiibkii baa afka ingiriis ku wediiyey. «Maya ee dhulkaan daawanayaa» Fu'aad baa ku jawaabay. «malaha aad buu maanta u qurux badan yahay?» «Haa oo xitaa dhagxaatuna way qurux badan tahay». «Haddaba ogow inay noloshu, dhinac kastaba oo loo eegaba, biyaha ku

xidhan tahay waana sidii Ilaahayba u sheegaye, shay kastaaba biyuhuu ku nool yahay, kunaa qurux badan yahay».

**ERAYO CUSUB:**

1. Akaakow: asaasaq: badow.
2. Laba-gar-daaq: laba dhaqan yaqaan.
3. Dhiifaa: Canaan, hadal kulul.
4. Dhaharatey: adkaatay, caddaatay, kululaatay.
6. Dhamac dab aad u shidan halas
7. Ganis: riddis, toogasho, abbaarid
8. Burcad: subag aan la shiilin.
9. Xuubsiibatay: caleentii ka dhacday ama ka dhammaatay.
10. Luudis: socod taag darro ah.
11. Dhalandhood: socod harkii ah socod labood ah maalin iyo habeen.
12. Galoof: hasha aan rimay iyo irmaan toona ahayn.
13. Kadin: geel xero keli ah wada gala ama qof wada leeyahay (boqol halaad)
14. Hirbictaan: socod taag darro, daadka oo keli ah.
15. caanamaal: habeen iyo maalin, (24 saacadood)
16. Calleyey: buuxiyey.

## SAADAASHA ROOBKA

*Curis:*

Nafleydu dhammaanteed — geed ha noqoto amase duunyo, dad, dugaag iyo xayawaanka kale kii ay doontaba ha ahaatee, waa biyo ku-nool. Haddii biyo la waayona nolol la waa! Haddii aynnu xaqiiqadaas ogaannay, waxa kale oo aynnu isweydiin karraa: xaggee waxaas oo halqi ahi biyo ku filan oo noloshooda kaafiya looga helayaa? Jawaabtu waa dhowdahay wayna dhib yartahay, — Isha keli ah ee waxaas oo nafley ah biyo ku kaafiyi kartaa waa Hogol roob oo ku hoorta. Hore ayaaba loo yidhi: «Cir Allaa, uun Alle, wada oon tira».

Roobku haddaba, sida la og yahay waxa uu da'aa xilliyo gaar ah, siiba dalka Soomaaliya, sababtu waxa ay la xidhiidhaa juqraafiga. Dadka Soomaaliyeed xoola dhaqato ha ahaato, beeralayse, ha noqdeen, waxa uu xilliga roobka ku qiyaastaa, saadaal waayo argnimo dabeecadduu bartay ku timid. Arrimaha ay odayaashii hore ka faalin jireen waxaa ka mid ah: xiddigaha, dabaysha, iyo cimilada (kulka qorraxda ama huurka). Tirada maalmaha, bilaha, ururta, dirirka iyo dayaxa ayaa ah, waxyaalaha saadaasha roobka loo cuskado. Xamliga dabaylaha jabada ay kolka ka dhacayaan iyo amminta ay dhacayaanba iyaduna cilmiga saadaasha kaalin weyn bay kaga jirtaa. Qofka Cilmiga noocaas ah yaqaan, waxa lagu magacaabaa xiddigiye aadna waa loo tixgeliyaa.

Run ahaantii dadka oo keli ah ma aha cidda xiddigisaa ama roobka saadisaa! Xoolaha meesiyaal ka mid ah baa xilli qooq; dhirta qaarkoodna way xilli magooshaa — Xayawaanka cilmiga saadaasha ugu sii xeeldheer waxa ka mid ah kuwa suura — sida diinka, raha iyo mansacagaleyda. Mansacagaleyda haddii aynnu soo qaadanno. waxa aynnu arkeynaa inay xilliga jiilaalka geed madawga (geed madawga waxa ka mida: Higlada, Qalanqalka, Qaydarka iwm) korkiisa fuusho, oo biyo gu' ku sugtaa. Geedkaas bay laan laamihiisa ka mid ah isku martaa, kamana degto ilaa naqa dambe ka curanaayo. Muddadaas oo dhan wax ma cunto ee way soontaa. Marka cirku cusbaado, ee uu xilli gu' soo dhowaado, ayey toostaa oo madaxeedii cirka u jeeday hoos u soo hoggaamisaa. «Mar haddii ay masaddii madaxa soo laalaadineysey, Hayaay Gu' waa ina hayaa!» baa la is gaadhsiiyaa.

### ERAYO CUSUB:

1. Haqli: Nafley badan oo kala duwan.
2. Kaafiya: ku fillaada
3. Hogol: roob isku mar (da'a) meelna wada hela.
4. Magoosha: maan iyo caleen aan roobku bixin saarta.
5. Sura: seexda oo aan muddo dheer toosin.
6. Hoogaamisa: foorarisa.

### LAYLIS

1) Adiga oo la kaashanaya odayaasha Degaanka iyo cilmiga sayniska, doon macnaha, iyo wax ku qabsiga erayada soo socda:—

1) Malluugaha: dirirka, fooraha, ururta ama laxaha.
2) Ka sheekee sida diinku saadaasha roobka u sameeyo.

## MURTIDA IYO MAAHMAAH

Suugaanta Soomaalidu dhowr qaybood oo kala duwan ayaa ka mid ah: Maansada, Murtida, Maahmaahda iyo Sarbeebta, ayaa ka mid ah qaybaha u waaweyn. Murtida iyo maahmaahu waxa ay door weyn ka cayaaraan habaynta hadalka hodanayntiisa doodaha, khudbadaha iyo qoraalkaba waxa loo cuskadaa murtiyo iyo maahmaaho si micnuhu u qoto dheeraado, ducda hadalkuna u xeel fogaato.

Maahmaahda iyo murtiduba waxa ay ku baxaan madal la isku haleelay, ama munaasabad arrin lagu gorfeeyey ka dibna inta carrabka lagu xafido ayaa la isu tebiyaa, oo la kala dhaxlaa.

*M U R T I D A:*

*1.* «Saadambaad garan» (Dhallin Ileeye).

Waxa loo cuskadaa qofka kugu tala diida.
Murtida waxa bixiyey nin Dhallin Ileeye la odhan jirey oo qarnigii 19aad horaantiisii noolaa. Dhallin waxa uu ahaa nin aftahamo badnaa; oo hadalka afkiisa ka soo baxaaba uu xikmad ama maad ahaa. Dhallin waxa uu kale oo ahaa nin dagaal neceb sidaas darteedna waxa lagu xaman jirey cabsasho. Dhallin murtidan waxa uu bixiyey mar ay isaga iyo saaxiibbadii duullaan inay saaraan u ballameen. Maalintii colku bixi lahaa laba casho markii ay ka hadhay, ayaa Dhallin oo faras ku jooga nin qoladii lagu duuli lahaa ka tirsani la kulmay oo isaga ka maadaysanayey uu Dhallin ku yidhi: «Dhallinow faraskaagu ma dheereeyo». «Saadambaad garan», buu Dhallin ugu jawaabay. Ninkii wuu gartay in Dhallin duullaan u jeedey, waana laga digniin helay.

2. «Adduun i khatal i qatal» (Aadan Gallaydh):

Waxa murtidan loo cuskadaa ninka intuu wax istaawiyo haddana taladiisa ku jaba.

Murtidan waxa curiyey nin Aadan gallaydh la oran jirey oo qarnigii 18aad noolaa. Aadan waxa uu ahaa nin xoolo iyo xawaadba Ilaahay ugu roonaaday Wiilashu laba iyo toban (12) bay mar ku wada gaashaan qaadeen. Geeliisuna marna intii uu noolaa kunka ma hoos marin. Aadan waxa u been sheegay inamada iyo xoolaha, wuxuuna istaawiyey kibir iyo haybad.

Waxa dhacay in wiil uu dhalay nin dilay, markii tulud (hal) magtii kaga soo hagaatay, ay la weynaatey uu ku jawaabay: «Haddii aannu hal dhiibeynno nin ma aannu dilleen». Arrintaas oo dagaal dhalisay awgeed ayaa maalintii dambe goob labadii qolo ku kulantay. Aadan nin Boos Cawar la odhan jirey oo uu beri caayey baa intuu tumaate waran la helay, «Aadan dardaaran» ku yidhi, intaannu tii labaad ku dhufan. «Adduun i khtal» baa hadal ugu dambaysey.

**3.** «Dani Waa Seeto». (Ducaale Suldaan — 1800's) .

Waxa murtida loo cuskadaa ninka kugu canaanta arrin aad ka fursan weydey inaad yeesho.

Murtida waxa yidhi nin Ducaale Suldaan la odhan jirey oo Degmada Hargeysa ku Dhashay qarnigii 18aad dhexdiisii. Ducaale waxa uu ahaa nin aad uu haybad weyn oo aan lagu dhici jirin. Waagii dambe ayuu isaga oo gedo gaadhey gabadh Dhallin yar guursaday. Maalin maalmaha ka mid ahayd ayey niman Ducaale doonayey gurigii yimaadeen oo in odayga loo toosiyo doonay.

Gabadhii intay Ducaale oo jiifa faraha cagta midig faygoodka ka gujisey ayey tidhi, «Ee maxaad amminta meesha la jiiftaa? Kac, rag baa ku dul taagane u tag». Raggii baa inay gabadhii Ducaale Suldaan haraati ku toosisey la yaabeen oo yidhi:

«sidee bay u dhacday inay ruux dumar ahi cagteeda kugu toosiso?» «Dani waa seeto» ayuu Ducaale ninmankii ugu jawaabay isaga oo u sheegayey danta isaga iyo afadiisa ka dhaxasey. Arrintaas oo kale waxa ay Garaad Xirsi Faarax Xirsi oo Wiilwaal ku magac dheeraa, markii uu gabadh sidaas oo kale cag iyo canaan hurdo kaga kicisey. Markii Garaadka niman sugayey arrintii la yaabeena, wuxuu Wiilwaal yidhi, «Ha la yaabina, labadeeda lugood dhexdooda uun bay igu ragtaye».

*4.* «Allahayow Aqoon ha nagu Cadaabin, Eexashona ha nooga Tegin».

Murtidan waxa had iyo jeer cuskada xeerbeegtida garta loo saaro, waxa ayna ku furaan go'aanka ay markaas dadka garramaya maqashiinayaan. Ciddii ugu hor dhawaaqday ama tiraabtay la garan maayo, hase ahaatee, waxa la ogsoon yahay inay nin Suldaan ama beel daajiye ahaa iyo nin kale, hal isku qabsadeen. Guddidii markii ay dacwadii dhegeysatay ayey aragtay in duqa laga gar lahaa. Isla markaas waxa ay werwer ka qabeen waxa duqa yeeli doono. Markaas ayey gartu dusha uga baxdo. Iyaga oo haddaba afeef dhiganayey ayey yidhaahdeen, «Allahayow aqoon ha nagu cadaabin Eexashona ha nooga tegin».

*5.* «Masaajid Dhagax Dhigo, Madalna Markhaati Dhigo».

Murtidan waxa loo cuskadaa markii aad waano, ama dardaaran qof uga tegeysid, ama fareysoba. Waxa kale oo loogu laabqaboojaa qof gar uu lahaa markhaatigeedii dayacay, ama afti adag ka dhiiban waayey sidaas darteedna badh cad lagu duudsiyey oo aad rabtid inuu dib u feejignaado.

Ereyga madal micnihiisu waa shirweyne la isku arkay, arrimo waaweynna lagu jeexjeexay ama la isugu muddo qaatay.

## MAAHMAAHO

Maahmaahdu guud ahaan waxa ay raacsan tahay Maansada, maxaa yeelay waxa ay Mararka qaarkood yeelataa miisaan sida gabayga u dhaca, kaas oo badanaaba xaraf fadhiista, sida, «Masaajid dhagax Dhigo, Madalna markhaati Dhigo».

Maahmaahdu wax loo cuskadaa waanada, doodda iyo lugkaabka guud ee hadalka; qoraal ha noqdo, afse ha ahaadee. Maahmaadu waxay sida murtida ku baxdaa madal la isku arkay, ama gole laga maansooday, ka dibna uurka lagu xafidaa, afkana waa la isugu tebiyaa.

1. «Seddex (hal) saddex way bishaa (qurxisaa) haddii ay ka badatose way bi'iyaan: «Badhidu haweenka way bishaa, haddii ay ka badatase way bi'isaa; Maskari geed way bishaa, haddii ay ka badatase way bi'isaa; saarna beel waa bilaa haddii uu ka batase wuu bi'iyaa».

Maahmaahdana waxa curiyey nin Soomaaliyeed oo deexda Banaadir ku dhashay, oo Xasan Geeddi Buutow la oran jirey, noolaana waqtigii uu gumaysiga Talyaanigu dhulka Soomaaliyeed Gacanta ku dhigay. Maahmaahdu waxa ay ku dhacaysey soo galaaga Talyaaniga oo uu Sheegayey inuu dhulka ku ahaa. siyaado ku badashadiisuna xumaan soo jiidayso, dadka Soomaaliyeedna, sidaas arrin u arkayey.

(1) Lugkaab: maahmaaha, murti, ama gabay hadalka lagu xoogeeyo.

(2) Maskar: geed saar dhirta isku mara sida, carmada iyo Dhiloowyahanka.

(3) Saar: nin reer, beel, la yaal, hase ahaatee aan dhalan.

**SHARRAX GUUD**

Shay kasta oo qurux, u sabab noqda , ama qaayo kale ku qotomaaba, waxa uu leeyahay qiyaas haddii uu dhaafo, qaabkiisu xumaado. Sidaas darteed, buu abwaanku inoogu sheegay inay saddexda arrimood ee kala ah: Badhida, Maskaarta iyo saarka ama beel yaalluhu, qiime weyn mid waliba halkiisa ugu leeyahay, haddii uu xad-dhaafase, xumaan u keenayo, meeshii uu markii qurxinayey, ama wanaajinayey.

**LAYLIS:**

1) Sheeg sida mid kastaba, meeshiisa u qurxiyo, marka uu xadkiisa joogo, iyo sida uu marka dambe u bilajebiyo, ama u xumeeyo.

2. «Far keli ah fool ma dhaqdo».

Maahmaahdan waxa tala ahaan uga tegey, nin talo ruug ahaa, oo yaqiinsaday in waqtigii uu god geli lahaa soo dhawaadey, sidaas darteedna doonay inuu dadkiisii la sii dardaarmo. si aanay u kala tegin ee isugu duubnaadaan.

**LAYLIS:**

1. Qor maahmaah, hal tuduc oo gabay ah, iyo laba tuduc oo hees ah, oo maahmaahda kor ku qoran la macne ah.
2. Qor saddex munaasabadood oo kala duwan oo maahmaadan loo cuskado.

(1) Fool-weyji: fooldhaqasho; wejimaris.
(2) Godgelis: geeri, dhimasho.

*3.* «Muruqa laba suulle ninba si la ah».

Maahmaahdan waxa loo cuskadaa, qof aad isu xilqaantay, oo aad wixii awooddu ahayd, talo, toogga qumis, iyo muquuno, midkastaba ha ahaatee, aanad waxba kala hadhin hase yeeshee, kugu qawedey ama quudhsadayba. Maahmaahdu waxa ay baxday markii uu nin socdaal ahaa waqti adag guri yimid; guriga oo aan waxba oollin awgeed, ayaa ninkii socotada ahaa muruq duban oo laga yaabo in reerkuba keligii haystay, kana qatanaa la siiyey. Ninkiina mar la waraystsy ama la kaftamay cabasho ahaan sheegtay in la qadiyey oo aan muruq engegan mooyaane wax kale la siin.

Muruqa laba suulle, waxa uu ku yaal meel halis ah oo haddii la gooyo aanu neefka ka dhaqaaqi karin. Hilib ahaanna waa cad lagu adkaysan karo, lagana dhergi karo.
Ninkii cadka bixiyey isaga oo arrimahaas tix gelinayey buu yidhi; «Muruqa laba suulle, ninba si la ha».

**LAYLIS:**

1. Xaggee buu kaga yaal muruqa laba suulle? Weydii dadka Xoolaha aqoonta u leh.
2. Isku dayey inaad keento maahmaah gabay, ama hees maahmaahdan udhiganta.
3. Maahmaah nin aad isu xilqaantay oo abaal ka dhacay.

*4.* «Canaan ka yaab reer ma doojo».

Maahmaahdan waxa cuskada ama loo cuskadaa qofka talo ama tamar ku habboon loo soo bandhigay.Hase yeeshee, aan waxa madax bannaani ah u lahayn arrintaas uu ku kaco. Maxaa yeelay cid talada uga weyn baa jirta oo aanu dhaafi karin.

Maahmaahdani waxa ay baxday markii wiil aabihii reerka kaga tegy, beeshii oo doog u hayaantay reerkii ka soo reebay, isaga oo ka cabsaday inuu aabbihiis geeddiga ku canaanto. Markii odaygii yimid ee yidhi; «Waar magacinba'e, maxaad reerka u doog raacin weydey ee abaarta ugu reebtay»? ayuu inankii jawaab degdeg ah aabbihii siiyey oo yidhi, «Aabbo, canaan ka yaab reer ma doojiyo.»

**LAYLIS:**

1. Maxaad u malaynaysaa inaad yeeli haddii aad meesha inankaas joogtid?
2. Odaygii wax qalad ah arrinta ma ku leeyahay? Waayo?

5. «Maroodigu takarta ku joogta ma arko ee tan kale ku joogtuu arkaa».

Maahmaahdan waxa loo cuskadaa qofka aan qaladaadkiisa eegin, ee dadka kale had iyo jeer u fiirsada!

Waxa iska jirta in Baniaadamku had iyo goor qaladaad ku kaco. Qaladaadkaas oo laga yaabo inay qofka ku kacaya qudhiisa waxyeelo u geystaan. Waxa isla markaas jirta inaan dadka qaarkood gefkooda u fiirsan ee ay dadka kale gefkooda raacraacaan. Taas oo laga yaabo inay faa'iidooyin badan ka dheefi lahaayeen haddii ay dadka kale iska dhaafaan oo iyagu isa saxaan. Waxaaba suurowda inuu arday, isaguba casharradiisa dayacaa mid akle isla ceebtaas lafteeda ku xanakaadiyo Maxa ay jawaabtu noqonaysaa haddii ay labadaas arday inay is ceebafahmaan damceen?

Waxa jirta murti odhanaysa, «Cilmiga ugu fiican ee qof bartaa, waa naftiisa». Maahmaahdani waxa ay ina faraysaa in aynnu horta ceebaheenna saxno, dabadeedna dad kale toosinno.

## RIWAAYAD: DAGAALKII BEDER

*Biyihii Ceelka Beder:*

Riwaayaddu waxa ay ku saabsan tahay dagalkii u horreeyey ee dhexmaray Muslimiinta iyo Gaaladii Reer Qureesheed. waxa uu ka dhacay ceel Beder la yidhaahdo oo maka iyo Madiina dhexdooda ku yaalla.

*Shakhsiyaadka Riwaayadda:*

Maxamed: (Nebi maxamed Nabadgelyo korkiisa ha ahaato)

Abuubakar:
Abuusufyaan
Nin Adhijir ah
Al-Xabaab Bin Al-Mundir
Cumar
Sacad
Sawaad Bin Qusayna
Cali
Abuujahal
Umayta Binu khalaf
Cumar
Cutba Binu Rabiica
Umaya
Juhayn
Shaybata
Allmayala
Nin fardafuul ah
Aswed
Xamsa
Ibnu Xamaam
Abuu Xudayfa
Cabdiraxmaan
Bofal
Mucawad

## RIWAAYAD: DAGAALKII BEDER

*Biyihii Ceelka Beder:*

Riwaayaddu waxa ay ku saabsan tahay dagalkii u horreeyey ee dhexmaray Muslimiinta iyo Gaaladii Reer Qureesheed. waxa uu ka dhacay ceel Beder la yidhaahdo oo maka iyo Madiina dhexdooda ku yaalla.

*Shakhsiyaadka Riwaayadda:*

Maxamed: (Nebi maxamed Nabadgelyo korkiisa ha ahaato)

Abuubakar:
Abuusufyaan
Nin Adhijir ah
Al-Xabaab Bin Al-Mundir
Cumar
Sacad
Sawaad Bin Qusayna
Cali
Abuujahal
Umayta Binu khalaf
Cumar
Cutba Binu Rabiica
Umaya
Juhayn
Shaybata
Allmayala
Nin fardafuul ah
Aswed
Xamsa
Ibnu Xamaam
Abuu Xudayfa
Cabdiraxmaan
Bofal
Mucawad

# DAGAALKII BEDER

*Aragtida I.*

Abuusufyaan iyo nin adhijir ah oo Ceelkii Beder jooga: Abuusufyaan:— Waar waxan ku weydiiyey wax cid ah meelahan maku dareentay?

Adhijirkii:— Seddex nin baa taaggaa Awr tu'isay dabadeed laba wiil oo biyo aroor ahaa baa awrtii kaxaystay. Intaa mooyaane, cid kale ma arag.

Abuusufyaan:— Halkay awrta tu'iyeen i tus?
Adhijirkii:— (Isaga oo farta ku fiiqaya meel dooxadii ceelku ku yaalley ka mid ah) meeshaasay warta tu'yeen.
Abuusufyaan:— (Halkii buu tagayaa oo uu ku foorarsanayaa deeto waxa uu qaadayaa saalo geel oo uu burburinayaa. waxa aannu ku arkayaa laf timireed). Kollay neefkaas Yatrib buu ka soo daaqay.

Adhijirkii:— Ma waxa aad ku aragtay laf timireedii Yatrib?
Abuusufyaan:— (Sidii oo uu isagu isla hadlayo) Laate iyo Cusaan (laba sanam oo ay caabudu jireen) ku dhaartee waa ilaaladii Maxamed. (Safarkiisii buu degdeg ugu noqonayaa. Markiibana horey ka soconayaan iyaga oo ka baydhaya waddadii la yaqaanay. Abuusufyaanna safarka madax ka yahay). Adhijirkii:— (oo isla hadlaya): Tolow waa maxay ninkan safarkii uu watay, ka duway waddadii la marayey. (wuu iska tegayaa).
*Aragtida II.*

Nebi maxamed iyo Qoladiisii baa soo gelaya.
Maxamed:— Halkan baynnu degeynaa. (Xabaad Bin Al-Mundir baa Nebiga ku soo cararayaa).

Xabaab:— Ma halkan baynnu degeynaa.
Maxamed:— Ha! Halkan baynnu degeynaa?
Xabaab:— Rasuul Allow: Halkan degiddeeda ma ilaahay baa inagu amray mise waa tab dagaal oo iskeen tustay?
Maxamed:— Maya ee waa tab dagaal oo iskeen tustay?
Xabaab:— Rasuul Allow, Halkani rabadin la dego ma aha ee dadka wad ilaa aynu biyaha cadowga ka hantino. Aniga ayaa ceelkan cilmi u leh oo aad u aqaan. Waxaana jira laas biyo macaan oo togga badhtankiisa ku yaalla. Laaskaas ayeynnu qodanaynaa. Biyaha oo dhan baa inoo soo maaxanaya. Dabadeed darbaynnu samaysanaynaa si aynnu uga cabno, iyaguna u oomaan. Hadday isasoo qadaan waa aynnu kula dagaallamaynaa oo gaashaanka ayeynnu u dhigaynnaa.

Maxamed:— Ra'yigii waa haysaa!!
Xabaab:— (oo dadkii u tilmaamaya laaskii). Waa halkaa laaska afkiisa ee inna dejiya, (Maxamed iyo intii la socotay baa degaysa).
Cumar:— (Isaga oo Xabaab la hadlaya) Ragga qaar kaxayso oo inoo dhis darka (Xabaab baa kaxaynaya raggii la shaqayn lahaa).
Abuukar:— (Isaga oo Cumar la hadlaya). Waxa habboon in aynnu ragga saf u joojinnaa.

(Sacad baa raggii kaxaysanaya oo waabbay dhisayaan). Sacad:— Nebi Allow, Miyaanay habbonayn in aannu waab kuu dhisno, si aad halkaa xarun aad dagaalaka ka maamusho uga dhigto? Annaguna aannu jihaadka gallo? Haddii aynnu guulaysanno waa sidii la rabay. Haddii nala jebshana aad faraskaaga dib u fuusho oo aad Madiino ku noqoto.

Maxamed:— Khayr Alle ha kugu abaalmariyo.
Abuubakar:— (Isaga oo Sacad la hadlaya) koox ragga ka mid ah kaxayso oo waab dhisa.

(Sacad baa raggii kaxaysanaya oo waabbay dhisayaan).
Maxamed:— Saf saf isu taaga (raggii buu safsaf u joojinayaa).
Abuubakar:— (Raggii ku leh) sameeya sida Rasuulku idinku amray.

Maxamed:— (ul yar gacanta ku haysta oo safka ku hagaajinaya): Aduu hore u soo joogso.
Mid ragga ka mid ah: aniga?
Maxamed Haa! (nin kale) Adna dib u joogso.
Sawaad Bin Qasyah:— (Isaga oo Safkii hore uga soo yar baxay) Rasuul Allow!
Maxamed:— (oo ushii sawaad caloosha kaga riixaya) haye, Sawaad!
Sawaad:— Rasuul Allow, waad i xanuujisay. Ilaahayna wuxuu kugu amray xaq iyo cadaalad.

Maxamed:— sinma, sinma.
Sawaad:— Adigu shaadh baa gashan tahay aniguse waan feedho qaawanahay (Maxamed baa shaadhkii siibaya. Sawaad intuu isku maro ayuu caloosha ka dhunkanaya).
Maxamed:— Sawaad maxaa kugu kallifay inaad sidaa yeesho?.
Sawaad:— Rasuul Allow, waad aragtaa waxa inagu soo foolle; waxa aanna jeclaystay in kulankeenna ugu dambeeya jidhkaaga iyo kayga oo is taabtaan.
Maxamed:— (Isaga oo ilkacaddaynaya) Khayr Allaha kugu abaal mariyo.
Al-Xabaab:— (Isaga oo ka soo noqday dhismihii darka). Darkii waannu soo dhisnay wadaantiina waannu ku soo ridnay,Wallahi baan ku dhaartay in ninka cadowga ah ee ka cab isyidhaa aan ku dul dilo.
CAli:— (Isaga qaylinaya) Taaggaa ciidda ah eega! Alla! ma arkaysaan colkii baa inna soo galay.
Abuukar:— (Isaga oo xaggii colka eegaya). Haa! Taaggaasay ka soo dhacayaan, oo xagga togga ayey u soo socdaan.
Maxamed:— (Isaga oo samada eegaya). Allahayow waataa Qorayshi, iyada oo kibir la soo duushay. Rasuulkaagiina beenaynaysa Allahayow guushaad noogu ballanqaaday na sii; oo iyana dabadooda ka jeedi.

*Aragtida III.*

Reer Qoraysh oo taaggii bacaadka ahaa ka soo muuqanaya. Xagga toggana isha u soo lilinaya.

Abuujahal:— waxa uu arkayaa Maxamed iyo colkiisii Waa kuwaa Maxamed iyo colkiisii.

Umayata Binu khalaf:— (Isaga oo xagga Cumayr Bin Wahab eegaya). Cumarow, war bal Ciidanka Maxamed si fiican ma u argtaa; bal inoo tiri.
Cumar:— (Isaga oo xagii Muslimiinta indhaha u lalinaya). Waxa aan u malaynayaa ilaa saddex boqol oo nin. Bal i sii suga aan soo hubiyee (xaggii togga ayuu u sii gaangaanbiyayaa).
Cutba Bin Rabiica:— Ma maqashaan waxa uu sheegay juheen Bin Cabdul Mudalib?
Umaya:— Wuxu yidhi?
Cutbah:— Wuu riyooday
Abuujahal:— Wuu riyooday!
Cutbah:— (Isaga oo u yeedhay[illegible] [illegible]now! kaalay bal nooga warran waxaad ku riyootay.

Juhayn:— (baa imaanaya): waxa aan riyo ku arkay nin faras ku jooga; awrna wata oo inoo yimid. Waxa uu yidhi, «waxa la dilay Cutba Bin Rabiicah, Shaybah Bin Rabiicah, Abuu-Al-Xakam Bin Hishaam iyo Umayah Bin Khalaf» Markii uu intaa yidhi ayuu awrkii u watay dhuunta ku dhuftay; dabadeed awrkii oo dhiiggu hawda hayo ayuu xeradeennii ku sii daayey ilaa uu dhiiggii ku wada firdhiyey.

Abuujahal:— Kanna waa Nebi kale oo reer Cabdi Al-Mudalib ka soo baxay!

JUhayn:— Allaa igu og, anigu waxa aan arkay ayuun baan sheegay.

Abuujahal:— Ninka la dilo maanta ayaad arki doontaa kolka rag kulmo. (Cumayr oo soo noqonaya).

Umayta:— Cumarow, bal noo warran waxaad soo aragtay.

Cumayr:— Qurayshay waxan arkay balaayo wadkoodii xambaarsan. Waa niman aan gaashaamo sidan, wax kale oo ay ku gabbadaanna aan haysan — waxa aanu seef-ahooda ahayn. Nimanku way cafuufsan yihiin oo ma hadlayaane sida maska ayey miliqsanayaan. Walaahay baan ku dhaartee in aan mid ka mid ah la dili karayn iyaga oo mid innaga galaafta mooyaane. Haddaba hadday inta tiradoodu tahay in le'eg innaga dilan maxaynnu faa'iideysannay?

Bal xaalkaa ka taliya.

Shaybah:— (oo marka qoladii u soo dhawaaday). War baa ka yimid Abuusufyaan. Waxaana la sheegay in uu safarkii jidkii ka duway oo nabadgelyo ku tagay reerihii.

Umayah:— Oo ma cid buu soo diray?

Shaybah:— (oo tilmaamaya fardafuul dabataagnaa). Haayoo, waa kan ninkuu soo diray?

Farsafuulkii:— (oo hore u soo joosanaya). Abuusufyaan ha ii kiin soo diray. Waxa aanu idin soo yiri, waxa aad u soo baxdeen in aad nabadgelisaan safarkiinna, dadkiinna iyo xoolihiinna. Haddaba, way soo nabadgaleene, iska soo noqda.

Abuujahal:— Noqda'aa laataan ku dhaarte'e in aynnaan noqonayn, ilaa aynu Beder soo celinno, oo aynu Ducada ku dul Gawracno, dhuuniga ku cunno, Khamriga ku cabno; gabadhuna noogu dul Ciyaaraan; Carabina maqasho halkaynnu maraynno, oo waligeen sidaa la inooga baqo.

Umayah:— Laata iyo Cusaan ku dhaartee in aynnaan noqonayn ilaa aynnu Maxamed iyo colkiisa inaga oo xadhko ku hoggaaminayana keenno, ee socda.

Cumayr:— (Isaga oo xaggii Maxamed iyo colkiisa eegaya) Xaggaydin tegi? Maxamed iyo qoladiisii biyihii durdurka dar bay u dhisteen; waanay isku xeereen oo inay difaacaan bay gaashaanka u daruurteen. Biyo kalena ma jiraan.

Abuujahal:— Waa in aynnu weerarnaa.

Cumayr:— Laataan ku dhaartee, haddaynu weerar jac ku siinno, waxayna fallaadh innagu gumaadayn. (waxa boodaya nin la yirdhaahdo Al-aswad Al-Makhsuum) .

Al-Makhsuum:— (isaga oo qaylinaya) Ballan waxaan laata ugu qaaday inaan darkaa ay dhisteen ka cabbaa! oo aan dumiyaa ama la igu dilaa.

(Halkii buu baba' odhanayaa ilaa darkii togga badhtankiisa ahaa ee ay Muslimiintu sameysteen. Xamsa Bin Cabdul Mudalib oo safka Muslimiinta ku jiray baa arkaya oo ka hor imaanaya).

Xamsa:— (oo qaylinaya): iska qabo gaalyohow gaalka laga soo gooyey.

(Dabadeed seeftii buu degta ku jarayaa) oo halkaasuu Al-Makhsuumi jirjircadka u dhacayaa. Markaasuu soo wilaanwilinayaa. Xamsana intuu kala daba yimaado ayuu darka dushiisa qudhka kaga jarayaa).

Cutba:— (isaga oo qaylinaya oo seefta lulaya) ayaa ii soo baxayaa ayaa ii soo baxaya! Car! ayaa ii soo baxaya! (ciidankii Nebiga ayaa waxa ka soo baxaya seddex Ansaar ah).

Ansaartii:— (iyaga oo qaylinaya): Annaga kuu soo baxayna!

Cutba:— (isaga qaylinaya) oo yaa ahaydeen?

Ansaartii:— (Waa koox Ansaar ah,

Quraysh:— (Ciidankeedii oo wada qaylinaya) idinka idinma baahnin.
Cutba:— (oo dhawaaqaya) Maxamedow! noo soo saar raggii nala sinnaa ee nala dhashay (nimankan Ansaarta ah ayuu yasayaa).
Maxamed:— (isaga oo ka hor yeedhaya waabkii loo dhisay. Haddaanaan Xamsow! Caliyow, Bin Cubeed Xaaritow u baxa ragga. (seddexdii baa loolankii u soo baxaysa).
Cubta:— Waa kuma?
Xamsa:— Waa xamsa Bin Cabdul Mudalib Geesigii Ilaahay iyo Nebigiisa.
Cutba:— Nin ii dhigma dheh! anna waxaan ahay geesigii gaashaan buurta; waa kuma labadaa kula soctaa?
Xamsa:— Cali Bin Abii Daalib iyo Cubeyda BinXaarit.
Cutba:— Laba dardaran oo ii dhigma dheh! Labada aniga ila jirana waa Waliid, inankaygii iyo Shiibah walaalkay. Waliidow soo bax! Shiibow soo bax!
(Cali iyo Waliid baa loollan dhexmarayaa oo laba seefood isweydaarsanaya. Cali oo Waliid kow kaga siinaya. Xamsa iyo Cutbana way isku soo baxayaan oo loollan kulul baa dhexmaraya. Xamsaa Cutba halkaa ku dilayaa.
Cubeyda iyo Shayba oo iyana seefta isu nacay. Shaybaa Cubayda seefta lugta kaga dhufanaya oo muruqa kubka ka dhaawacaya (Cubayda waa nin da'weyn). Xamsa iyo Cali oo Shayba ku soo rogaal celinaya, oo kobtii ku dilaya. Cubeydana soo gaadaya.)
Abuujahal:— (oo qaylinaya). Ku rogaay! Ku rogaay!
Maxamed:— (oo saaxiibadii la hadlaya). Ha weerarina ilaa aad amar iga heshaan. Hadday idin hareereeyaanna gantaasha iskaga dhiciya.

*Aragtida IV.*

(Labadii col oo qun yar iskugu soo dhawaanaya. Qoladii Nebiga ayaa Ciidankii Quraysh gantaal oogta kaga qaadaysa).
Abuubakar:— (isaga qaylinaya). Dadyow muslinka ahi, halku dhiggiinnii ha illaawina «Axad, Axad».
Maaxamed:— (oo waabkiisii ku jira, oo madaxa kor u taagya): Allahayow ma dhintow! Ma baahdow!
Abuubakar:— (isaga oo Nebigii ka daba galaya). Ducadii waa la aqbali; Ilaahayna kugu ballan baajimaayo.
Maxamed:— (Oo Samada eegaya). Allahayow! Hadday intani dhamaato; wax magacaaga soo qaada ma hadhayaan.
Cumar:— (isaga oo waabkii u soo dhawaanaya; waxa aannu la hadlayaa Sacad Bin Macad). Sacad, koox la soo bax oo irridda waabka Nebiga Ilaaliya; waxa aan uga cabsi qabaa in cadowga inoo soo waydaarto.
Abuubakar:— (isaga oo cumar la hadlay oo cod murug iyo naxdin leh ku hadlaya). Cadawgu aad buu inooga badan yahay.
Cumar:— (si xun) seddex laabkeen iyo siyaado.
Maxamed:— (Waabka dhexdiisii ku Allabaryaya). Allahayow jirow joogow! Allahayow, jirow joogow. (Dhawaaq ka soo baxaya safkii Nebiga).
Cumar:— (isaga oo daymoonaya); waa kuma kaasi?
Abuubakar:— (isna daymoonaya) Wallee waa Muhjic oo gantaali ku dhacday.
Cumar:— Eebbe ha kuu naxariisto, Muhjicow! (Dhawaaq kale oo baxay).
Abuubakar:— Eeg kaasina, Xaaris Bin Surraq oo fallaadhi ku dhacday isaga oo darka ka cabbaya.
Cumar:— (isaga oo eegaya). Haa! dhuuntaa leeb kaga dhacay.

Abuubakar:— Raxmadaada Allahayow! Allahayow Raxmaddaada!
Cumar:— Maanta waxa aan ka yaabay in la ina jebiyo.

Maxamed:— (isaga oo Allabaryaya oo dhididku ka da'yo). Allahayow jirow joogow Allahayow jirow joogow! (Wuu fadhiisanayaa isaga oo wadnuhu isgaraacayo).
Cumar:— (si baqdin leh) Bal eeg waxa nebigii haysta.
Abuubakar:— (baaqdin iyo fajac) Aamus! Aamus!
Cumar:— (cod hoose) Alla! Nebigii wuu jidhiidhicooday!
Abuubakar:— (si foorar ah) ha!
Cumar:— Waxa aan ka baqayaa in Colkeenna baqdin gasho.
Abuubakar:— (sidii waxa isla hadlaya) Eebbow gargaarkaaga.
Cumar:— (Waar bal eeg. Ninkaa darafta u baxay ee Dagaalaka isaga tegay ee timirta cunayaa miyaannu Ibn Al-Xamaam ahayn?
Abuubakar:— (isaga oo samada eegaya) Allahayow gargaarkaaga! Allahayow gargaarkaaga!
Maxamed:— (oo qaylinaya sidii wax soo baraarugay) Abuubakarow! buubakarow! Abuubakaeow!
Abuubakar:— Waa i kan! Nebi Allow!
Maxamed:— Abuubakarow! guushii Ilaahay baa timid . Kaasina waa Jibriil (Malag) isaga oo faraskiisii ku jooga oo gosha buurta ka soo dhacaya.
Abuubakar:— (si farxad leh). Oo ma waxyigii baa kugu soo degay?
Maxamed:— Haa!!
Abuubakar:— (Cumar la hadlaya). Bishaaro Cumarow! Bishaaro Muslimiintiiyey!
Maxamed:— (isaga oo u soo baxaya colkii oo qaylinaya) Muslimiitay adkeeya dagaalka!
Muslimiintii:— (iyaga oo qaylinaya cadawgii weerar jac ku siinaya). Axad Axad! Axad.
Maxamed:— (isaga oo qaylinaya). Ilaah naftayda leh baan ku dhaartee, maanta ninka geesinimo u dirira, ee sidaa ku dhintaa, Jannada ayuu galayaa!
Ibn Al-Xamaam:— (oo wali timirtii gacanta ku haysta oo cunaya) Cawada! ayaanka! Aniga iyo Jannada waxba nooma dhexeeyaan; kuwaas oo u dila mooyaane! Aabahay goblan ma intaasaa Jannadii iga xigta! (timirtii buu daadinayaa oo seeftii intuu la soo baxo ayuu dagaal kulul galayaa.
Maxamed:— (colkiisii buu qaylinayaa) Adkeeya! Adkeeya!
Muslimiintii:— (iyaga oo geesinnimo u diriraya oo cod raganimo ku qaylinaya) Axad! Axad! Axad!
Maxamed:— (isaga oo cantoobo ciid ah qaadanaya oo ciidankii quraysh xaggooda u saydhaya). Wajigiin gubay! Wajigiin gubay!
Cumar:— (isaga oo guubaabinaya Mucaawad Bin cafraa iyo cabdiraxmaan Bin Coof) Ibn Cafraayow Abuujahal baan kugu qaybiyey; adna Cabdiraxmaanow Umaya Bin khalaf baan kugu qaybiyey.
maxamed:— (isaga oo asxaabtii ku leh) haddii nin idinka mid ihi la kulmo Cabaas waa in aanu dilin. Maxaa yeelay dagaalka isaga oo aan doonayn ayaa lagu soo qasbay.
Abuu xudayfa:— Cabaas ; Nin Ansaar ah: Haa, Nebiga Adeerkii.
Abuuxudayfah:— (isaga oo asxaabtii la hadlaya) Waxaannu laynayaa aabbayaas-hayo, walaalahayo iyo inamadayadii iyo qaraabadayadii, oo cabaasna daynaa? Waalaahi baan ku dhaartee, haddaan indho ka qaado inaanu carab iyo labo daan isu celin.
Maxamed (colkiisii buu ku qaylinayaa) Adkeeya Adkeeya.
Maxamed:— (isaga oo Cumar la hadlaya). Ma maqlaysaa? (Cumar oo cadho la gariiraya).
Maxamed:— (Cumar ku leh) Xafsa aabaheedow. Ma Rasuulka Ilaahay adeerkiibaa madaxiisa seef lagu dhufanayaa?
Cumar:— (oo cadho is adkayn kari waayey).Rasuul Allow, ii kaadi aan Abuuxudayfa seef kurka kaga jaree. Munaafaq buu noqdee.

Maxamed:— (oo qabanaya). Ha la yaabin Maantaa aabihii lagu dilaye.
Abuubakar:— (Cumar ku leh) Rasuulkaa kaa toosan Cumarow.
Maxamed:— (Xaggii dagaalka iyo muslimiintii buu eegaya). Mitidaay! Mitidaay!
Muslimiintii:— (si xamaasad leh) Axad! Axad!

*Aragtida V.*

(Dagaalkii baa kululaaday. Muslimiintii baa gaaladii ka dhigtay wax ay dilaan iyo wax ay qabtaan. Cabdiraxmaan Bin Coof baa soo qafaashay Umayta Bin khalaf iyo wiilkiisii.)
Cabdiraxmaan Bin Coof:— (isaga oo seeftii kor u taagaya) Ma Umayata Bin Khalaf baa!
Umayta:— Addoon Allow, ha iddilin. Ninka maanta i bixiyaa waxa aan siin doonaa geel caano badan.
Cabdiraxmaan:— (isaga oo dhiniciisa ku arkaya wiilkii Umayata). Kanaa ma wiilkaagiibaa?
Umayata:— (cod taagdaran). Ha dilin!
Cabdiraxmaan:— (isaga oo Umayata iyo wiilkiisii kaxaynaya) i soo raaca oo waxba ha baqannina.
Umayata:— (Waxa uu arkayaa Xamsa oo gaaladii kurka ka guraya). Waar ninkaa baaı gorayga gashaday ee quraysh miidhay waa kuma?
Cabdiraxmaan:— Waa Xamsa Bin Cabdil Al-Mudalib.
Umayata:— Wallee wax xille buu nagu sameeyey. (Bilaal baa arkaya Umayata Bin Khalaf).
Bilaal:— (isaga oo qaylinaya). Gaalada kii ugu weynaa! Umayata Bin Khalaf. Eebbow ha i dayn haddii kaasi noolaado.
Cabdiraxmaan:— (isaga oo kala dhexgalaya Bilaal iyo Umayata). War waxyahow addontu dhashay .
Bilaal:— (isaga oo qaylinaya) Allow ha i dayn hadduu nolaado. (deeto aad buu u sii qaylinayaa). Ansaartiiyeey! Gaalada kii ugu weynaa baa nool. Umayata Bin Khalaf! Wallee intuu noolyahay mo noolaado! (Koox Muslimiin ah ayaa imanaysa oo labadii maxbuus isku xeeraysa. Umayata inankiisii ayaa seef lagu dhufanayaa oo dhacay).
Umayah:— (isaga oo eegaya). Alla! inankaygii.
Cabdiraxmaan:— (oo Umaya la hadlaya): lafahaaga la baxso. Lafahaaga weeye! Wallaahi baan ku dhaartee, waxba anigu ku tari maayo!
Nin Muhaajir ah:— (isaga oo Umaya seeftii la tiigsanaya oo kurka kaga jaraya). Iska qabo gaal yohow gaalka laga soo gooyey.
Bilaal:— (isaga oo farxad la qaylinaya). Waa Ilaahay mahaddii gaalkii gaalada u weynaa baa la dilay.

Cabdiraxmaan:— (isaga oo Bilaal ku leh). Alla jiree magantaydii baad diidday.
Bilaal:— (si xamaasad leh). Axad! Axad!
Mucawad:— (isaga oo Abuu Jahal gaaladii ka dhex raadinaya) Aaway malcuunkii aaway Abuujahal!
Bilaal:— (oo qaylinaya) Waa kaa kali taagan intii kalena cidaadoodii ayaa culaysay.
Mucawad:— (isaga oo xaggii Abuujahal u cararaya, deeto seefta ku dhufanayaa. Abuujahalna dhacayo). Iska qabo gaalyohow.
Abuujahal:— Tolla'ayey! Cigrimow! (Wiilkiisii Cigrime oo u soo gurmanaya, oo Mucawad gacanta jaraya, kana tegaya iyada oo dhinaca ka lulata. Mucawad oo gacan la'aan dagaallamaya, una tegaya Abuujahal oo qiriric leh.
Mucawad:— Ilaahay hoog buu ku baday, gaalyahow!
Abuujahal:— Oo maxa uu hoog igu baday? Nin in la dilo ma ceebaa? Iiga warran yaa maanta guushii raacday.
Mucawad:— Ilaahay iyo Rasuulkii ayaa guushii raacday.

(Abuujahal oo naftu ka baxayso. Mucawad oo madaxa ka jaraya).
Maxamed:— (isaga oo asxaabtii eegaya, iyaga oo maxaabiis badan soo qabtay). Guusha Muslinka ayaa leh.
Sacad:— Maxaabiis bay soo qabanayaan.
Maxamed:— (Isaga oo faraxsan). waa sidaa! waa sidaa!

Sacad:— Eebbaan ku dhaartee anigu! (hadalkii buu ka yar hakaday).
Maxamed:— Wallee, sacadow waxa aad tahay sidii nin aan u bogin qabqabashada gaalada.
Sacad:— Ha jirto. Wallee mar haddii kani yahay jabkii u horreeyey gaalada, qabqabashada laynta ayaa ka jeclaa.
Maxamed:— Eega! Eega! gaaladii cagaha ayey wax ka dayeene!
Mucawad:— (ku soo baxaya Nebiga oo madixii Abuujahal sida).
Rasuul Allow, waa gaalkii, Abuujahal.
Maxamed:— (Si quman). Allaa weyn oo karti iyo xoogba leh.
Mucawad:— Waa run, Alla weyn oo karti iyo xoogba leh. (Si farxad) Ilaahay mooyaane Ilaah kale ma jiro.

Cumar:— Rasuul Allow, guushii gaadhay.
Mucawad:— Gaalada intii hadhayna way baxsadeen.
Sacad:— Miyeynaan maydka gaalada iska aasayn.
Maxamed:— Haa Waa inaynu iska qarinnaa.
(Sacad iyo koox kale oo Muslimiinta ah oo guraya bakhtigii gaalada).
Sacad:— (isaga oo bakhtigii booraan ku guraya). Kani waa bakhtigii Umaya oo dhoofay. Kanna waa bakhtigii Abuujahal oo aan madax lahayn.
Mucawad:— (isaga oo madaxii Abuujahal soo tuuraya). Waa kan madaxii Abuujahal.
Sacad:— Kanna waa Bakhtigii (Abuu-Xudayfa oo taaggaa, bakhtigii aabihii eegaya, isaga oo Murugaysan, midabkiisiina doorsoomay).
Maxamed:— (oo dareemay uurxumaanta Abuu-Xudayfa). Abuu-Xudayfa waxa laga yaabaa in aad geerida aabbahaa ka xuntahay.
Abuu-xudayfa:— (isaga oo madaxa kor u qaadaya). Maya, Rasuul Allow, kama xumi dhimashadiisa, ee waxan aabbahay ku iqiin Caqli dul iyo wanaag. Waxa annan rajeynayey in sidaasi muslinimada ku soo hanuuniso. Haddaba, gaalnimada uu ku dhintay baan ka xumahay.
Maxamed:— Abaa-Xudayfow, Eebbe wanaag ha kuugu abaal mariyo.
cumar:— Miyeynaan Madiina cid u dirayn guusha ugu bishaaraysa?
Maxamed way ila tahay?
Abuubakar:— (Cumar ku leh) Saydi ha tago Madiina oo ha ugu bishaareeyo in Rasuulkii nabad galay, muslimiintina guulaysatay.
Maxamed:— (isaga oo xaggii maydka lagu guray eegaya) kuwaa dhintow, qaraabadii Nebiga kuwa ugu xun baad tihiin. Waad i beeniseen. Waad i erideen dadkiina way i soo dhaweeyeen. Waanay ii gargaareen. Ma ogaateen digniintii Eebe in ay dhab ahayd. anigu waan ogaaday in ballantii Eebbe ii qaaday ay run ahayd.
Sacad:— (isaga oo yaabban). Rasuul Allow, ma waxa aad la hadlaysaa dad dhintay?
Maxamed:— iyaga ayaa idinka maqli og in kasta oo ay bakhti yihiin.

MINISTRY OF EDUCATION, TEXTBOOKPRESS MOGADISHU, 7 /84 - 50.000